Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/0618 /07/2026 Taariikh: 13/07/2026

Ku: Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Muqdisho
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada Muqdisho
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Muqdisho

UJEEDDO: GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA "ISTARAATIIJIYADDA QARAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA (2026-2030).

XRW - [illegible]
22 JUL 2026
OPM - EXIT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **WCAD/XW/3260/06/26** ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka kuna saabsan codsiga soojeedinta **"Istaraatijiyadda Qaran ee La-Dagaalanka Musuq-Maasuqa (2026-2030)";**

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.15.155.07.26** ee **09/07/2026**, kuna saabsan **"Istaraatijiyadda Qaran ee La-Dagaalanka Musuq-Maasuqa (2026-2030)"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Baahida loo qabo ka hortagga musuq-maasuqa, isla-xisaabtanka, fulinta Kormeerka iyo ka qeyb-galka dadweynaha ee guud ahaan Qaranka.

Waxa uu meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.15.155.07.26** ee **09/07/2026**, kuna saabsan **"Istaraatijiyadda Qaran ee La-Dagaalanka Musuq-Maasuqa (2026-2030)"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad:
Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Cadaaladda loo idmaday in ay hirgaliso, meelmarisana **"Istaraatijiyadda Qaran ee La-Dagaalanka Musuq-Maasuqa (2026-2030)"**.

Qodobka 3aad:
Dhaqangal

Go'aanka Golahu waxaa uu dhaqangalaya marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Istaraatiijiyaddanna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of the Minister

SUMMAD: WCAD/XW/3260/06/2026 **Tr: 15/06/2026**

Mudane Ra'iisul Wasaare,

UJEEDDO: SOO-GUDBIN "ISTIRAATIIJIYADDA QARAN EE LADAGAALANKA MUSUQ-MAASUQA 2026- 2030"

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Xukuumadda JFS waxay halkan ku soo gudbinaysaa **"Istiraatiijiyadda Qaran ee Ladagaalanka Musuq-maasuqa 2026-20230"** oo qeyb ka a hawlaha hortabinta u leh Xukuumadda Danqaran ee lagu horumarinayo hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo la-dagaallanka musuqmaasuqa.

Mudane Ra'iisul Wasaare, istiraatiijiyaddan waxay xoojinaysaa hawlaha iyo dadaallada Xukuumadda JFS ee ku aaddan hurumarinta hufnaanta adeegyada guud ee qaranka.

Haddaba, waxaan rajeynaynaa inaad si xushmad leh nooga aqbasho, lana horgeeyo Golaha Wasiirrada si ay u ansixiyaan.

Mahadsanid

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADAALADDA & DASTUURKA
SOMALI FEDERAL REPUBLIC
MINISTRY OF JUSTICE & CONSTITUTION

Mudane: Xasan Macallim Maxamuud Sh. Cali
WASIIRKA WASAARADDAA CADAALADDA IYO ARR. DASTUURKA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS
Og: Xafiiska Agaasinka Golaha Wasiirrada

=Muqdisho=
=Muqdisho=

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EEDAWLADDA

جمهـــــورية الصـــومـــال الفيـــدراليـــة
مكـــتب المحامى العام للـدولة

THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

SUMMAD: XGG/216/2026 **14/6/2026**

ku: Wasaaradda Cadaaladda &Dastuurka **Muqdisho**
ku: Agaasimka Golaha Wasiiradda **Muqdisho**
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS **Muqdisho**

Ujeeddo: Talo Sharci

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, isaga oo tixraacaya warqada summaddeedu tahay **Ref:WCAD/XAWSHH/3237/2026** kuna taariikhaysan 1/6/2026 ,kana soo baxday Wasaaradda cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd **Soo Gudbin "Istaraatiijiyadda Qaran ee la Dagaallanka Musuqmaasuqa (2026-2030**),taasoo hagaysa Qorshayaasha iyo Arrimaha Hortabinta u leh horumarinta Dawlad wanaagga iyo la dagaallanka Musuqmaasuqa.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guude ee Dowladda ka dib markii uu darsay waxaa u soo baxday in ay heshiisyadu waafaqsanyihiin Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda waxa uu soo jeedinayaa in la saxiixi karo Istraatiijiyadan kaddib marka la dhammaystiro Habraaca uu tilmaamayo Xeerka Ra'iisul-wasaaraha Lambarkiisu yahay Lr.125 ee soo baxay 6/04/2023, taas oo macneheedu yahay inay lagama maarmaan tahay in la horgeeyo Golaha Wasiirada si looga ansixiyo.

Allaa Mahad leh.

Avv. Muuse Axmed Ciise
ku-xigeenka GaryaqaankaGuudeeDowladda

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so, archive@sag.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهـــورية الصـــومـال الفيدرالية
وزارة العدل والشـؤون الدستورية
مكـتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

SUMMAD: WCAD/XAWSHH/3237/2026 **Tr. 01/06/2026**

Mudane Garyaqaan;

UJEEDDO: SOO-GUDBIN "ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA (2026–2030)"

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa "Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (2026–2030)" oo hageysa qorshayaasha iyo arrimaha hortebyada u leh horumarinta dawlad-wanaagga iyo la-dagaallanka musuqmaasuqa.

Istiraatijiyaddani waxay qeyb ka tahay qorshaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee 2026 iyo sidoo kale hawlaha mudnaanta u leh Xukuumadda Danqaran ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan istiraatijiyadaha si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

Mudane Xasan Axmed Cali
Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Cadaaladda ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 02/06/2026

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

Dr Munse iyo Hamza
02/06/2026



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA (2026–2030)

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Dastuurka 2026

BAAQ KU AADDAN HUFNAAN, CADAALAD IYO ISLA-XISAABTAN

Hagaya mabaadi'da anshaxa, waajibaadka muwaadinnimo iyo ballan-qaadyada qaran ee Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (2026–2030)

Saldhigga Qur'aan

"إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَنْ تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَى أَهْلِهَا وَإِذَا حَكَمْتُمْ بَيْنَ النَّاسِ أَنْ تَحْكُمُوا بِالْعَدْلِ إِنَّ اللَّهَ نِعِمَّا يَعِظُكُمْ بِهِ إِنَّ اللَّهَ كَانَ سَمِيعًا بَصِيرًا"
سورة النساء، الآية 58.

"Eebe wuxuu idin fari inaad u guddaan (u celisaan) amaanada ehelkeeda, haddaad kala xukumaysaan dadkana inaad ku kala xukuntaan cadaalad, Eebbe waxa wanaagsan wuu idinku waaninayaa Eebana waa Maqle Arka"

Qur'aanka Kariimka 4:58

Sunnada Nabiga

كُلُّكُمْ رَاعٍ وَكُلُّكُمْ مَسْؤولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ

"Qof kasta oo idinka mid ahi waa ilaaliye (mas'uul), qof kastana wuxuu mas'uul ka yahay waxa uu ilaaliyo (u xilsaaran yahay)"

Nebi Muxammad (NNKH) — Saxiix Al-Bukhaari iyo Saxiix Muslim

Hoggaanka Qaran

"Dawladdu waxay bilowday kacaan lagu ciribtirayo musuq-maasuqa laguna horumarinayo hufnaanta iyo isla-xisaabtanka. Musuq-maasuqu waa cudurka ugu xun ee saameeya bulshadeenna iyo dawladda. Wuxuu keenaa in si liidata loo adeegsado kheyraadka dalka iyo hoos-u-dhac ku yimaad dakhliga dawladda."

Mudane Xamse Cabdi Barre, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, 18 Diseembar 2022

Ballan-qaadka Wasaaradda

"Waxaan ku talo jirnaa in aan Soomaaliya ka saarno liiska dalalka ugu liita ee uu saameeyo musuq-maasuqu"

Mudane Xasan Macallin Maxamuud Sheekh Cali, Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Kulanka Ansixinta,

15 Abriil 2026

Mabaadi'dan iyo ballan-qaadyadani waxay u qaabeynayaan la-dagaallanka musuq-maasuqa in uusan keliya noqon ajande siyaasadeed, **balse sidoo kale uu noqdo amaano anshaxeed, waajib dadweyne iyo mas'uuliyad qaran.**

TUSMO

LIISKA JADWALLADA v

LIISKA JAANTUSYADA v

KOOBNIIN vi

CUTUBKA KOWAAD GOGOL-DHIG 1

1.1 Hordhac 1

1.2 Sababta iyo Ujeeddada Istiraatijiyadda 2026–2030 3

1.3 Habka Horumarinta Istiraatijiyadda 4

1.4 Baaxadda Istiraatijiyadda 5

1.5 Qaab-dhismeedka Istiraatijiyadda 5

CUTUBKA LABAAD FALANQEYNTA XAALADDA EE ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 6

2.1. Hordhac 6

2.2. Xaaladda La-dagaallanka Musuq-maasuqa Iyo Jihada uu Hadda Ku Socdo 6

2.3. Qiimeynta Xaaladda Dalka (Environmental Scan) 9

2.3.1 Qiimeynta Xaaladda Guud ee Dalka (Macro Environment) 10

2.3.2 Qiimeyn Gaar ah (Microenvironment) 12

2.4. **Falaqeynta Daneeyeyaasha** 14

2.5. Qiimeyn Tiirarka Qaab-dhismeedka ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 16

2.5.1 Dib-u-habayn Sharci iyo Siyaasadeed 16

2.5.2 Maamulka Guud iyo Qaab-dhismeedka Hay'adaha Dawladda 18

2.5.3 Fulinta, baarista, iyo waxtarka garsoorka 20

2.5.4 Nidaamyada hufnaanta iyo isla-xisaabtanka 21

2.5.4. Ka-qeyb-galka dadweynaha iyo rabitaanka siyaasadeed 23

2.6. **Sababaha Asaasiga ah, Caqabadaha isku-dhafan iyo Fursadaha** 24

2.7. Saameynta ay ku leeyihiin naqshadeynta istiraatijiyadda ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 25

2.8. **Is-barbar-dhigga tilmaameyaasha muhiimka ah iyo Shaxda tallaabooyinka hortebyada leh** 27

2.8. Isku-tiirsanaanta Tiirarka iyo Khariidadda Faro-gelinnada Hortebyada iyo Mudnaanta leh 29

CUTUBKA SADDEXAAD 32

JIHADA ISTARAATIJIYADEED 32

3.1. Hordhac 32

3.2. Aragti iyo Himmillo 32

3.3. Qiyamka Asaasiga ah 32

3.4. Mabaadi'da Hagaya 33

3.5. Yoolka Istiraatijiyadeed 33

3.6. Baaq xooggan 33
3.7. Tiirarka iyo Arrimo Istiraatijiga Ah 33
3.6.1. Tiirka 1 – Qaab-dhismeed Sharci iyo Siyaasadeed 34
3.6.2. Tiirka 2– Qaab-dhismeedka Maamulka Iyo Hay'adaha Dawladda 34
3.6.3. Tiirka 3 – Fulin, Baaris iyo Waxtarka Garsoorka 35
3.6.5. Tiirka 5 – Ka-qeyb-galka Dadweynaha iyo Rabitaanka Siyaasadeed 36
CUTUBKA AFRAAD UJEEDDOOYIN ISTARAATIJIYEED, ISTIRAATIJIYAD IYO HAWLO 37
4.1. Hordhac 37
4.2. Ujeeddooyin Istiraatijiyadeed, Istiraatijiyad iyo Hawlo 37
4.3. Aragtida Isbeddelka 39
CUTUBKA SHANAAD 41
HIRGELIN, KORMEER IYO QIIMEYN 41
5.1 HORDHAC 41
5.2 QAAB-DHISMEEDKA HIRGELINTA 41
5.2.1 HANNAANKA HIRGELINTA 41
5.2.2 Hab-raacyada Hirgelinta 42
5.3 Hannaanka Iskuduwidda 43
5.3.1 Heerka Hoggaanka 44
5.3.2 Heerka Farsamada 44
5.3.3 Xoghaynta WCAD 45
5.3.4 Doorka Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa ee Heerka Farsamada 45
5.3.5 **Wasaaradaha, Waaxyaha, Hay'adaha madax-bannaan (MDAs), Dawlad-goboleedyada** 45
6.1 Daba-gal iyo Qiimeyn 47
6.1.2 Daba-gal 47
6.1.3 Qiimeyn 48
6.2 Warbixin iyo La-xisaabtan 48
6.3 **Maareynta Xogta iyo Nidaamka Daba-galka iyo Qiimeynta** 49
6.4 Maareynta Khatarta 49
6.5 Xiriirka iyo ka-qeyb-galka Daneeyeyaasha 50
6.6 **Habka Dib-u-eegista iyo Wax-ka-barashada** 50
Lifaaqyo 52
Lifaaq 1: ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 Jadwalka Kharashka, Hirgelinta, Daba-galka iyo Qiimeynta. 52

LIISKA JADWALLADA

Jadwalka 1: Siyaasad, Dhaqaale, Bulsho, Teknoolojiyad, Deegaan, iyo Sharci (PESTEL) 10
Jadwalka 2: Falanqaynta SWOT ..... **Error! Bookmark not defined.**
Jadwalka 3: Falaqaynta Danayeyaasha..... 14
Jadwalka 4: Muuqaal guud oo is-barbar-dhig ah oo ku saabsan heerka xaaladda, caddeymaha, iyo tallaabooyinka mudnaanta leh ee tiirarka..... **Error! Bookmark not defined.**
Jadwalka 5: Ujeeddooyinka Istiraatijiyadeed, Istiraatijiyadaha, iyo Hawlaha .....**Error! Bookmark not defined.**
Jadwalka 6: Qiyaasta baahiyaha kheyraadka maaliyadeed 46
Jadwalka 7: Khataraha iyo Tallaabooyinka Yareynta..... 49

LIISKA JAANTUSYADA

Jaantuska 1: Khariidadda isku-xirnaanta tiirarka Istiraatijiyadda iyo meelaha mudnaanta leh ee hawl-gelinta 31
Jaantuska 2: Muujinaya ajandaha isbeddelka ee Qorshaha Istiraatijiga ah 2026–2030..... 34
Jaantuska 3: Aragtida Isbeddelka ee ISTIRAATIJIYADDA (2026–2030) 40
Jaantuska 4: Qaab-dhismeedka Iskuduwidda Hirgelinta ISTIRAATIJIYADDA 2026-2030 ..... **Error! Bookmark not defined.**

KOOBNIIN

Musuq-maasuqu weli wuxuu ka mid yahay khatartaha ugu daran ee hortaagan dawlad-dhiska, kalsoonida dadweynaha, cadaaladda, bixinta adeegyada iyo horumarka waara ee Soomaaliya. Musuqu wuxuu daciifiyaa hay'adaha, leexiyaa qoondaynta iyo adeegsiga kheyraadka dadweynaha, wiiqaa kormeerka iyo isla-xisaabtanka, isla markaana wuxuu dhaawacaa kalsoonida lagu qabo dawladda. **Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (ISTIRAATIJIYADDA) 2026–2030** waxaa loo diyaariyey ka-jawaabidda caqabaddan, si ay u noqoto hannaan qaran oo looga hortago, lagu ogaado, laguna wajaho musuq-maasuqa iyadoo la adeegsanayo sharciyo, hay'ado, nidaamyo, kormeer iyo ka-qeyb-gal dadweyne oo xoogan.

Istiraatijiyaddan waxay ku dhisan tahay geedi-socod wada-tashi oo caddeymo ku saleysan. Waxay ka duulaysaa **Dib-u-eegista la sameeyey ka dib dhammaadka muddadii Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa 2020–2023**, **Qiimeynta Qaran ee khatarta Musuq-maasuqa 2025, qiimeynta Soomaaliya ee hoos timaadda Heshiiska Qaramada Midoobay ee Ka-hortagga Musuq-maasuqa (UNCAC) ee Hannaanka Dib-u-eegista Hirgelinta Wareegga 1aad, 2026** dib-u-eegis lagu sameeyey sharciyada iyo siyaasadaha sharci ee khuseeya arrintan, iyo wada-tashiyo ballaaran oo lala yeeshay daneeyeyaasha sida hay'adaha Dawladda Federaalka, Dawlad-goboleedyada, hay'adaha kormeerka, bahda cadaaladda, bulshada rayidka, jaamacadaha, hay'adaha gaarka loo leeyahay, iyo bah-wadaagta horumarinta. Istiraatijiyaddani waxay sidoo kale ka turjumaysaa talooyinka iyo aragtiyaha ka soo baxay wada-tashiyadii iyo hab-raacyadii ansixinta, taasoo ka caawinaysa in ay si habboon uga jawaabto xaqiiqooyinka maamul ee Soomaaliya iyo baahiyaha hirgelinta.

Caddeymaha la falanqeeyey waxay muujinayaan in Soomaaliya - inkastoo ay sameysay horumar muhiim ah oo ku saabsan maareynta maaliyadda guud, hanti-dhawrka dibadda, dib-u-habaynta qaar ka mid ah hay'adaha iyo nidaamyada dhijitaalka ah sida raad-raaca nidaamka mushaar-bixinta iyo qaan-sheegta - haddana daldaloollo waaweyn oo la xiriira la-dagaallanka musuq-maasuqa ayaa weli taagan. Hirgelintii istiraatijiyaddii hore ma ahayn mid isku dheelli-tiran, Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa ma uusan hawl-gelin, dib-u-habaynno sharci oo muhiim ah ayaa dib u dhacay, nidaamyada la-dagaallanka musuq-maasuqa ee heerarka Dawlad-goboleed iyo degmooyin ayaa weli ah kuwo taag-daran. Qiimeynta Qaran ee Khatarta Musuq-maasuqa iyo warbixinnada hanti-dhawrku waxay sidoo kale muujinayaan taag-darri joogta ah oo ka jirta ilaalinta wargeliyaha musuq-maasuqa (whistle-blowers) iyo markhaatiyaasha, shaacinta hantida iyo xaqiijinteeda, nidaaminta iska-hor-imaadka danaha, qorsheynta iibka, baaxadda hanti-dhawrka gudaha, warbixinta dadweynaha, maareynta cabashooyinka, iyo awoodda fulinta. Horumarrada dastuurka ee 2026 ee Soomaaliya, oo ay weheliyaan natiijooyinka Dib-u-eegista Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-dagaallanka musuq-maasuqa (UNCAC), waxay hadda bixinayaan fursad muhiim ah oo lagu xoojin karo saldhigyada sharci iyo hay'adeed ee dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa shanta sano ee soo socota.

Sidaa darteed, Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (ISTIRAATIJIYADDA) 2026–2030 waxaa loo qaabeeyey in Soomaaliya laga raro dadaallada kala qoqoban ee ku salaysan hawlo gaar ah loona wareejiyo hannaan mideysan, caddeymo ku salaysan, hay'ado ku dhisan, isla markaana natiijooyin diiradda saaraya oo la-dagaallanka musuq-maasuqa ah. Higsigeedu waa bulsho ay hoggaaminayaan anshax iyo hufnaan, yoolkeeda istiraatijiga ahna waa in la yareeyo lagana hortago musuq-maasuqa iyadoo la xoojinayo, hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka dhammaan heerarka dawladda iyo bulshada. Istiraatijiyaddu waxay aqoonsan tahay in la-dagaallanka musuq-maasuqu uusan ahayn ajande gooni u taagan, balse uu si dhow ula xiriiro guud ahaan arrimaha hortebyada u leh geeddi-socodka dawlad-dhiska oo ay ka mid yihiin dib-u-habaynta bahda cadaaladda, maamulka dadweynaha, maareynta maaliyadda guud, bixinta adeegyada, iskuduubnida nidaamka federaalka, kalsoonida muwaadiniinta, iyo maamulidda mas'uuliyadda ku saleysan ee kheyraadka Qaran.

Si loo habeeyo ka-jawaabidda qaran, istiraatijiyaddu waxay ku dhisan tahay shan tiir oo is xoojinaya. **Tiirka Kowaad** wuxuu diiradda saarayaa qaab-dhismeedka sharci iyo siyaasadeed, oo ay ku jiraan xoojinta sharciyada la-dagaallanka musuq-maasuqa, waafajinta waajibaadka caalamiga ah, iyo daboolidda daldaloollada hawl-gal ee muhiimka ah sida ilaalinta wargeliyaha musuq-maasuqa, ku-dhawaaqista hantida, iska-hor-imaadka danaha, iyo helitaanka xogta. **Tiirka Labaad** wuxuu la tacaalayaa maamulka guud iyo qaab-dhismeedka hay'adaha, isagoo xaqiijinaya in la dhiso hay'ado lagu kalsoonaan karo, shaqeynaya oo saldhig sharci leh, hannaanka iskuduwiddana la xoojiyo, isla markaana si tartiib tartiib ah loo gaarsiiyo nidaamyada la-dagaallanka musuq-maasuqa heer federaal iyo heerarka ka hooseeya. **Tiirka Saddexaad** wuxuu diiradda saarayaa fulinta, baarista iyo waxtarka garsoorka, oo ay ku jiraan iskuduwidda hay'adaha, awoodda baarista iyo falanqeynta dembiyada, dacwad-oogista, go'aan-gaarista maxkamadaha, ka-jawaabista dembiyada maaliyadeed, iyo ciqaabo munaasab ah. **Tiirka Afaraad** wuxuu ka shaqeynayaa nidaamyada hufnaanta iyo isla-xisaabtanka iyadoo loo marayo xakameyn gudaha ah, barnaamijyada anshaxa, hanti-dhawrka gudaha, hufnaanta iibka, maareynta khatarta musuq-maasuqa, iyo nidaamyo wax-ku-ool ah oo kormeer iyo qiimeynba leh. **Tiirka Shanaad** wuxuu kor u qaadaa ka-qeyb-galka dadweynaha iyo ballan-qaadka siyaasadeed iyadoo la xoojinayo wacyi-gelinta, ka-qeyb-galka muwaadiniinta, marinno ammaan ah ee warbixineed, ka-qeyb-galka warbaahinta iyo bulshada rayidka, iyo hoggaan muuqda oo taageera dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa.

Istiraatijiyaddu waxay aqoonsanaysaa dhawr mudnaan oo isla-falgelaya iyadoo loo fulinayo hab marxalado ah. Waxaa ka mid ah xoojinta saldhigyada sharci iyo hay'adeed xilli hore; hagaajinta hufnaanta iibka iyo la-socodka qandaraasyada; kordhinta baaxadda hanti-dhawrka gudaha iyo daba-galka natiijooyinka hanti-dhawrka; xoojinta daahufnaanta adeegyada iyo hababka cabashooyinka; hagaajinta iskuduwidda hay'adaha kala duwan ee kormeerka, cadaaladda iyo fulinta; iyo horumarinta hannaan daba-gal dacwado oo la isku halayn karo lana xiriira noocyada musuq-maasuqa khatarta sare leh sida musuq-maasuqa iibka, khiyaanada mushaar-bixinta, leexsashada dakhliga, heshiisyada sharci-darrada ah, iyo laaluushka bixinta adeegyada. Istiraatijiyaddu waxay sidoo kale aqoonsanaysaa baahida loo qabo in diiradda la saaro qeybaha iyo hawlaha khatarta sare leh, oo ay ku jiraan iibka iyo qandaraasyada, ururinta

dakhliga, maamulka mushaarka iyo shaqaalaha, bixinta adeegyada dadweynaha, kaalmada caalamiga, iyo silsiladda cadaaladda iyo fulinta.

Hirgelinta Istiraatijiyaddu waxay raacaysaa hab maareyneed ku salaysan natiijooyin. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ayaa bixinaya hoggaaminta istiraatijiyadeed ee guud, halka qaab iskuduwid heerar kala duwan leh uu taageerayo kormeer, iskuduwid farsamo, warbixin iyo hirgelin. Habkan waxa uu ka koobnaanayaa Guddiga Kormeerka Qaran qeybtiisa iskuduwidda farsamo, Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, oo ah xoghaynta dhexe iyo Xarunta Warbixinta, Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa oo door talo-bixin farsamo iyo taageero u-hoggaansanaan leh, iyo Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha fulinaya, Dawlad-goboleedyada, iyo qaab-dhismeedyada degmooyinka. Istiraatijiyaddu waxay sidoo kale bixinaysaa qorsheyaal shaqo oo Sanadle ah, waafajinta qorsheynta iyo hannaanka miisaaniyadda qaran, warbixin mideysan, kormeer iyo qiimeyn dhexe, iyo dib-u-eegis waxqabad oo joogto ah.

Qiyaasta kharashaadka maaliyadeed ee loo baahan yahay si loo hirgeliyo **ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxaa lagu qiyaasay** US$ 11.06 milyan muddada shanta sano ah. Maal-gelintu waxay u baahannaanaysaa isku-darka qoondaynta kheyraadka gudaha ah iyo taageero ka timaadda bah-wadaagta horumarinta. Hay'adaha fulinaya ayaa sidoo kale laga filayaa inay aqoonsadaan baahiyahooda kheyraad, u qareemaan qoondayn miisaaniyadeed, isla markaana hubiyaan in dhaqaalaha la heli karo loo adeegsado si hufan oo daah-furan. Kormeerka iyo qiimeyntu waxay ku salaysnaanayaan qaab wax-ku-ool ah oo diiradda saaraya natiijooyinka, iyadoo la isku darayo xog tiro iyo tayaba leh, oo ay ku jiraan kormeer bille iyo saddex biloodle ah, warbixin sanadle ah, qiimeyn bartamaha muddada istiraatijiyadda, qiimeyn dhammaadka muddada, iyo dib-u-eegisyo mawduucyo gaar ah marka loo baahdo.

Marka la gaaro 2030, Istiraatijiyaddu waxay higsanaysaa inay ka qeyb-qaadato dhisidda qaab xeereed oo la-dagaallanka musuq-maasuqa oo xooggan isla markaana mideysan, hay'ado dawladeed oo lagu kalsoonaan karo lalana xisaabtami karo, qabashada garsoor ee wax-ku-oolka ah ee dacwooyinka musuq-maasuqa, nidaamyo anshax iyo kormeer oo hay'adeysan, iyo ka-qeyb-gal muwaadiniin iyo kalsooni dadweyne oo sii xoogeysta. Ugu dambayn, ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxaa loogu talo-galay in ay noqoto madal qaran oo lagu ilaaliyo kheyraadka dadweynaha, lagu xoojiyo isla-xisaabtanka, lagu kordhiyo kalsoonida dawladda, laguna horumariyo himmillooyinka ballaaran ee Soomaaliya ee cadaaladda, dawlad-wanaagga, iyo dib-u-cusboonaysiinta Qaran.

ORAAHDA RA’IISUL WASAARAHA

Musuq-maasuqu waa caqabad weyn oo hortaagan cadaaladda, dawlad-wanaagga, kalsoonida dadweynaha, iyo gaaritaanka horumar waara ee Soomaaliya ka hirgala. Wuxuu daciifiyaa hay’adaha, leexiyaa awoodda iyo kheyraadka, wiiqaa bixinta adeegyada, isla markaana dhaawacaa kalsoonida lagu qabo dawladda. Iyadoo Soomaaliya ay horumarinayso ajendaheeda isbeddelka qaran, wax-ka-qabashada musuq-maasuqu waxay udub-dhexaad u tahay dawlad-dhiska, soo-kabashada dhaqaalaha, iyo maamul isla-xisaabtan leh.

Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (2026–2030) waxay muujinaysaa ballan-qaadka wax-ka-qabashada musuq-maasuqa si dhammeystiran oo waara. Waxay ka turjumaysaa ka-go’naanshaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee xoojinta hufnaanta hay’adaha dawladda iyo hubinta in nidaamyada maamulka ay u adeegaan shacabka Soomaaliyeed si ku saleysan cadaalad, hufnaan iyo isla-xisaabtan.

Istiraatijiyaddani waxay bixinaysaa qaab cad oo waxqabad ah, iyadoo diiradda saaraysa xoojinta hay’adaha, hagaajinta isla-xisaabtanka, kor-u-qaadista fulinta, iyo dhiirri-gelinta dhaqan ku dhisan hufnaan. Waxay hagaysaa dadaalladeenna wadajirka ah ee looga hortagayo musuq-maasuqa iyo hubinta maareyn mas’uuliyad ku dhisan ee kheyraadka dadweynaha oo ah in ay danaha guud u adeegto.

La-dagaallanka musuq-maasuqu wuxuu u baahan yahay wax ka badan siyaasad. Wuxuu u baahan yahay hoggaan, iskuduwid, iyo mas’uuliyad wadajir ah. Istiraatijiyaddan waxay qaadatay hab ay u dhan yihiin guud ahaan dawladda iyo bulshada. Hay’adaha dawladda, Dawlad-goboleedyada, hay’adaha kormeerka, bahda cadaaladda, bulshada rayidka, hay’adaha gaarka ah, warbaahinta, iyo muwaadiniintu dhammaantood waxay door ku leeyihiin ilaalinta hufnaanta iyo diidmada musuq-maasuqa nooc kasta oo uu leeyahay.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay mar kale adkaynaysaa ballan-qaadkeeda ku aaddan ajendahan qaran. Waxaa naga go’an in aan ilaalino kheyraadka dadweynaha, xoojino isla-xisaabtanka, oo aan dhisno hay’ado kasbada oo ilaaliya kalsoonida dadweynaha. Waxaan ku boorrinayaa dhammaan hay’adaha iyo muwaadiniinta in ay taageeraan hirgelinta Istiraatijiyaddan si ku qotanta midnimo, mas’uuliyad iyo go’aan adag.

Iyadoo la muujinayo dadaal joogto ah iyo ka-go’naansho wadajir ah, waxaan xoojin karnaa kalsoonida dadweynaha, adkayn karnaa sarreynta iyo talinta sharciga, isla markaana dhisi karnaa Soomaaliya oo cadaalad iyo barwaaqo ah.

Mudane Xamse Cabdi Barre
RA’IISUL WASAARAHA,
XUKUUMADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

FARRIINTA WASIIRKA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

Waxaan ku faraxsanahay in aan soo bandhigo Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (2026–2030), oo bixinaysa qaab cad oo hagaya dadaallada Soomaaliya ee ka-hortagga iyo wax-ka-qabashada musuq-maasuqa shanta sano ee soo socota.

Istiraatijiyaddan waxay ka dhalatay hannaan habaysan, loo dhan yahay, oo ku saleysan caddeyn, oo ay hoggaaminayso Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. Waxay ku dhisan tahay Dib-u-eegista Dhammaadka Muddada ee Istiraatijiyaddii hore ee Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (2020–2023), Qiimeynta Qaran ee Khatarta Musuq-maasuqa 2025, talooyinka ka soo baxay dib-u-eegista Soomaaliya ee UNCAC, iyo wada-tashiyo ballaaran oo lala yeeshay daneeyeyaasha guud ahaan dawladda iyo bulshada. Dadaalladan waxay qoto-dheereeyeen fahamkeenna ku saabsan khatarta musuq-maasuqa ee Soomaaliya, waxayna naga caawiyeen in aan aqoonsano hortebyeyn dib-u-habayn oo waaqica ka turjumaya.

Waxaan ka faa'iidaysannay ka-qeyb-galka firfircoon ee hay'adaha Dawladda Federaalka, Dawlad-goboleedyada, hay'adaha kormeerka iyo isla-xisaabtanka, garsoorka, hay'adaha sharci fulinta, bulshada rayidka, jaamacadaha, iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay. Ka-qeyb-galkooda ayaa xaqiijiyey in Istiraatijiyaddani ay ka turjumto xaqiiqooyinka hay'adaha iyo filashooyinka shacabka Soomaaliyeed.

Istiraatijiyaddu waxay qaadatay hab dheelli-tiran oo hore-u-socod ah. Waxay diiradda saaraysaa xoojinta ka-hortagga, kor-u-qaadista fulinta iyo isla-xisaabtanka, hagaajinta iskuduwidda, iyo dhiirri-gelinta ka-qeyb-galka dadweynaha. Waxay ujeeddadeedu tahay inay wax ka qabato caqabadaha jira isla markaana dhisto nidaamyo sii waariya muddo fog hufnaanaata iyo isla-xisaabtanka.

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ayaa isku dubbariday diyaarinta Istiraatijiyaddan waxayna fududeysay wada-xaajoodka daneeyeyaasha. Guusheedu waxay ku xirnaanaysaa iskaashi joogto ah, ka-go'naansho, iyo doorar cadcad oo ay yeeshaan dhammaan hay'adaha. Xoojinta iskuduwidda iyo hubinta hirgelin wax-ku-ool ah ayaa lama-huraan u ah in la gaaro natiijooyin waara.

Waxaan si mudnaan leh ugu mahad-celinaynaa dhammaan hay'adaha iyo bah-wadaagta ka qeyb-qaatay geeddi-socodkan qaran, oo ay ku jiraan hay'adaha kormeerka iyo cadaaladda, Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha, bulshada rayidka, iyo daneeyeyaasha kale ee ka qeyb-qaatay kor-u-qaadista tayada iyo habboonaanta Istiraatijiyaddan.

Istiraatijiyaddani waxay muujinaysaa ballan-qaadkeenna qaran ee ku aaddan hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo dawlad-wanaagga Soomaaliya. Wasaaradda waxaa ka go'an taageeridda hirgelinta istiraatijiyadda iyo la-shaqeynta si dhow dhammaan daneeyeyaasha si loo gaaro ujeeddooyinkeeda.

Mudane Xasan Macallin Maxamuud Sheekh Cali
WASIIRKA WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA
XUKUUMADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

CUTUBKA KOWAAD
GOGOL-DHIG

1.1 Hordhac

Musuq-maasuqu weli waa mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee joogtada ah ee hortaagan dawlad-dhiska, kalsoonida dadweynaha, bixinta adeegyo wax-ku-ool ah, iyo horumar waara ee Soomaaliya. Wuxuu wiiqaa isla-xisaabtanka iyo hufnaanta hay'adaha, daciifiyaa wax-ku-oolnimada hanti-dhawrka dibadda iyo gudaha, leexiyaa qoondaynta kheyraadka dadweynaha, isla markaana dhaawacaa kalsoonida muwaadiniinta ee dawladda. Musuq-maasuqu wuxuu si wadajir ah u saameeyaa fal-galka maalinlaha ah ee u dhexeeya muwaadiniinta iyo hay'adaha dawladda, iyo sidoo kale sida guud ee ay u shaqeeyaan nidaamyada dawladda, oo ay ka mid yihiin maaliyadda guud, iibka, maamulka kheyraadka aadanaha, bixinta cadaaladda, iyo kormeerka.

Iyadoo la aqoonsanayo caqabadahan, Xukuumadda Jamuhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay dejisay oo hirgelisay Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (ISTIRAATIJIYADDA) 2020–2023, taasoo ahayd qaab-dhismeedkii istiraatijiyadeed ee ugu horreeyey ee dalka looguna talo-galay ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa iyadoo la adeegsanayo hannaan qaran oo iskuduwan. Istiraatijiyaddaasi waxay ujeeddadeedu ahayd xoojinta hoggaanka iyo isla-xisaabtanka, adkaynta hufnaanta iyo awoodda hay'adaha muhiimka ah, ilaalinta kheyraadka dadweynaha, dhiirri-gelinta maamulka dadweynaha ee ku salaysan karti iyo muteysi, iyo kobcinta dabciga bulshada ee diida musuq-maasuqa. Guulo muhiim ah ayaa la diiwaan-geliyey muddadii hirgelinta, oo ay ku jiraan ballaarinta wada-hadallada la-dagaallanka musuq-maasuqa, ku-biirista heshiisyada caalamiga ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa, horumar laga sameeyey qaar ka mid ah hab-raacyada hay'adaha, horumar laga gaaray adeegsiga tiknoolojiyadda ee nidaamyada canshuuraha iyo kastamyada, dejinta xeerarka anshaxa ee qeybo ka mid ah hay'adaha dawladda iyo dib-u-habayn lagu sameeyey maamulka shaqaalaha rayidka.

Isla mar ahaantaana, Dib-u-eegistii Dhammaadka Muddada ee Istiraatijiyadda hore ee la-dagaallanka musuq-maasuqa (ISTIRAATIJIYADDA 2020–2023) waxay muujisay in horumarka hirgelintu uusan ahayn mid isku dheelli-tiran, dib-u-habayno badan ay ahaayeen kuwo qeyb ahaan la gaaray, isla markaana tallaabooyin muhiim ah oo badan ay weli yihiin kuwa aan dhammeystirnayn. Daldalloolada ugu weyn waxaa ka mid ahaa hawl-gelin la'aanta Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa, dib-u-dhacyada dib-u-habaynta xeereed, daciifnimada ka jirta hay'adeynta nidaamyada la-dagaallanka musuq-maasuqa ee heerarka Dawlad-goboleed iyo degmo, xaddidaadda hababka cabashooyinka iyo warbixinta dadweynaha, hannaanka iskuduwidda hay'adaha oo liidata, maqnaanshaha qaab kormeer iyo qiimeyn oo xooggan, awoodda baaritaannada iyo falanqeynta dembiyada oo aan isku filnaansha laga gaarin, dib-u-habaynta adeegga rayidka oo aan dhammeystirnayn, wacyi-gelinta dadweyne oo hooseysa, iyo cadaadisyo amni oo soo noqnoqda oo xaddiday sii socoshada dib-u-habaynta.

Dhanka kale, Qiimeynta Qaran ee Khatarta Musuq-maasuqa (NCRA) ayaa muujisay caddeymo dheeraad ah oo muujinaya u-nuglaanta musuq-maasuqa ee ka jira nidaamyada sharci, hay'adeed, maamul iyo kormeer ee Soomaaliya. Qiimeyntu waxay iftiimisay daciifnimo ka jirta qaab-dhismeedka dembiyeynta iyo fulinta, gaabis ka jira ilaalinta wargeliyaha musuq-maasuqa iyo markhaatiyaasha, dhammeystir la'aanta xeerarka iska-hor-imaadka danaha iyo maareynta hadiyadaha, madax-bannaanida garsoor oo tabar yar marka la eego fulin ahaan, takhasus xaddidan oo ku saabsan garsoorka dacwooyinka musuq-maasuqa, taag-darri ka jirta xeerarka iibka, heer aan ku filnayn oo dhijitaaleyn iyo xakameyn maaliyadeed ah, iyo habab kooban oo loogu talo-galay ka-qeyb-galka dadweynaha iyo hufnaanta qeybta gaarka loo leeyahay. Marka laga hadlayo shaacinta hantida, si kastaba, qaab-dhismeedka Wax-ka-beddelka Dastuurka ee 2026 waa in hadda lala akhriyaa Istiraatijiyaddan, maadaama uu soo bandhigay qodobbo dastuuri ah oo la xiriira arrintan kuwaasoo noqonaya saldhig muhiim ah oo loogu talo-galay hirgelinta mustaqbalka ee dhinacyada sharci iyo hay'adeed. Gaar ahaan, qodobbada dastuurka ee dib-u-eegista lagu sameeyey waxay dhigayaan madax-bannaanida dastuuriga ah iyo waajibaadka kormeer ee Xafiiska Hanti-dhawrka Guud (Qodobka 177), Wax-ka-beddelku wuxuu xoojinayaa doorka Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (Qodobka 152) ee ku jira qaab-dhismeedka hay'adaha dawladeed ee madaxa-bannaan. Sidaas awgeed, Istiraatijiyaddan waxay la jaan-qaadaysaa falanqeynteeda sharci iyo hay'adeed isbeddelladan dastuuriga ah, oo ay ku jiraan qodobbo la xiriira shaacinta hantida, kormeerka, iyo fulinta la-dagaallanka musuq-maasuqa.

Natiijooyinkan waxaa sii xoojinaya dib-u-eegista Wareegga 1aad ee Hab-raaca Dib-u-eegista Hirgelinta Heshiiska Caalamiga ah ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (UNCAC IRM) ee Soomaaliya, taasoo xaqiijinaysa in Soomaaliya ay samaysay horumar muhiim ah oo ku saabsan dhisidda qaab-dhismeedka la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo ka-hortagga lacag-dhaqidda, isla markaana tilmaamaysa daldaloollo waaweyn oo dhinaca hirgelinta iyo sharciga ah oo weli xaddidaya wax-ku-oolnimada. Dib-u-eegistu waxay xustay daciifnimo ka jira dembiyeynta qaar ka mid ah falalka musuq-maasuqa, maqnaanshaha tallaabooyin wax-ku-ool ah oo lagu ilaaliyo markhaatiyaasha, khubarada, iyo wargeliyeyaasha, xaaladda hawl-gelin la'aan ee Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa, iskuduwid aan ku filnayn oo u dhexeysa hay'adaha, xaddidnaata xog nidaamsan oo ku saabsan musuq-maasuqa, fulin tag-daran oo ku saabsan dembiyada ku xusan Heshiiska Caalamiga ah ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa, iyo baahida loo qabo xoojinta hababka iskaashiga caalamiga ah. Natiijooyinkani waxay bixiyaan hal-beeg caalami ah oo muhiim ah, waana in lala akhriyaa Dib-u-eegistii Dhammaadka Muddada ee Istiraatijiyadda hore iyo NCRA marka la dejinayo mudnaanta wareegga xiga ee istiraatijiyadda.

Iyadoo laga duulayo xaaladdan, ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 ayaa la diyaariyey. Istiraatijiyaddu waxay ku dhisan tahay casharradii laga bartay wareeggii hore ee istiraatijiyadda, waxayna ka jawaabaysaa khataraha lagu aqoonsaday habka qiimeynta qaran, waxayna ku darsanaysaa natiijooyinka dib-u-eegista UNCAC ee Soomaaliya, iyadoo sidoo kale ka turjumaysa wada-tashiyo ballaaran oo lala yeeshay daneeyeyaasha dawladeed iyo kuwa aan-dawliga ahayn. Waxay bixinaysaa qaab-dhismeed la cusbooneysiiyey oo loogu talo-galay dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa oo iskuduwan ee shanta sano soo socota, waxayna higsanaysaa in Soomaaliya laga raro dadaallo kala qooqban oo badankood ku

salaysan hawlo gaar-gaar ah loona wareejiyo qaab qaran oo mideysan, caddeymo ku salaysan, hay'ado ku dhisan, isla markaana natiijooyin diiradda saaraya oo ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa ah.

1.2 Sababta iyo Ujeeddada Istiraatijiyadda 2026–2030

Horumarinta Istiraatijiyadda 2026–2030 waxaa hagaya dhawr arrimood oo isla xiriira:

Marka kowaad, inkasta oo istiraatijiyaddii hore ay dhidib muhiim ah dhigtay, Dib-u-eegistii Dhammaadka Muddada Istiraatijiyaddii hore waxay muujisay in weli ay jiraan daldaloollo waaweyn oo sharci, hay'adeed, iyo hawl-gal oo aan la xallin. Daldaloolladani waxay u baahan yihiin istiraatijiyad diiradda saarta oo la hirgelin karo, taasoo wax ka qabata dib-u-habaynnada aan dhammeystirmin iyo khataraha cusub ee musuq-maasuqa.

Marka labaad, qaab-dhismeedka la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Soomaaliya weli ma dhammeystirna, mana ahan sabab la xiriirta maqnaanshaha guud ee sharciyo, balse waa sabab la xiriirta in qaab-dhismeedka sharci iyo hay'adeed ee jira uusan weli si buuxda isku waafaqsanayn, si joogto ahna loo hirgelin, ama si ku filan loo hawl-gelin. Inkasta oo Soomaaliya leedahay sharciyo muhiim ah oo ka hadlaya ka-hortagga, fulinta, ciqaabta, iyo soo-celinta hantida la xiriirta musuq-maasuqa, haddana waxaa loo baahan yahay dadaal dheeraad ah si loo xoojiyo awoodda hay'adaha, loo hagaajiyo iskuduwidda, loo kordhiyo wacyiga dadweynaha, iyo in wax laga qabto daldaoollada gaarka ah ee weli jira sida ilaalinta wargeliyaha musuq-maasuqa, iska-hor-imaadka danaha, iyo hab-raacyada shaacinta hantida.

Marka saddexaad, wareegga istiraatijiyadda ee xiga wuxuu bixinayaa fursad lagu xoojinayo iswaafajinta u dhexeeysa dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo mudnaanta ballaaran ee maamulka iyo horumarinta Qaran. La-dagaallanka musuq-maasuqu ma ahan ajande gooni u taagan; wuxuu si dhow ula xiriira dib-u-habaynta bahda cadaaladda, maamulka dawliga ah, maareynta maaliyadda guud, bixinta adeegyada, federaalaynta, isla-xisaabtan siyaasadeed, iyo kalsoonida muwaadiniinta ee dawladda. Sidaa darteed, istiraatijiyad la isku halayn karo oo la-dagaallanka musuq-maasuqa ah waxay si toos ah uga qeyb-qaadaneysaa himmillooyinka ballaaran ee dawlad-dhiska iyo horumarinta Soomaaliya.

Marka afaraad, istiraatijiyadda cusub waxay ka jawaabaysaa casharradii laga bartay hirgelinta. Dib-u-eegistii Istiraatijiyadii hore (ISTIRAATIJIYADDA 2020-2023) waxay muujisay baahida loo qabo karaan hay'adeed oo xooggan, iskuduwid wanaagsan, hirgelin marxaladeysan oo miisaaniyadeeda la qiyaasay, hortebyeeyo si waaqici ah loo kala hormariyey, kormeer iyo qiimeyn adag, iyo ka-qeyb-gal ballaaran oo dadweyne iyo daneeyeyaal ah. Sidaas darteed, ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxaa loo qaabeeyey in uusan ahayn oo keliya bayaan siyaasadeed, balse sidoo kale noqdo qaab wax-ku-ool ah oo loogu talo-galay hirgelinta, barashada, iyo isla-xisaabtanka.

Iyadoo la raacayo tixgelinnada guud ee qorshaha istiraatijiyadeed, ujeeddada Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa 2026–2030 waa in la bixiyo qaab qaran oo mideysan oo lagaga hortago, lagu ogaado, laguna wajaho musuq-maasuqa Soomaaliya, iyadoo la

xoojinayo sharciyada, hay'adaha, nidaamyada, hababka isla-xisaabtanka, iyo ka-qeyb-galka dadweynaha.

Si gaar ah, istiraatijiyaddu waxay ujeeddadeedu tahay:

- in la xoojiyo saldhigyada sharci iyo siyaasadeed ee la-dagaallanka musuq-maasuqa;
- in la dhiso hay'ado la isku halayn karo, shaqeynaya, oo leh waajibaad sharciyeed oo la xiriira la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo maamulka;
- in la hagaajiyo fulinta, baarista, dacwad-oogista, iyo garsoorka dacwadaha musuq-maasuqa;
- in la hay'adeeyo nidaamyada anshaxa, daacadnimada, isla-xisaabtanka, iyo kormeerka guud ahaan hay'adaha dadweynaha; iyo
- in la xoojiyo wacyiga dadweynaha, ka-qeyb-galka daneeyeyaasha, iyo ballan-qaadka siyaasadeed ee la-dagaallanka musuq-maasuqa.

1.3 Habka Horumarinta Istiraatijiyadda

Horumarinta ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxaa hagay hannaan wada-tashi iyo caddeymo ku saleysan. Hannaankan wuxuu ka duulayaa Dib-u-eegista Dhammaadka Muddada ISTIRAATIJIYADDA ee 2020–2023, Qiimeynta Qaran ee Khataraha Musuq-maasuqa, natiijooyinka iyo talooyinka ka soo baxay dib-u-eegista Soomaaliya ee hoos timaadda Hab-raaca Dib-u-eegista Hirgelinta Heshiiska Caalamiga ah ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (Wareegga 1), iyo dib-u-eegis lagu sameeyey dokumentiyada sharciga iyo siyaasadda ee arrintan la xiriira.

Intaas waxaa dheer, Istiraatijiyaddan waxaa lagu qaabeeyey wada-tashiyo ballaaran oo lala yeeshay daneeyeyaasha oo ay ka mid yihiin hay'adaha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Dawlad-goboleedyada, hay'adaha kormeerka, bahda cadaaladda, ururrada bulshada rayidka, jaamacadaha, wakiillada hay'adaha gaarka ah, iyo bah-wadaagta horumarinta. Wada-tashiyadan waxay bixiyeen aragtiyo muhiim ah oo ku saabsan guulaha la gaaray, daldaloollada hirgelinta, caqabadaha hay'adeed, u-nuglaanshaha musuq-maasuqa, iyo aagagga mudnaanta leh ee dib-u-habaynta ee wareegga xiga ee istiraatijiyadda.

Qabyo-qoraalka Istiraatijiyadda ayaa markii dambe loo gudbiyey ansixin, kaasoo daneeyeyaashu ay qiimeeyeen qaab-dhismeedka la soo jeediyey, mudnaanta istiraatijiyadeed, hab-raacyada hirgelinta, iyo jihada kormeerka. Talooyinka iyo aragtiyaha ka soo baxay wada-tashiyada iyo hab-raacyada ansixinta ayaa si taxaddar leh loo tixgeliyey laguna daray dokumentiga kama-dambaysta ah, taasoo ka caawisay xoojinta ku-habboonaanteeda, lahaanshaheeda, iyo awooddeeda ay uga jawaabto xaqiiqooyinka maamulka ee Soomaaliya.

Iyadoo lagu saleynayo habkan, ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxaa loo qaabeeyey shan tiir:

1. Qaab-dhismeedyo Sharci iyo Siyaasadeed.
2. Maamulka iyo Qaadb-dhsimeedka Hay'adaha Dawliga ah.

3. Fulinta, Baarista, iyo Waxtarka Garsoorka.
4. Nidaamyada Hufnaanta iyo Isla-xisaabtanka.
5. Ka-qeyb-galka Dadweynaha iyo Rabitaanka Siyaasadeed.

1.4 Baaxadda Istiraatijiyadda

ISTIRAATIJIYADDA 2026 – 2030 waxay daboolaysaa ka-hortagga musuq-maasuqa, isla-xisaabtanka, fulinta, kormeerka, iyo ka-qeyb-galka dadweynaha ee guud ahaan Xukuumadda JFS, iyo si tartiib-tartiib ah, heerarka Dawlad-goboleedyada iyo qaab-dhismeedyada degmooyinka. Waxaa kale oo ay aqoonsanaysaa doorka ay leeyihiin hay'adaha aan-dawliga ahayn, oo ay ku jiraan bulshada rayidka, jaamacadaha, warbaahinta, bulshooyinka, iyo qeybta gaarka loo leeyahay, ee dhiirri-gelinta hufnaanta iyo isla-xisaabtanka.

Istiraatijiyaddu waxay wax ka qabaneysaa khataraha musuq-maasuqa ee waaxyo gaar ah iyo kuwa isku-dhafan, oo ay ku jiraan kuwa la xiriira daldaloollada sharci iyo siyaasadeed, waajibaadka hay'adaha, waxtarka garsoorka iyo fulinta, hufnaanta adeegyada dadweynaha, iibka guud iyo maareynta maaliyadda, daah-furnaanta bixinta adeegyada, kormeerka muwaadiniinta, iyo u-hoggaansanaanta hay'adaha gaarka ah ee heerarka hufnaanta.

1.5 Qaab-dhismeedka Istiraatijiyadda

Istiraatijiyaddan waxaa loo qaabeeyey cutubyo soo bandhigaya gogol-dhigga iyo sababta, falanqeynta xaaladda, qaab-dhismeedka istiraatijiyadeed, hab-raacyada hirgelinta, hababka kormeerka iyo qiimeynta, iyo qorsheynta hirgelinta ee la qiimeeyey kharash ahaan muddada 2026–2030.

Iyadoo laga jawaabayo khataraha musuq-maasuqa, daldaloollada hirgelinta, iyo casharrada hay'adeed ee lagu aqoonsaday Dib-u-eegistii Dhammaadka Muddada, Qiimeynta Qaran ee Khataraha Musuq-maasuqa, iyo wada-tashiyada daneeyeyaasha, ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxay qaadatay qaab-dhismeed istiraatijiyadeed oo ku saleysan aragti qaran, himmillo, yool istiraatijiyadeed, iyo shan tiir oo isla xiriira. Tiirarkani waxay bixinayaan qaab-dhismeedka lagu qaabeynayo falanqeynta xaaladda, jihada istiraatijiyadda, ujeeddooyinka istiraatijiyadeed, hab-raacyada hirgelinta, iyo qaab-dhismeedka kormeerka ee lagu soo bandhigay cutubyada xiga.

CUTUBKA LABAAD
FALANQEYNTA XAALADDA EE ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030

2.1. Hordhac

Cutubkani wuxuu bixinayaa falanqeynta xaaladda ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030. Wuxuu qiimeynayaa hab-socodka guud ee maamul iyo la-dagaallanka musuq-maasuq ee lagu hirgelinayo Istiraatijiyadda, wuxuu dib u eegayaa caqabadaha ugu waaweyn ee sharci, hay'adeed, hawl-gal iyo isla-xisaabtan dadweyne, wuxuuna falanqeynayaa arrimaha xaaladeed, daneeyeyaasha, iyo heerarka nidaamyada ee saameeya khataraha musuq-maasuqa ee Soomaaliya. Sidaas awgeed, wuxuu dhisayaa saldhigga caddeyn ee tiirarka istiraatijiyadeed, tallaabooyinka mudnaanta leh, iyo maan-galnimada hirgelinta ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030.

2.2. Xaaladda La-dagaallanka Musuq-maasuqa Iyo Jihada uu Hadda Ku Socdo

Soomaaliya, musuq-maasuqu1 weli waa caqabad weyn oo ku saabsan maamulka iyo isla-xisaabtanka dadweynaha, isagoo si dhow ula xiriira dawlad-dhiska, amni-darrada, nuglaanta hay'adaha, iyo daciifnimada xakameynta maaliyadda iyo maamulka guud. Caddeymaha ka soo baxay Dib-u-eegista Dhammaadka Muddada ee ISTIRAATIJIYADDA 2020–2023, natiijooyinka hanti-dhawrka rasmiga ah, iyo wada-tashiyada daneeyeyaasha ayaa xaqiijinaya jiritaanka daldaloollo joogto ah oo ka jira qaab-dhismeedka sharci, waajibaadka hay'adaha, awoodda fulinta, nidaamyada hufnaanta ee hay'adaha dawladda iyo isla-xisaabtanka dadweynaha.

Qaab-dhismeedka Wax-ka-beddelka Dastuurka ee 2026 wuxuu sii xoojinayaa saldhigga qaran ee dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa, isagoo xaqiijinaya maamul isla-xisaabtan leh, maareyn mas'uuliyad leh oo kheyraadka dadweynaha ah, kormeer madax-bannaan, iyo hufnaanta xilalka dadweynaha. Si kastaba ha ahaatee, ballan-qaadyadan dastuuriga ah weli waxay u baahan yihiin in loo rogo sharciyo wax-ku-ool ah, hay'ado, nidaamyo, iyo hab-raacyo fulineed.

Deegaanka la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Soomaaliya waxaa sidoo kale saameeya khataro ballaaran oo la xiriira amniga qaranka iyo nuglaanta dawladnimada. Falanqaymaha dhawaan laga sameeyey amniga qaranka waxay muujinayaan in maamul daciif ah, gaarsiinta dawladeed oo xaddidan, nuglaanta hay'adaha dawladda, liidasho talinta sharciga, iyo heerarka hoose ee daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ay sii xoojin karaan khataraha ku wajahan isku-duubnida dawladda, kalsoonida shacabka, iyo adkaysiga qaranka.

[1] World Bank (2024) *Somalia Multi-Partner Fund: Progress Report - January-June 2024*. Available at: https://documents1.worldbank.org/curated/en/099707510302437928/pdf/IDU-96ebb46c-dc4f-4049-a0a9-436f838bc203.pdf

Xaaladdan gudaheeda, musuq-maasuqu ma ahan oo keliya arrin la xiriirta maamul-wanaagga iyo horumarka, balse sidoo kale waa qodob sii kordhin kara nuglaanta hay'adaha, isla markaana wiiqi kara awoodda Dawladda ee ay si wax-ku-ool ah uga jawaabto khataraha kale ee qaran.

Dib-u-habaynta dhawaan la sameeyey iyo dadaallada xoojinta hay'adaha ayaa bixinaya saldhig wax-ku-ool ah oo loogu talo-galay ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030: (i) si tartiib-tartiib ah u-nidaaminta xeerarka maareynta maaliyadda guud iyo hawlaha kormeerka (oo ay ku jiraan hanti-dhawrka dibadda iyo shuruudaha shaacinta) [2], (ii) soo-bandhigista hab-raacyada kormeerka iibka iyo heshiisyada dheef-wadaagga ah, [3] iyo (iii) ballaarinta nidaamyada dhijitaalka ah (tusaale ahaan nidaamka mushaar-bixinta shaqaalaha iyo daba-galka raad-raaca qaan-sheegadka) ee yareeya go'aan-qaadashada ku salaysan ikhtiyaar shakhsiyeed isla markaana hagaajiya raad-raacidda. [4] Si kastaba ha ahaatee, dib-u-habayntan weli ma gaarin heer ku filan oo ballaaran, baaxad, ama kalsooni fulineed si ay u beddesho dhiirri-gelinta guud ahaan hay'adaha dawladda.

Saldhigga caddeymaha wuxuu tilmaamayaa shan caqabad oo asaasi ah oo ay tahay inay qaabeeyaan Cutubka Labaad iyo maan-galnimada istiraatijiyadda:

> **Marka kowaad**, daciifnimo weyn ayaa weli ka jirta **qaab-dhismeedka sharci iyo hay'adeed,** gaar ahaan dhinacyada ilaalinta wargeliyaha musuq-maasuqa, ilaalinta markhaatiyaasha, ku-dhawaaqista hantida iyo xaqiijinteeda, nidaaminta iska-hor-imaadka danaha, iyo hufnaanta hawl-galka. Daciifnimadani waxay weli wiiqaysaa warbixinta, ogaanshaha, baarista, iyo ka-hortagga. (MoJCA NCRA, Feb 2026; OHCHR; Soo-koobista dib-u-eegista UNCAC IRM Wareegga 1) [5]
>
> **Marka labaad**, **daldaloollada iyo kala-qoqobnaanta** gaar ahaan Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa oo aan hawl-gelin ama si daciif ah u dhisan, iyo qaab-dhismeed hufnaanta oo aan isku dheelli-tirnayn oo ka jira Dawlad-goboleedyada ayaa weli caqabad ku ah ka-hortagga joogtada ah, baarista, iyo ciqaabidda. (MoJCA ETR ee ISTIRAATIJIYADDA 2020–2023, Feb 2026)
>
> **Marka saddexaad**, **caqabadaha fulinta iyo garsoorka** waa kuwo qaab-dhismeed ah: nidaamka cadaaladda dembiyada ee Soomaaliya weli wuxuu wajahayaa hab-raacyo dheer, dammaanad xaddidan oo madax-bannaanida garsoorka ah, dheelli qaab-

[2] Somalia (2023) Law of the Office of the Auditor General of the Federal Republic of Somalia (Law No. 14 of 2023). [online] Available at: https://oag.gov.so/wp-content/uploads/2024/11/Law-of-the-Office-of-the-Auditor-General-of-the-FRS-Final-English-Version.pdf

[3] International Monetary Fund (2024) Somalia: 2023 Article IV Consultation, Sixth Review Under the Extended Credit Facility Arrangement, and Requests for a New Three-Year Arrangement Under the Extended Credit Facility and an Arrangement Under the Resilience and Sustainability Facility. IMF Country Report No. 24/1. [pdf] Available at: https://www.imf.org/-/media/files/publications/cr/2024/english/1somea2024001.pdf

[4] Ibid

[5] Office of the United Nations High Commissioner for Human Rights (2024) In Dialogue with Somalia, Experts of the Human Rights Committee Welcome the State's Anti-Corruption Measures, Ask about the Impact of Conflict on Human Rights. Available at: https://www.ohchr.org/en/meeting-summaries/2024/03/dialogue-somalia-experts-human-rights-committee-welcome-states-anti; Executive Summary of the UNCAC IRM Cycle 1 review, March 2025

dhismeed oo ballaaran, iyo caqabado iskuduwid oo u dhexeeya hay'adaha. Isla mar ahaantaana, hay'adaha muhiimka ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo cadaaladda dembiyada ayaa weli la kulma daldaloollo ku saabsan kala-caddeynta waajibaadka, madax-bannaanida, tababarka, kheyraadka, iyo awoodda farsamo, oo ay ku jiraan dhinacyada takhasuska u baahan sida maaliyadda iyo falanqeynta dembiyada. [6]

Marka afaraad, **nidaamyada hufnaanta iyo isla-xisaabtanku** ma lahan daboolid iyo heer bislaansho oo isku mid ah: hawlaha hanti-dhawrka gudaha kama jiraan hay'ado badan, qorsheynta iibka weli waa daciif, dakhliga iyo kharashaadka muhiimka ah ee dawladda si joogto ah uma wehliyaan caddeymo dokumentiyo ah oo la xaqiijin karo. [7]

Marka shanaad, **ka-qeyb-galka dadweynaha iyo ballan-qaadka siyaasadeed** waxaa caqabad ku ah hufnaan xaddidan, kormeer bulsho oo kooban, iyo mudnaanno amni iyo siyaasadeed oo is-barbar socda oo yareeya fursadda iyo diiradda la siin karo dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa.[8]

Sidaa darteed, saameynada ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waa kuwo cad: in mudnaanta la siiyo kala-hormarinta tallaabooyinka (saldhigyada sharci → waajibaadka hay'adaha iyo dammaanadaha → nidaamyada hawl-galka iyo karaanka → kormeerka dadweynaha iyo hababka jawaab-celinta), isla markaana diiradda la saaro dhawr meelood oo mudnaan leh oo si marxaladeysan loo fulinayo, gaar ahaan hufnaanta iibka, hababka cabashooyinka iyo warbixinta, dib-u-habaynta hufnaanta ee qeybaha khatarta sare leh, iyo xoojinta awoodda fulinta. Tani waa inay ku jirtaa maal-gashi joogto ah oo lagu sameeyo baaritaannada maaliyadeed, maareynta dacwooyinka, iskuduwidda dacwad-oogista, iyo dammaanadaha garsoorka, iyadoo ay la socdaan tallaabooyin ka-hortag iyo daah-furnaan. [9]

Xaaladda guud ee la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Soomaaliya waxaa qaabeeya si wadajir (i) amni-darro daba-dheeraatay, (ii) xiriirka isbeddelaya ee u dhexeeya Xukuumadda JFS iyo Dawlad-goboleedyada, (iii) ku-tiirsanaanta maal-gelin dibadeed iyo nidaamyada gargaarka bini'aadantinimo, iyo (iv) gaarista maamul ee xaddidan. Guddiga Khubarada ee Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay[10] ee ka warbixiya xaaladda Soomaaliya ayaa si joogto ah u muujiyey xiriirka u dhexeeya daciifnimada maamulka iyo halista leexsashada kheyraadka: wuxuu iftiiminayaa in iskaashi daciif ah oo u dhexeeya dawladda federaalka iyo Dawlad-goboleedyada uu abuurayo fursado ay ka faa'iideystaan daneeyeyaal siyaasadeed iyo kuwo macaash-doon ah si ay u isticmaalaan hay'adaha, sida in ay leexsadaan dakhliga guud (tusaale ahaan kalluumeysiga).[11]

[6] Executive Summary of the UNCAC IRM Cycle 1 review, Sept 2025
[7] Office of the Auditor General of Somalia, 2024
[8] Ibid
[9] Ibid
[10] United Nations Security Council (2023) Letter dated 2nd October 2023 from the Chair of the Security Council Committee pursuant to resolution 751 (1992) concerning Al-Shabaab addressed to the President of the Security Council (S/2023/724). [pdf] Available at: https://www.ecoi.net/en/file/local/2100037/N2325555.pdf
[11] Ibid

Isla mar ahaantaana, jihada dib-u-habaynta maaliyadeed ee heer qaran ee Soomaaliya waxay abuurtay fursado cusub oo loogu talo-galay dib-u-habaynta hufnaanta. Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF)[12] wuxuu sheegay in Soomaaliya ay gaartay heerka dhammeystirka bar-tilmaameedka dalalka saboolka ah ee deynta xooggan lagu leeyahay (HIPC) sanadkii 2023, taasoo keentay cafis weyn oo ku saabsan bixinta deynta isla markaana suurto-gelisay helitaanka maal-gelin cusub — fursad kordhinaysa faa'iidada maamul wanaagsan, balse sidoo kale kordhinaysa halista maamul-xumo maaliyadeed haddii nidaamyada hufnaanta aysan la jaan-qaadin.[13]

Caddeymaha ka imanaya hay'adaha kormeerka ee dawladda Soomaaliya waxay muujinayaan in musuq-maasuqa iyo daciifnimada xakameynta aysan ahayn arrimo guud oo aan la taaban karin: warbixin hanti-dhawr oo dhawaan la sameeyey ayaa tilmaamaysa fashil la taaban karo oo la cabbiri karo oo ka jira qorsheynta iibka, dhisidda hanti-dhawrka gudaha, keydinta dokumentiyada la xiriira dakhliga qiimaha sare leh, iyo u-hoggaansanaanta hab-raacyada xakameynta maaliyadeed. [14] Natiijooyinkani waxay gaar ahaan muhiim u yihiin maadaama ay yihiin kuwo "la fulin karo" marka la dejinayo istiraatijiyadda: waxay tilmaamayaan meelaha xakameynta ee gaarka ah ee ay tallaabooyinka ISTIRAATIJIYADDA ka yareyn karaan go'aan-qaadashada ku salaysan ikhtiyaar shakhsiyeed, kordhin karaan raad-raacidda, isla markaana xoojin karaan cawaaqibka.

Hay'adda Tiro-koobka Qaran ee Soomaaliya (Bankiga Adduunka, 2024) waxay xustay in tiro-koobyada maamulka ay ku xaddidan yihiin helitaanka xog maamul iyo xog sahamin oo daciif ah (taasoo xaddideysa cabbir joogto ah oo lagu sameeyo dhinacyada kala duwan ee maamulka, oo ay ku jirto "maqnaanshaha musuq-maasuqa")[15]. Tani waxay si toos ah u saameynaysaa kormeerka iyo qiimeynta ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030: qaab-dhismeedka tilmaameyaasha ee istiraatijiyadda waa inuu ku salaysnaadaa xog maamul oo hay'aduhu si macquul ah u soo saari karaan, u xaqiijin karaan, una daabici karaan.

2.3. Qiimeynta Xaaladda Dalka (Environmental Scan)

Qorsheynta istiraatijiyadeed waxay ka dhacdaa xaalad saameyn ku leh horumarinteeda iyo fulinteeda. Waa lama-huraan in xaaladda guud ee dalka la tixgeliyo. Sidaa darteed, qeybtani waxay qeexaysaa arrimaha bulsho iyo micyaarka guud (macro parameters) ee istiraatijiyadda la-dagaallanka musuq-maasuqa ku tiirsan tahay, iyo sidoo kale arrimaha heer-hoosaad (micro) iyo kuwa hay'adeed ee si toos ah u saameeya qorshaha.

[12] International Monetary Fund (2023) Somalia: 2022 Article IV Consultation and Fourth Review Under the Extended Credit Facility Arrangement-Press Release; Staff Report; and Statement by the Executive Director for Somalia. IMF Country Report No. 23/72.

[13] Office of the Auditor General of Somalia, 2024

[14] SNBS (2023). Accessed at https://nbs.gov.so/wp-content/uploads/2023/12/Governance-Statistics-Report-2023.pdf

[15] World Bank (2024), MPF Report. Accessed at https://documents1.worldbank.org/curated/en/099707510302437928/pdf/IDU-96ebb46c-dc4f-4049-a0a9-436f838bc203.pdf

2.3.1 Qiimeynta Xaaladda Guud ee Dalka (Macro Environment)

Horumarinta iyo hirgelinta ugu dambeysa ee qorshe istiraatijiyadeed kasta waxay ku xirnaanayaan xaaladda guud ee uu ka socdo. Sidaas darteed, dejinta iyo fulinta ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxay ku tiirsan yihiin dhawr arrimood oo dalka ah, oo ay ka mid tahay xaaladda guud (macro). Waa arrimahan guud ee dalka kuwaasoo saameyn ku yeelanaya qorshaha istiraatijiyadeed, iyagoo kaalin ka qaadan kara fududeynta ama caqabad ku noqoshada horumarinta iyo hirgelinta qorshaha. Sidaas awgeed, qeybtani diiradda saari mayso isbedellada hay'adaha dawladda ee khuseeya, balse waxay eegaysaa arrimaha guud ee waaweyn. Awoodaha gudaha ee hay'adaha muhiimka ah ee dawladda ee ku lug leh hirgelinta istiraatijiyadaha la-dagaallanka musuq-maasuqa, iyo sidoo kale falanqeynta daneeyeyaasha, waxaa lagu falanqeeyey qeybaha xiga. Isku-darka iyo is-barbar-dhigga xogta laga helay falanqeynta kala duwan ayaa door muhiim ah ka qaatay bixinta sawir qoto-dheer oo ku saabsan xaaladda musuq-maasuqa ee dalka, taasoo horseeday dejinta siyaasado, istiraatijiyado, tallaabooyin, iyo qaab-dhismeedyo sharci iyo nidaam oo loogu talo-galay ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa.

Jadwalka 1^{aad} ee hoose wuxuu tixgelinayaa xaaladaha Siyaasadeed, Dhaqaale, Bulsho, Teknoolojiyad, Deegaan iyo Sharci (PESTEL) oo ay ka dhex socoto qorsheynta istiraatijiyadeed. Arrimahan bulsheed waxay ka kooban yihiin qeybo ka mid ah hawl-galka ee heer qaran, heer gobol, iyo heer caalami.

Table 1: Falaqeynta PESTEL

Dhinaca	Arrimaha Jira	Saameynta
SIYAASADDA	• Khilaaf siyaasadeed joogto ah iyo is-faham waa' u dhexeeya Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada. • Amni-darro ka dhalata kacdoonno hubeysan oo sii socda. • Nidaam siyaasadeed ku dhisan qabiil iyo eex ka jirta dawladda. • Shuruudaha ku-biirista Buslshada Bariga Afrika (EAC) • Siyaasad dhaqaale oo ku sifeysan jilicsanaan dawladnimo iyo qaab-dhismeed siyaasadeed oo daciif ah. • Faro-gelin siyaasadeed oo ku timaadda go'aan-qaadashada. • Dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee heer gobol iyo heer caalami (gaarista Badda Cas).	• Hirgelin aan ku filnayn oo aan joogto ahayn oo istiraatijiyadaha la-dagaallanka musuq-maasuqa. • Halista dhacdooyin amni-darro. • Khilaafaadyo qabiil oo soo noqnoqda. • Matalaad aan sinnayn oo dawladda ah, helitaan fursado oo xaddidan, iyo nidaamka muteysiga ku-saleysan oo liita. • Fursado iyo waajibaadyo ka dhalanaya xubinnimada Bulshada Bariga Afrika (EAC). • Hirgelin aan heerkii la rabay gaarin oo barnaamijyada dawladda ah. • Tartanka adag ee loogu jiro u dhawaanshaha awoodda dawladeed. • Baahi loo qabo dheelli-tirnaan xasaasi ah oo ku saabsan arrimaha siyaasadeed ee heer gobol iyo heer caalami.
DHAQAALAHA	• Fursadaha dhaqaale oo xaddidan iyo heerka shaqo-la'aan oo aad u sarreya.	• Khatar ku timaadda hirgelinta ajendaha isbeddelka qaran. • Kheyraad xaddidan oo loogu talo-galay adeegyada dadweynaha ee muhiimka ah. • Kormeer aan ku filnayn oo ku saabsan macaamilaadla maaliyadeed.

Dhinaca	Arrimaha Jira	Saameynta
	• Dhaqaale aan rasmi ahayn oo ballaaran iyo kormeer aan ku filnayn oo ku saabsan qulqulka lacageed ee sharci-darrada ah. • Hannaanka Federaaleynta maaliyadeed oo aan caddeyn. • Aragtida dadwaynaha ee laga qabo heerka musuq-maasuqa oo aan wanaagsanayn. • Isticmaalka lacagta danabaysan (mobile) oo aad u baahsan. • Fursado shaqo oo la xariira helitaanka shidaalka mustaqbalka. • Dhaqdhaqaaq dhaqaale firfircoon oo ka jira dhinaca gaarka loo leeyahay. • Kaabayaal daciif ah iyo helitaan aan sinnayn ee tamar tayo leh oo la awoodi karo. • Macdan qodis iyo kalluumeysi aan si buuxda loo xakameyn dalka oo dhan.	• Ururinta dakhliga oo hooseysa sabab la xiriirta nidaamka federaaleynta maaliyadeed oo aan caddeyn. • Raad-raac wanaagsan oo ka dhasha isticmaalka dhaqaalaha lacagta danabaysan (mobile) • Halis ku timaadda maal-gashiga tooska ah ee shisheeye iyo sumcadda dalka • Fursado wanaagsan oo ka imanaya dhanka fulinta.
BULSHADA	• Musuq-maasuqa oo bulshada dhexdeeda caadi ka noqday. • Natiijooyin la taaban karo oo xaddidan oo la xiriira la-dagaallanka musuq-maasuqa. • Dhaqan si qoto-dheer u xididaystay oo eex iyo dallaalnimo awoodeed ku saleysan. • Qaababka warbaahinta asalka iyo tan baraha bulshada oo sii firfircoonaaneysa. • Ururrada bulshada rayidka oo si firfircoon uga qeyb-qaata. • Ka-qeyb-gal firfircoon oo dhallinyarada ay ku leeyihiin arrimaha bulshada. • Helitaanka fursadaha gaIstiraatijiyaddai oo aan ku filnayn haweenka iyo dhallinyarada.	• Nidaam qiyam oo ka dhigaya musuq-maasuqa wax caadi ah. • Qaraabo-kiilnimo iyo eex si baahsan u jirta, iyo sii socoshada takooridda kooxaha nugul. • Hoos-u-dhac ku yimid xirfadda adeegga dadweynaha iyo yaraan ku timid shaqaaleysiinta ku salaysan muteysiga. • Wacyi-gelin wanaagsan iyo muujin (sheegid) falalka musuq-maasuqa. • Hufnaan sii hagaagaysa oo ku saabsan hababka dib-u-habaynta. • Shaqo-la'aan aad u sareysa oo haysa haweenka iyo dhallinyarada.
TIKNOOLOJIYADDA	• Helitaanka kaabayaal fiber optic ah. • Kaabayaal IT iyo moobil oo wanaagsan oo xoojinaya dhijitaaleynta adeegyada dawladda ee magaalooyinka, iyadoo kaabayaal IT oo hooseeya ay ka jiraan degaannada miyiga. • Isbeddel teknooloji oo degdeg ah. • Lacagta moobilka oo fududeynaysa raad-raac dhijitaal ah. • Aqoon xaddidan oo ku saabsan amniga internetka, taasoo kordhinaysa khatarta dembiyada dhaqaale ee online-ka ah. • Dhijitaaleynta ururinta dakhliga.	• Teknoolojiyadda (ICT) waxay bixineysaa fursado korriin • Isgaarsiin waqtiga-dhabta ah oo kharash-jaban. • Kordhinta khatarta dembiyada internetka iyo khiyaanada dhaqaale. • Helitaan xog oo la hagaajiyey iyadoo loo marayo isku-darka lacagta mobile-ka iyo hanti-dhawr wax-ku-ool ah oo macaamilaadka ah. • Suurta-galnimada in la kordhiyo ururinta dakhliga iyadoo loo marayo nidaamyada canshuuraha iyo kastamyada ee dhijitaalka ah.
DEEGAANKA	• Isbeddel cimilo oo aan la saadaalin karin, oo ay ku jiraan fatahaado iyo abaaro soo noqnoqda. • Dhaqdhaqaaqyada gargaarka bini'aadantinimo ee xaaladaha degdegga ah, waxay fududeyn karaan musuq-maasuq xaaladaha gargaarka degdegga ah. • Nabaad-guurka dhulka oo saameeya sugnaanta cuntada ee beeraha iyo xoolaha.	• Fatahaadaha iyo abaaruhu waxay sii kordhiyaan nuglaanshaha, cadaadisna saaraan kheyraadka dawladda ee xaddidan, waxayna adkeeyaan la-dagaallanka musuq-maasuqa • Cunto yaraantu waxay kordhisaa tartanka iyo raadinta faa'iidooyin gaar ah. • Khilaafaadka ka dhasha kheyraadka yar waxay saameeyaan xasilloonida iyo maamulka.

Dhinaca	Arrimaha Jira	Saameynta
	• Cadaadisyada deegaanka oo sababa muranno dhul iyo biyo. • Maamul daciif ah oo ku saabsan kheyraadka dabiiciga ah oo keena halis deegaan. • Heshiisyo xaddidan oo ku saabsan biyaha xuduudaha wadaaga iyo kuwa dhulka hoostiisa mara. • Dillaaca cudurro iyo saameynta cudurrada faafa ee caalamiga ah	• Dhibaatooyinka iyo xaaladaha degdegga ah waxay wiiqaan kormeerka wax-ku-oolka ah ee kheyraadka.
SHARCIGA	• Heshiiska Qaramada Midoobay ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (UNCAC) oo lagu biiray. • Qaab-dhismeed sharci, xeer-nidaam iyo siyaasadeed oo aan dhammeystirnayn, iyadoo ay jiraan daldaloollo dhanka soo-celinta hantida, ka-hortagga lacag-dhaqidda, iyo maal-gelinta argagixisada. • Is-dul-saar ka jira waajibaadka u dhexeeya Dawladda Federaalka, Dawlad-goboleedyada, iyo hay'adaha kala duwan ee dawladda. • Madax-bannaani xaddidan oo ka jirta nidaamka garsoorka, oo ay ku jiraan maxkamadaha. • Sharciga Shidaalka oo jira. • Waafajinta qaab-dhismeedka sharci iyo siyaasadeed ee Bulshada Bariga Afrika ee ku saabsan gaIstiraatijiyaddaiga xuduudaha ka gudba.	• Waafaqsanaanta heshiisyada iyo hab-raacyada caalamiga ah. • Tallaabooyinka la-dagaallanka musuq-maasuqa oo daciifay sabab la xiriirta qaab-dhismeedka sharci iyo siyaasadeed oo aan ku filnayn. • Isjiid-jiid iyo kala caddeyn la'aan ku saabsan qeybsiga waajibaadka u dhexeeya Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada. • Faro-gelin siyaasadeed oo ku timaadda dacwooyinka musuq-maasuqa iyo madax-bannaani daciif ah oo garsoor ayaa wiiqaya ka-hortagga. • Fursado wanaagsan oo lagu maareeyo qeybta shidaalka iyadoo sharciyadu ay jiraan. • Iswaafajinta qaab-dhismeedyada Bulshada Bariga Afrika waxay taageertaa gaIstiraatijiyaddaiga xuduudaha ka gudba iyo u-hoggaansanaanta xeerarka guud ee kastamyada/canshuur-ururinta.

2.3.2 Qiimeyn Gaar ah (Microenvironment)

Marka lagu daro xaaladda guud ee dalka, falanqeyn iyo qiimeyn gaar ah (micro environment) ayaa noqoneysa lama-huraan. Tani waxay ku lug leedahay qiimeyn qoto-dheer oo lagu sameeyo xaaladda ka jirta hay'adaha fulinaya iyo sidoo kale hay'adaha kale ee khuseeya waaxda. Sidaas darteed, falanqeynta Awoodaha, Daciifnimada, Fursadaha iyo Khataraha (SWOT) (Jadwalka 2) ayaa halkan lagu dabaqayaa. Ujeeddadu waa in laga faa'iidaysto awoodaha iyo fursadaha, isla markaana la saxo daciifnimada lana xakameeyo khataraha suurta-galka ah.

AWOODAHA	LIIDASHADA
• Qaab-dhismeedyo sharci oo la-dagaallanka musuq-maasuqa ah. • Wacyi-gelin sii kordhaysa oo ka dhex jirta muwaadiniinta, warbaahinta, iyo bulshada rayidka. • Isticmaalka lacagta mobile-ka oo aad u baahsan. • Dhijitaaleynta sii kordhaysa ee ururinta dakhliga.	• Iskuduwid aan ku filnayn oo u dhexeysa hay'adaha. • Eex iyo qaraabo-kiil. • Awood hay'adeed oo xaddidan — dhinacyada shaqaalaha, teknoolojiyadda, iyo maaliyadda. • Mushaar hooseeya oo ka jira hay'adaha dawladda • Nidaamka Iibka Danabaysan (e-procurement) oo aan weli la hirgelin.

AWOODAHA	LIIDASHADA
• Taageero caalami ah oo lagu hagaajinayo nidaamka maamulka.	• Fulinta sharciyada la-dagaallanka musuq-maasuqa oo daciif ah.
FURSADAHA • Hirgelinta barnaamijyada dawladda danabaysan (e-government) ee isku dhafan. • Dhijitaaleynta iibsiga guud. • Ka-qeyb-gal firfircoon iyo hirgelinta qaab-dhismeedyada la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Bulshada Bariga Afrika. • Macaamilaadka lacagaha moobilka. • Taageerada bar-tilmaameedka leh ee ka timaada deeq-bixiyeyaasha. • Ka-qeyb-gal firfircoon oo ay leeyihiin dhallinyarada, NGO-yada, iyo hoggaamiyeyaasha diinta.	**KHATARAHA** • Amni-darro iyo khilaafaadyo soo noqnoqda • Dhaqaalaha aan rasmiga ahayn oo baahsan. • Shaqo-la'aan ballaaran, gaar ahaan dhallinyarada/Halista baahsan ee xogta iyo amniga internetka, iyo aqoon-la'aan ku saabsan maareynta nidaamyada iyo barnaamijyada la-dagaallanka musuq-maasuqa.

2.4. Falaqeynta Daneeyeyaasha

Jadwalka 3 ee hoose wuxuu muujinayaa daneeyeyaasha muhiimka ah ee ku lug leh ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 iyo doorkooda la filayo.

Jadwalka 2: Falanqeynta Daneeyeyaasha

Daneeye	Doorka la filayo
Xukuumadda JFS	• Horumarinta siyaasadaha. • Kobcinta rabitaanka siyaasadeed. • Dejinta sharciyada.
Baarlamaanka	• Dejinta iyo wax-ka-beddelka sharciyada la-dagaallanka musuq-maasuqa. • Bixinta kormeerka dib-u-habaynta iyo hay'adaha la-dagaallanka musuq-maasuq. • Baarista warbixinnada hanti-dhawrka iyo kharashaadka dadweynaha. • Qabashada dhageysiyo iyo daba-galka natiijooyinka musuq-maasuqa. • Ansixinta miisaaniyadaha iyo taageeridda hababka isla-xisaabtanka.
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (MoJCA)	• Dib-u-habayn sharci iyo siyaasadeed. • Kormeerka sharciyada la-dagaallanka musuq-maasuqa.
Golaha Sare ee Garsoorka	• Ilaalinta madax-bannaanida, hufnaanta, iyo isla-xisaabtanka garsoorka iyadoo la kormeerayo hab-dhaqanka garsoorka, anshaxa, iyo hal-beegyada xirfadeed. • Taageeridda garnaqsi caddaalad ah oo waqtigiisa ku dhaca oo ku saabsan dacwooyinka musuq-maasuqa, iyadoo la xoojinayo kormeerka garsoorka, maareynta dacwooyinka, iyo u-hoggaansanaanta anshaxa ee nidaamka cadaaladda.
Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee JFS	• Dacwad-oogista musuq-maasuqa iyo dembiyada la xiriira Kormeerka siyaasadaha. • Dib-u-eegista sharciyeed ee galalka dacwooyinka musuq-maasuqa iyo hagidda dacwadaha ciqaabeed.
Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa	• Ka-hortagga iyo ogaanshaha musuq-maasuqa • Qaabilaadda, dib-u-eegista, iyo baarista ama gudbinta cabashooyinka musuq-maasuqa • Dhiirri-gelinta hufnaanta, wacyi-gelinta dadweynaha, iyo u-hoggaansanaanta tallaabooyinka la-dagaallanka musuq-maasuqa.
Wasaaradda Maaliyadda	• Qoondaynta miisaaniyadda. • Maareyn maaliyadeed oo mas'uuliyad leh.

Daneeye	Doorka la filayo
Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoPIED)	• Waafajinta Istiraatijiyadda ee qaab-dhismeedyada qorsheynta iyo horumarinta Qaranka. • Taageeridda kormeerka, qiimeynta iyo warbixinta. • Ku-darista mudnaanta la-dagaallanka musuq-maasuqa qorsheyaasha waaxaha.
Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed	• Fulinta sharciyada iyo xeer-nidaamiyeyaasha • Taageeridda baarista iyo dacwad-oogista dacwooyinka musuq-maasuqa
Hay'adda Warbinnada Maaliyadeed (FRC)	• Bixinta kormeer maaliyadeed iyo ogaanshaha macaamillada laga shakiyo, kharashaadka aan caadiga ahayn, iyo tabar-darrada ka jirta xakameynta maaliyadeed ee muujin karta musuq-maasuq. • Gudbinta falalka maaliyadeed ee looga shakiyo musuq-maasuqa hay'adaha ku habboon ee baarista iyo fulinta sharciga, iyo taageeridda daba-gal ku salaysan caddeyn iyadoo la adeegsanayo diiwaannada iyo falanqaynta maaliyadeed.
Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha (MDAs), Dawlad-goboleedyada iyo Xafiisyada Madaxa-bannaan	• Xoojinta hufnaanta iyo anshaxa shaqada. • Hirgelinta talooyinka hanti-dhawrka. • Dhisidda guddiyada la-dagaallanka musuq-maasuqa. • Hirgelinta barnaamijyada dhijitaalka ah ee khuseeya.
Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka	• Hanti-dhawrka hay'adaha dawladda. • Hubinta isticmaalka mas'uuliyadda leh ee kheyraadka dadweynaha. • Daba-galka hirgelinta warbixinada hanti-dhawrka.
Bah-wadaagta Horumarinta	• Taageero Maaliyadeed • Taageero farsamo iyo karaan dhisid.
Bulshada Rayidka	• La-socodka musuq-maasuqa. • U-qareemid iyo wacyi-gelin bulsho .
Warbaahinta	• Wacyi-gelin Dadweyne. • Iftiiminta dhacdooyinka musuq-maasuqa.
Qeybta Gaarka Loo leeyahay	• U-hoggaansananta sharciyada iyo xeer-nidaamiyaasha la-dagaallanka musuq-maasuqa.
Jaamacadaha oyo Hay'adaha kale ee tacliinta	• Cilmi-baaris ku saabsan anshaxa iyo daacadnimada. • Tababar ku saabsan anshaxa iyo daacadnimada.

Marka la isugeeyo, falanqeynta kor ku xusan waxay xaqiijinaysaa in musuq-maasuqa Soomaaliya uu sii jirayo sababo la xiriira daciifnimo ka jira dhinacyada sharci, hay'adeed, fulin, isla-xisaabtan, iyo ka-qeyb-gal dadweyne. Natiijooyinkan waxay saldhig u yihiin jihada istiraatijiyadeed ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030, oo ay ku jiraan aragtida, himmillada, yoolka istiraatijiyadeed, iyo shanta tiir ee istiraatijiyadda.

Falanqeynta xaaladdu waxay ka kooban tahay faham iyo qiimeyn ku saabsan arrimo bulsho oo ballaaran, isbeddellada gudaha ee dawladda, falanqeynta daneeyeyaasha, iyo qiimeynta halista musuq-maasuqa.

2.5. Qiimeyn Tiirarka Qaab-dhismeedka ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030

Qodob-hoosaadkani wuxuu isku caddeynayaa xaaladda hadda jirta ee la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo shanta tiir ee lagu qaatay istiraatijiyadda ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030. Wuxuu falanqeynayaa arrimaha ugu waaweyn ee sharci, hay'adeed, fulin, isla-xisaabtan, iyo ka-qeyb-gal dadweyne ee ku hoos jira tiir kasta, si loo muujiyo sida caddeymaha ka soo baxay falanqeynta xaaladdu u hagayaan mudnaanta istiraatijiyadeed iyo jihada dib-u-habaynta ee Istiraatijiyadda.

2.5.1 Dib-u-habayn Sharci iyo Siyaasadeed

Ajendaha dib-u-habaynta sharci iyo siyaasadeed waxaa sii xoojinaya ballan-qaadka dastuuriga ah ee ku aaddan maamul isla-xisaabtan leh, maareyn mas'uuliyad leh ee kheyraadka dadweynaha, iyo dhisidda hay'ado mas'uul ka ah hufnaanta, kormeerka, iyo ku-dhaqanka sharciga. Sidaas darteed, qaab-dhismeedka dastuuriga ah wuxuu bixinayaa saldhigga mabaadi' ee lagu xoojinayo sharciyada la-dagaallanka musuq-maasuqa, oo ay ku jiraan sharciyada ilaalinta wargeliyaha musuq-maasuqa, iska-hor-imaadka danaha, helitaanka xogta, iyo hababka kale ee ka-hortagga iyo fulinta.

Soomaaliya waxay qaadday tallaabooyin muhiim ah si ay ula jaan-qaadayso heerarka caalamiga ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa, oo ay ku jiraan ku-biirista UNCAC bishii Agoosto 2021 iyo ku-darista ballan-qaadyada la-dagaallanka musuq-maasuqa ee qaab-dhismeedyada siyaasadeed ee Qaran. Dib-u-eegista Wareegga 1aad ee Hab-raaca Dib-u-eegista Hirgelinta UNCAC (IRM) ee Soomaaliya ayaa tan iyo markaas la dhammeystiray, natiijooyinkeeda na waxay bixiyaan saldhig muhiim ah oo loogu talo-galay ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030. Dib-u-eegistu waxay iftiiminaysaa horumarka la sameeyey iyo daldaloollada weli jira ee dhinacyada sida dembiyeynta falalka musuq-maasuqa, ilaalinta markhaatiyaasha iyo wargeliyeyaasha musuq-maasuqa, hawl-gelinta Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa, iskuduwidda hay'adaha, iyo iskaashiga caalamiga ah. Sidaa darteed, mudnaanta istiraatijiyadeed hadda ma ahan qiimeyn iskeed ah ama dib-u-eegis daldaloollada sharci, balse waa hirgelinta talooyinka ka soo baxay dib-u-eegista Wareegga 1aad ee la dhammeystiray.

Si kastaba ha ahaatee, qaab-dhismeedka sharci weli ma dhammeystirna si buuxdana ulama jaan-qaadin UNCAC, taasoo si toos ah u daciifinaysa ogaanshaha, ka-hortagga, iyo soo-celinta hantida lagu helay musuq-maasuqa. Saddex daldalool ayaa si gaar ah istiraatijiyad ahaan muhiim u ah in farta lagu fiiqo:

- *Ku-dhawaaqista hantida iyo xakameynta hodmidda sharci-darrada ah:* Istiraatijiyadda hore (2020–2023) waxay aqoonsatay shaacinta hantida inay tahay aalad ka-hortag oo asaasi ah, halka Qiimeynta Qaran ee khatarta musuq-maasuq 2026 ay muujisay in daciifnimada ku jirta shaacinta hantida iyo xakameynta kobaca hantida sharci-darrada

ah ay weli yihiin sababo halis keenaya. Isla mar ahaantaana, qaab-dhismeedka Wax-ka-beddelka Dastuurka ee 2026 ayaa soo bandhigay qodobbo la xiriira shaacinta hantida ee qaar ka mid ah xilalka sare. Sidaa darteed, mudnaanta waa in lagu dhiso saldhiggaas dastuuriga ah iyadoo la xoojinayo hababka sharci, xeer-nidaameye, iyo hay'adeed ee loo baahan yahay si loo xaqiijiyo shaacinta, hubinta, fulinta, iyo isla-xisaabtanka ee guud ahaan hay'adaha dawladda. Qiimeynta Qaran ee khatarta Musuq-maasuqa 2026 ayaa sidoo kale tilmaamaysa maqnaanshaha sharci waajib ka dhigaya ku-dhawaaqista hantida inuu yahay arrin khatar kordhinaysa, taasoo u sahlaysa helitaanka hodmid sharci darro ah iyo ursiga hanti aan ilaheeda la caddeyn karin (MoJCA, Qiimeynta Qaran ee khatarta musuq-maasuq, Feb 2026).

- *Ilaalinta Wargeliyaha Musuq-maasuqa iyo Markhaatiyaasha*: Ilaalin daciif ah oo la siiyo wargeliyeyaasha, markhaatiyaasha, iyo khubarada ayaa weli ah caqabad weyn oo hortaagan fulinta wax-ku-oolka ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Soomaaliya. Dib-u-eegista Hannaanka Dib-u-eegista Hirgelinta ee UNCAC Wareegga 1aad ee Soomaaliya waxay ku talinaysaa in la qaato tallaabooyin wax-ku-ool ah oo ka hortegaya aargoosi ama cabsi-gelin lagu sameeyo markhaatiyaasha iyo khubarada, iyo sidoo kale in la ilaaliyo wargeliyeyaasha musuq-maasuqa si looga badbaadiyo in loola dhaqmo si aan cadaalad ahayn. Dhaqan ahaan, daldaloolladan waxay niyad jabinayaan shaacinta, yareeyaan iskaashiga baaritaannada, isla markaana wiiqayaan qulqulka dacwooyinka musuq-maasuqa ee la fulin karo.[16]

- *Iska-hor-imaadka danaha iyo istiraatijiyadda xiriirrada*: Iska-hor-imaadka danaha iyo istiraatijiyadda xiriirrada waxay weli yihiin sababaha waaweyn ee horseeda eex iyo ka-faa'iideysiga xiriirrada si taban, gaar ahaan shaqaaleysiinta, iibka, iyo go'aan-qaadashada guud (WCAD Qiimeynta Qaran ee khatarta musuq-maasuq, Feb 2026). Daldaloollada ugu weyn ma ahan oo keliya maqnaanshaha sharci gaar ah, balse sidoo kale waa la'aanta qodobbo iyo habab ku filan oo cadcad, la fulin karo, oo hawl-gal ah oo la xiriira iska-hor-imaadka danaha ee ku jira qaab-dhismeedka sharci iyo xeer-nidaamin ee jira.[17]
- *Isku-xirnaanta Dembiyada iyo Dhacdooyinka:* Marka qodobbada sharci ay noqdaan kuwo aan caddeyn ama aan la fulin, go'aan-qaadashada ku saleysan ikhtiyaarka shakhsiga ah ayaa kordha. Tusaale ahaan, sharciga iibka wuxuu mamnuucayaa kala qeybinta qandaraasyada si looga baxsado hal-beegyada tartanka furan, hanti-dhawrkuna si cad ayuu u xusay hal-beeggan sharci. [18] Sii-jiritaanka dhibaatooyinka ku saabsan qorsheynta iibka iyo dhismaha unugyada maamulka iibka waxay muujinayaan

[16] Executive Summary of the UNCAC IRM Cycle 1 review, Sept 2025

[17] World Bank (2024) *Somalia - Systematic Country Diagnostic Update: Accelerating the Building of Inclusive Institutions for Resilience and Jobs*. Washington, DC: World Bank. Available at https://documents1.worldbank.org/curated/en/099061324075512436/pdf/P175711-caa3e558-ee02-4c54-99e3-d9307c7d8e56.pdf

[18] Office of the Auditor General of Somalia, 2024

in “sharciga ku qoran buugaagta” uusan weli u beddelmin “sharci si dhab ah u shaqeeya” ee hay’adaha dawladda dhexdooda.[19]

Natiijada: Cutubka labaad waa inuu u soo bandhigaa daldaloollada sharci sida caqabado hawl-gal ah, ee aan keliya ahayn arrimo u-hoggaansanaan sharci: jiritaan la’aanta dhawrista wargeliyeyaasha musuq-maasuqa, shaacinta hantida, iyo xeerarka iska-hor-imaadka danaha waxay ka dhigan tahay in hay’adaha fulinta ay sii ahaanayaan kuwo si weyn ugu tiirsan baaritaanno ku salaysan ikhtiyaar shakhsiyeed oo siyaasad ahaan xasaasi ah, halkii ay ka isticmaali lahaayeen habab nidaamsan oo ogaansho.

Natiijooyinkani waxay saldhig u yihiin Tiirka 1aad iyo Ujeeddada Istiraatijiyadeed ee 1aad ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030, kuwaasoo diiradda saaraya dhisidda qaab-dhismeed sharci iyo siyaasadeed oo dhammeystiran, la fulin karo, isla markaana la jaan-qaadaya heerarka caalamiga ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa.

2.5.2 Maamulka Guud iyo Qaab-dhismeedka Hay’adaha Dawladda

Qaab-dhismeedka hay’aduhu wuu hagaagay, balse weli si isku mid ah looma nidaamin. Dadaalladii hore ee la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Soomaaliya waxay qorsheeyeen hab ku salaysan wada-shaqeynta guud ahaan dawladda iyo bulshada, oo ay ku jiraan Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa, hawlaha isku-duwidda heerarka dawladda, iyo xiriirro la xoojiyey oo lala yeeshay hanti-dhawrka, xeer-ilaalinlta, booliiska, iyo hay’adaha warbixinnada maaliyadeed. Si kastaba ha ahaatee, qaabka hawl-galka ee Guddiga iyo xiriirkiisa hay’adaha kale weli si buuxda looma caddeyn loomana fadhiisin si wax-ku-ool ah. Marka la eego xaaladda Soomaaliya, halkaasoo khatarta kala-qoqobnaanta hay’adaha iyo fashilka hirgelintu ay weli heer sare tahay, hortebyada ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waa in la sameeyo daraasad gaar ah oo ku saabsan hawl-gelinta Guddiga iyo hababka iskaashiga hay’adaha dhexdooda ah, si loo dejiyo xeerar maan-gal ah, hab-raacyo hawleed (SOPs), iyo dammaanado iskuduwid oo wax-ku-ool ah.[20]

Horumarku wuxuu si weyn uga muuqday maamulka maaliyadda guud marka loo eego horumarinta qaab-dhismeedyo hay’adeed oo mideysan oo la-dagaallanka musuq-maasuqa ah. Dib-u-habaynta ay hoggaaminayso Wasaaradda Maaliyaddu, oo ay ku jiraan meel-marinta sharciyo iyo xeerar muhiim ah oo ku saabsan maareynta maaliyadda guud, dakhliga gudaha, iibka iyo qandaraasyada, waxay ka turjumayaan hab dib-u-habayn maamul oo si tartiib ah loo kala hormariyey, laguna saleeyey qiimeynta Hab-raaca Kharashaadka Dawladda iyo Isla-xisaabtanka Maaliyadeed (PEFA).

Si kastaba ha ahaatee, muhimadda dib-u-habayntan ee la-dagaallanka musuq-maasuqa kuma koobna oo keliya qaab-dhismeedka sharci laftiisa, balse waxay ku xiran tahay in la xoojiyo hufnaanta guud iyo isku xirnaanta kheyraadka dadweynaha sida: ururinta canshuuraha iyo kastamyada, dejinta miisaaniyadda, xakameynta kharashaadka, maareynta lacagta, iibka, iyo daba-galka hanti-dhawrka. Marka la eego arrintan, waxaa loo baahan yahay in si qoto-dheer

[19] Ibid
[20] Federal Government of Somalia (2020) National Anti-Corruption Strategy (ISTIRAATIIJIYADDA) 2020–2023.

loo eego meelaha khatarta leh sida dakhliyada ka baxsan miisaaniyadda, akoonnada is-barbar socda, adeegsiga keydka maaliyadeed, dakhliga qandaraasyada dheef-wadaagga ah ee aan la xaqiijin, iyo warbixinno maaliyadeed oo aan dhammeystirnayn, kuwaasoo dhammaantood wiiqaya raad-raacidda iyo isla-xisaabtanka maamulka maaliyadda guud. Sidaa darteed, ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waa inay u aragtaa maareynta kheyraadka dadweynaha in aysan ahayn oo keliya meel guul dib-u-habayn laga gaaray, balse sidoo kale ay tahay meel halis musuq-maasuq ay weli ka jirto oo u baahan xakameyn xooggan, hufnaan, iyo fulin adag. (IMF, 2024).

Dib-u-habaynta maamulka kheyraadka aadanaha waxay bixinaysaa fursad muuqata oo lagu yareynayo halista eexda iyo khiyaanada mushaar-bixinta. Warbixinta horumarka ee uu soo saaro Bankiga Adduunka (Jan–Jun 2024) ayaa muujinaysa in Wajiga II ee hanti-dhawrka maamulka shaqaalaha iyo diiwaan-gelinta xog-dhalyada (biometric) ee shaqaalaha rayidka ee harsan la dhammeystiray, xogta shaqaalaha la geliyey nidaamka macluumaadka maareynta kheyraadka aadanaha oo hadda shaqeynaya, shaqooyinkana lagu waafajiyey nidaam mushaar iyo darajo. (Warbixinta MPF ee Bankiga Adduunka Jan–June 2024). Kuwani waa tallaabooyin xakameyn oo qiimo sare leh maadaama ay abuurayaan saldhig la xaqiijiyey oo loogu talo-galay shaqaaleysiin ku salaysan muteysi, xakameynta kharashka mushaaraadka, iyo nidaamyada anshax-marinta - haddii ay la socdaan fulin iyo hufnaan.

Si kastaba ha ahaatee, nugeyl maamul ayaa weli jira sabab la xiriirta siyaasadda dhaqaale iyo awoodda hay'adeed oo liidata. Warbixinta Tiro-koobka Maamulka waxay xustay in siyaasadda iska-hor-imaadka ku dhisan, amni-darrada, iyo adeegsiga nidaamka "4.5" halkii laga adeegsan lahaa nidaam muteysi ku saleysan ay wiiqi karaan wax-ku-oolnimada dawladda iyo kalsoonida. (SNBS, Warbixinta Tiro-koobka Maamulka 2023). Sidaas oo kale, Guddiga Khubarada ee Qaramada Midoobay ayaa tilmaamay in nidaamka federaalka iyo maamulka ay saameeyaan dib-u-dhacyada doorashooyinka iyo xiisadaha u dhexeeya Xukuumadda JFS iyo Dawlad-goboleedyada, taasoo u sahasha in dacfiinimada maamulka loo adeegsado dano gaar ah.[21]

Natiijada: ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxay u aragtaa horumarinta hay'adaha la-dagaallanka musuq-maasuqa inay tahay caqabad ka wada jirta heer federaal iyo heer Dawlad-goboleed. Istiraatijiyaddu waxay bixinaysaa falanqeyn cad oo ku saabsan xaqiiqooyinka hay'adeed ee heer gobol, qeexaysaa xiriirka shaqo ee u dhexeeya hay'adaha Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada, isla markaana muujinaysaa sida nidaamyada la-dagaallanka musuq-maasuqa loogu dejin karo si wax-ku-ool ah heerarka Dawlad-goboleed iyo degmo. Tani waxay ka mid tahay dejinta hal-beegyo qaran iyadoo la oggolaanayo qaabeyn ku habboon xaaladaha heer gobol, caddeynta waajibaadka iyo marinnada warbixinta ee u dhexeeya hanti-dhawrka, iibka, warbixinta maaliyadeed, maareynta cabashooyinka, iyo hay'adaha fulinta, iyo sidoo kale horumarinta habab iskuduwid wax-ku-ool ah, xeerar, iyo hab-

[21] United Nations Security Council (2023) *Letter dated 10 October 2023 from the Chair of the Security Council Committee pursuant to resolution 751 (1992) concerning Al-Shabaab addressed to the President of the Security Council* (S/2023/724). Available at https://www.ecoi.net/en/file/local/2100037/N2325555.pdf

raacyo shaqo (SOPs) si loo taageero wada-shaqeyn, isla-xisaabtan, iyo hirgelin tartiib-tartiib ah ee dhammaan heerarka dawladda.

Natiijooyinkani waxay saldhig u yihiin Tiirka 2aad iyo Ujeeddada Istiraatijiyadeed 2aad ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030, kuwaasoo ujeeddadoodu tahay in la dhiso hay'ado lagu kalsoonaan karo, shaqeynaya, oo leh waajibaad sharci; in la xoojiyo qaab-dhismeedyada hay'adaha; in la hay'adeeyo nidaamyada la-dagaallanka musuq-maasuqa heer federaal iyo heerarka ka hooseeya; in la hagaajiyo hufnaanta bixinta adeegyada; iyo in la adkeeyo iskuduwid hay'adeed oo xooggan, labadaba si gudban (vertically) (heerar kala duwan oo dawladda ah) iyo si joog ah (horizontally) (u dhexeeya hay'adaha muhiimka ah ee ka-hortagga, kormeerka, baarista, iyo fulinta).

2.5.3 Fulinta, baarista, iyo waxtarka garsoorka

Silsiladda fulintu waxay caddeynaysaa daciifnimo qaab-dhismeed oo ka jirta nidaamka cadaaladda, ilaalin hay'adeed oo aan joogto ahayn, iyo awood xaddidan oo aqoonta iyo takhasuska la xiriira dembiyada maaliyadeed. Caddeymaha la heli karo waxay muujinayaan in nidaamka cadaaladda dembiyada ee Soomaaliya uu weli la kulmo hab-raacyo dheer, dammaanad xaddidan oo madax-bannaanida garsoorka ah, dhibaatooyin qaab-dhismeed, marinno iskuduwid oo u dhexeeya hay'adaha, iyo daldaloollo awoodeed oo ku jira hawlaha u baahan aqoon iyo takhasus gaar ah sida hanti-dhawrka cilmiga ah (forensic audit). Daciifnimadan waxay yareynaysaa awoodda hay'adaha ee ah inay si wax-ku-ool ah u ogaadaan, u baaraan, u dacweeyaan, uguna xukumaan dacwooyinka musuq-maasuqa.

Marka la eego tiro-koobyada qaran ee la heli karo, waxaa jira tilmaamo muujinaya hagaagsanaan ku timid qulqulka xogta maamul. Warbixinta Tiro-koobka Maamulka waxay soo bandhigaysaa kala-saarid dacwooyinka dembiyada ee loo gudbiyey Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka sanadkii 2022, oo ay ku jirto qeyb loo calaamadeeyey "Musuq-maasuq" (72 dacwad) oo ka mid ah wadarta 1,678 dacwad dembiyeed oo la diiwaan-geliyey (Hay'adda Qaran ee Istaatistikada, Warbixinta Tiro-koobka Maamulka 2023). Inkasta oo tani aysan muujin natiijooyinka dacwadaha ama go'aannada, haddana waxay faa'iido u leedahay falanqeynta xaaladda maadaama ay muujinayso in musuq-maasuqu (ugu yaraan qeyb ahaan) ka muuqdo xogta dembiyada la soo sheegay isla markaana loo adeegsan karo tilmaame silsiladda dacwooyinka haddii si qaran loo mideeyo oo la isku xiro oogista dacwadaha iyo natiijada garsoorka. Sidoo kale, sanadkii 2023, Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka ayaa sameeyey hanti-baaris cilmiyeed ka dibna diyaariyey warbixin, taasoo loo gudbiyey Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka. Ka dib warbixintan, qiyaastii labaatan iyo laba (22) qof ayaa la dacweeyey, qaarna waxaa lagu helay dembiyada musuq-maasuqa ee lagu soo oogay.[22]

Isku-xirnaanta daraasadda dacwooyinka hawl-galka: Fulintu kama soocmi karto maamulka maaliyadeed. Haddii hanti-dhawrku uusan si madax-bannaan u xaqiijin karin dakhliga qandaraasyada dheef-wadaagga (concessions) ee loo soo bandhigo uu yahay midka dhabta ah (sababtoo ah

[22] Office of the Auditor General of the Federal Republic of Somalia, comments on the zero draft ISTIRAATIIJIYADDA 2026–2030, document review submission, April 2026.

warbixinnada maaliyadeed ee si madax-bannaan loo baaray ee shirkadaha lama helayo), khasaaraha dakhliga ama xaddiga la sheegay in la ururiyo oo ka hooseysa xaqiiqda ma ahan oo keliya dhibaato xisaabeed ee waxay fashil dhinaca fulinta iyo ka-hortagga ah (ku xadgudub aan cawaaqib lahayn). [23]

Natiijada: Istiraatijiyaddu waxay mudnaanta siinaysaa "cawaaqib la hubo" oo xiriir la leh noocyo xaddidan oo musuq-maasuq khatarta sare leh sida (khiyaano iib, khiyaano mushaar-bixin, leexsasho dakhli, qandaraasyo sharci-darro ah, iyo laaluush adeeg bixin), iyadoo la dejinayo natiijooyin la cabbiri karo oo ku kala socda silsiladda: ogaansho → baaris → dacwad → go'aan→ soo-celin hanti iyo ciqaab.

Natiijooyinkani waxay saldhig u yihiin Tiirka 3aad iyo Ujeeddada Istiraatijiyadeed ee 3aad ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030, kuwaasoo diiradda saaraya xoojinta iskuduwidda hay'adaha, hagaajinta awoodda baarista iyo kor-u-qaadidda wax-ku-oolnimada ogaanshaha musuqa, dacwad-oogista, iyo go'aan-ka-gaarista dacwooyinka musuq-maasuqa.

2.5.4 Nidaamyada hufnaanta iyo isla-xisaabtanka

Nidaamyada hufnaanta waa halka Soomaaliya ay ka haysato caddeymaha ugu badan ee la fulin karo lana cabbiri karo, gaar ahaan kuwa ka imanaya hanti-dhawrka rasmiga ah. Saddex qaab ayaa si gaar ah muhiim u ah:

- *Qorsheynta iibka iyo awoodda hay'adeed ee iibka:* Warbixinta U-hoggaansanaanta ee Sanad-maaliyadeedka 2023, oo daboolaysa 19 hay'adood , waxay muujisay in 7 ka mid ah 19 (sagaal iyo toban) hay'adood ay sameeyeen iib qiimihiisu dhan yahay US$39,175,442.53 iyagoo aan lahayn qorshe iib sanadle ah oo la ansixiyey. [24] Tani waxay si toos ah u taageeraysaa falanqeynta istiraatijiyadda ee ku saabsan daciifnimada qaab-dhismeedka hay'adaha iyo isla-xisaabtanka bixinta adeegyada, waxayna tilmaamaysaa daldalool xakameyn oo cad isla markaasna ay ISTIRAATIJIYADDA bar-tilmaameedsanayso.
- *Baaxadda hawlaha hanti-dhawrka gudaha*: Isla warbixinta u-hoggaansanaanta ayaa muujisay in 11 (know iyo toban) ka mid ah 19 (sagaal iyo toban) hay'adood (MDAs) aysan dhisin hawl hanti-dhawr gudaha ah sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (PFM Act), taasoo kordhinaysa khatarta khiyaano iyo khaladaad aan la ogaan, isla markaana wiiqaysa isla-xisaabtanka maamulka. [25] Tani waa daciifnimo nidaamsan oo ka jirta dhanka hufnaanta: haddiiba uu hanti-dhawrka gudaha uu maqan yahay, hanti-dhawrka dibadda wuxuu noqanayaa xakameyn xilli dambe ah, beddelna kama noqon karo hubinta joogtada ah.

- *Diiwaan-gelinta iyo hufnaanta dakhliga guud ee qiimaha sare leh iyo keydka maaliyadeed*: Warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyey ee sanadka 2023 (FY2023)

[23] Office of the Auditor General of Somalia, 2024
[24] Ibid
[25] Ibid

waxay muujinayaan in dakhliga qandaraasyada dheef-wadaagga ah (concessions) oo dhan **US$34,261,371** uusan si madax-bannaan u xaqiijin karin Hanti-dhawraha Guud, maadaama aan la helin warbixinnada maaliyadeed ee la hubiyey ee shirkadaha qandaraasyada la siiyey. Isla warbixintaas ayaa sidoo kale xustay in **US$13,484,390** laga isticmaalay xisaabta keydka maaliyadeed, balse maamulka uusan bixin qorsheyaal bixin kharash iyo warbixinno waafaqsan tilmaamaha xisaabta keydka.[26]

- *Qaab-dhismeedka maamulka ee iibka iyo qandaraasyada dheef-wadaagga ah (concessions):* Warbixinta Maamulka Maaliyadeed ee Soomaaliya 2023 waxay xoojinaysaa khataraha jira ee ka imanaya qandaraasyada halka il ah (sole-source contracting), waxayna muujinaysaa baahida loo qabo hay'ado kormeer oo xooggan.[27] Waxay sidoo kale sheegaysaa in Hay'adda Iibka ee Qaranka aan weli la dhisin, isla markaana awoodda iib ee hay'adaha ay xaddidan tahay, taasoo caqabad ku ah hirgelinta Sharciga Iibka Qaran. [28] Tani waa daldalool hay'adeed oo weyn isla markaasna muhiim u ah naqshadeynta tiirka.
- *Nidaamka Daba-gal iyo Qiimeynta (M&E):* Warbixinta Nidaamka Isku-dhafan ee Daba-gal iyo Qiimeynta (NIMEF) waxay caddeyneysaa in Soomaaliya ay hirgelisay qaab-dhismeed qaran oo daba-gal iyo qiimeyn ah (M&E) si loo xoojiyo isla-xisaabtanka Qorshaha Horumarinta Qaran (NDP-9), waxayna si cad u tilmaamaysaa baahida awood shaqaale iyo nidaamyo tiknoolojiyadeed (ICT) oo lagu taageero hawlaha kormeerka iyo qiimeynta. [29] Dib-u-eegista Dhammaadka Muddada Istiraatijiyaddii hore ee ladagaallanka musuq-maasuqa ayaa sidoo kale muujisay in Istiraatijiyadii hore aysan lahayn qaab-dhismeed daba-gal iyo qiimeyn oo dhammeystiran iyo nidaam xogeed oo xarun dhexe leh (WCAD, Feb 2026). Labadan arrimood waxay si wadajir ah u muujinayaan baahida loo qabo "nidaam kormeer iyo qiimeyn oo asaasi ah isla markaasna shaqeyn kara" oo gaar u ah ISTIRAATIJIYADDA.
- *Natiijada:* Nidaamyada hufnaantu ma ahan hal dib-u-habayn oo keliya; waa nidaamyo xakameyn oo isku xiran oo wada shaqeeya. Sidaas darteed, ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waa inay soo jeedisaa "heer xakameyn asaasi ah" oo lagu dabaqo dhammaan Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha (qorsheynta iibka, hanti-dhawrka gudaha, warbixinnada hufan, maareynta cabashooyinka, iyo warbixinnada tilmaameyaasha waxqabadka), ka dibna mudnaanta siisaa waaxyaha khatarta sare leh si loo xoojiyo xakameynta, maareynta halista musuq-maasuqa, iyo kormeerka waqtiga-dhabta ah (tusaale ahaan iibka adeegyada amniga, heshiisyada dheef-wadaagga, kastamyada/canshuur-ururiyeyaasha, iyo mushaar-bixinta).

Natiijooyinkani waxay saldhig u yihiin Tiirka 4aad iyo Ujeeddada Istiraatijiyadeed ee 4aad ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030, kuwaasoo diiradda saaraya dhisidda anshaxa, hufnaanta, kormeerka, iyo nidaamyada kormeerka iyo qiimeynta hay'adaha dawladda,

[26] Ibid

[27] Federal Government of Somalia (2023). Somalia Financial Governance Report 2023.Accssed at https://mof.gov.so/publications/somalia-financial-governance-report-2023

[28] Ibid

[29] Ministry of Planning, Investment and Economic Development (2024) *National Integrated Monitoring and Evaluation Framework (NIMEF) Report*. Available at: https://mop.gov.so/wp-content/uploads/2024/09/NIMEF-Report_.pdf

iyadoo la adeegsanayo barnaamijyo joogto ah, qaab-dhismeed kormeer iyo qiimeyn oo dhammeystiran, iyo habab kormeer oo ay wadaagaan hay'ado badan.

2.5.4. Ka-qeyb-galka dadweynaha iyo rabitaanka siyaasadeed

Ka-qeyb-galka dadweynuhu waxaa udub-dhexaad u ah ogaanshaha iyo ka-hortagga musuq-maasuqa, gaar ahaan xaaladaha uu ku sugan yahay dal nugul, sababtoo ah warbixinnada muwaadiniinta, kormeerka warbaahinta, iyo daba-galka bulshada rayidka ayaa kaabaya awoodda xaddidan ee dawladda. Si kastaba ha ahaatee, caddeymuhu waxay muujinayaan in ka-qeyb-galka dadweynaha uu ku xaddidan yahay caqabado la xiriira helitaanka xogta iyo cadaadisyo saameeya fursadda bulshada rayidka ah.

- *Helitaanka xogta*: Warbixinta Tiro-koobka Maamulka waxay sheegaysaa in aan wax horumar ah laga sameyn diyaarinta hindise-sharciyeedka helitaanka xogta, iyadoo natiijadeedu tahay in muwaadiniintu si dhab ah loogu diido helitaanka xogta, isla markaana helidda xogta dawladda ay tahay mid adag, inkastoo dastuurku aqoonsanayo xaqa helitaanka xogta. (Warbixinta Tiro-koobka Maamul-wanaagga ee 2023). Tani waxay si toos ah ula xiriirtaa la-dagaallanka musuq-maasuqa: haddii aan la heli karin xogta miisaaniyadda, qandaraasyada, daba-galka hanti-dhawrka, iyo heerarka adeegyada, muwaadiniintu si dhab ah ulama xisaabtami karaan hay'adaha dawladda.
- *Jihada sharci-dejinta iyo khatarta:* Dib-u-habaynta helitaanka xogta waa arrin leh muhimad siyaasadeed iyo mid farsamo oo sare. ISTIRAATIJIYADDA kuma koobna u qareemid "sharciyo keliya", balse diiradda waxay saaraysaa qaab-dhismeed waafaqsan xuquuqda iyo xeerar si dhab ah loo hirgelin karo.
- *Horumarka iyo xaddidaadaha ka-qeyb-galka:* Dib-u-eegista Dhammaadka Muddada ee Isataraatiijiyaddii hore waxay sheegaysaa in qiyaastii 50 kulan oo wacyi-gelin iyo ka-qeyb-gal dadweyne ah laga qabtay horumarka la-dagaallanka musuq-maasuqa, isla markaana tababarro anshax oo booliiska la siiyey ay gaareen tiro badan (WCAD ETR, Feb 2026). Kuwani waa wax-soo-saar muhiim ah, balse Cutubka Labaad wuxuu tilmaamayaa inay yihiin kuwo aan ku filnayn haddii aysan jirin nidaamyo jawaab-celin hay'adeed (qabashada cabashooyinka, daba-galka dacwooyinka, warbixin dadweyne, iyo hababka ilaalinta).

Natiijada: ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxay u qaabeynaysaa ka-qeyb-galka dadweynaha sidii nidaam isla-xisaabtan laba-dhinacle ah: wacyi-gelinta waa in lagu lammaaniyaa marinno ammaan ah oo warbixin lagu gudbiyo, hufnaan heer adeeg ah, iyo cawaaqib la arki karo oo ka dhasha warbixinnada musuq-maasuqa.

Natiijooyinkani waxay saldhig u yihiin Tiirka 5aad iyo Ujeeddada Istiraatijiyadeed ee 5aad ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030, kuwaasoo diiradda saaraya xoojinta wacyiga dadweynaha, ka-qeyb-galka daneeyeyaasha, ballan-qaadka siyaasadeed, iyo ka-hortagga musuq-maasuqa ee labada qeybood, qeybta dawladda iyo qeybta gaarka loo leeyahay.

2.6. Sababaha Asaasiga ah, Caqabadaha isku-dhafan iyo Fursadaha

Caddeymaha ka soo baxaya dhammaan tiirarka waxay muujinayaan asbaab isku xiran oo asaasi ah iyo arrimo go'aamiya "waaxaa shaqeynaya" marka la dejinayo istiraatijiyadda.

1. *Go'aan-qaadasho ku salaysan amni iyo maal-gelin is-barbar socda*: Amni-darradu waxay kordhisaa iibka degdegga ah, mugdiga ku jira qeybta amniga, iyo dhiirri-gelinta canshuur aan rasmi ahayn iyo leexsashada kheyraadka. Warbixinnada IMF waxay xusayaan in Soomaaliya ay soo saartay hagayaal iibka degdegga ah (July 2023) si loo qeexo xaaladaha degdegga ah iyo hababka la oggol yahay, iyadoo ujeeddadu tahay in la sameeyo dammaanado ka-hortagaya khasaaraha isla markaana loo oggolaado iibka degdegga ah taasoo muujinaysa labadaba baahida iyo heerka khatarta ee kharashaadka la xiriira amniga.[30]
2. *Xiriirka Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada iyo isla-xisaabtan kala qoqoban:* Khatarta soo noqnoqota waa hirgelinta xeerarka oo aan loo sinnayn iyo fulin daciif ah oo ay ka midaysan yihiin heerarka kala duwan. Guddiga Khubarada ee Qaramada Midoobay ayaa tilmaamay in iskaashi daciif ah oo u dhexeeya Dawladda federaalka iyo Dawlad-goboleedyda uu u sahlo ka faa'iidaysiga daciifnimada maamulka (tusaale ahaan leexsashada dakhliga kalluumeysiga) (Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, 2023). Sidaas darteed, dib-u-habaynta hufnaanta waa in loo qaabeeyaa "hal-beegyo federaaleysan oo wada-shaqeyn leh, ee aan lagu koobin oo keliya xeerar federaal ah.

3. *Siyaasadda dhaqaale iyo dhiirri-gelinta eexda*: Sida warbixinta Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya ay tilmaamayso, qaab-dhismeedka awood-qeybsiga ku salaysan qabiilka iyo maamulka aan ku dhisnayn muteysiga waxay yareynayaan wax-ku-oolnimada iyo kalsoonida, isla markaana kordhinayaan u-nuglaanshaha shaqaaleysiin eex ku salaysan iyo adeegsiga xiriirrada si shaqo loo helo. (Warbixinta Tiro-koobka Maamul-wanaagga ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka 2023). Tani waxay ka muuqataa dib-u-habaynta maamulka halkaasoo baarista lagu sameeyey maamulka shaqaalaha, diiwaan-gelinta xog-dhalyada, iyo nidaamka mushaar-bixinta iyo darajeynta loo arko tallaabooyin muhiim ah oo meesha looga saarayo eexda iyo faro-gelinta mushaaraadka. (Warbixinta MPF ee Bankiga Aduunka Janaayo–Juun 2024).
4. *Xaddidnaanta karaanka iyo daldaloollada xogta*: Xaddidnaanta awoodda iibka ayaa si cad loogu diiwaan-geliyey Warbixinta Maamulka Maaliyadeed 2023, oo ay ku jiraan baahiyaha aan haqab-tirin ee dhismaha unugyada iibka iyo maqnaanshaha Hay'adda Iibka ee Qaranka (Warbixinta Maamul-wanaagga Maaliyadeed ee Soomaaliya, 2023). Sidoo kale, nidaamyada tiro-koobka maamulka qaran weli waxaa xaddidaya yaraanta xogta maamulka iyo xogta sahaminta, taasoo caqabad ku ah cabbirka horumarka iyo ogaanshaha dhibaatooyinka. (Warbixinta Tiro-koobka Maamul-wanaagga ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka 2023).

[30] International Monetary Fund (2024) *Somalia: 2023 Article IV Consultation, Sixth Review Under the Extended Credit Facility Arrangement, and Requests for a New Three-Year Arrangement Under the Extended Credit Facility and an Arrangement Under the Resilience and Sustainability Facility*. IMF Country Report No. 24/1. Available at https://www.imf.org/-/media/files/publications/cr/2024/english/1somea2024001.pdf

5. *Fursadaha dhijitaaleynta*: Xakameynta dhijitaalka ah waa fursad muuqata oo lagu yareeyo go'aan-qaadashada ku salaysan ikhtiyaarka shakhsiga ah isla markaana lagu hagaajiyo raad-raacidda. Bankiga Adduunka ayaa xaqiijiyey in nidaamka macluumaadka maareynta kheyraadka aadanaha (HRMIS) uu si buuxda u shaqo galay isla markaana dhammaan boosaska shaqada (jagooyinka) la waafajiyey nidaamka mushaarka iyo darajada ka dib baarista nidaamka maamulka shaqaalaha iyo diiwaan-gelinta xog-dhalyada, taasoo bixinaysa madal lagu xoojin karo hufnaanta mushaarka, xakameynta tirada shaqaalaha, iyo maamulka ku salaysan muteysiga (Warbixinta MPF ee Bankiga Aduunka Janaayo–Juun 2024). Warbixinnada IMF sidoo kale waxay tilmaamayaan ballaarinta nidaamka raad-raaca qaan-sheegadka iyo dib-u-habaynta hab-raacyada iibka, taasoo sii xoojinaysa qiimaha istiraatijiyadeed ee nidaamyada danabaysan (E-Systems)..[31]
6. *Maal-gelinta dibadeed iyo halista leexsashada gargaarka*: Xaaladda Soomaaliya ee ku tiirsan gargaarka bini'aadanimo iyo maal-gelinta deeq-bixiyeyaasha waxay abuureysaa caqabado dheeraad ah oo ku aaddan hufnaanta. Dib-u-eegista UNCAC IRM Wareegga 1aad waxay tilmaamaysaa in halista musuq-maasuqa ee Soomaaliya ay gaarto gargaarka caalamiga ah, oo ay ku jiraan leexsashada ay sameeyaan dadka ka shaqeeya hawlaha gargaarka "gatekeepers" kuwaasoo ka macaasha helitaanka, yareeya qulqulka gargaarka, saameeya cidda hesha, isla markaana qabsada adeegyada loogu talo-galay bulshada nugul. Isla falanqeyntaas ayaa sidoo kale muujinaysa ku tiirsanaanta sii socota ee Soomaaliya ay ku tiirsan tahay gargaarka dibadeed, waxayna ku talinaysaa xoojinta iskuduwidda habab sida Kooxda Ka-hortagga Leexsashada Gargaarka (PDAD), iyadoo la hagaajinayo hufnaanta, marinno warbixin ammaan ah, iyo awoodaha raad-raaca iyo daba-galka gargaarka la helay. Sidaas darteed, ISTIRAATIJIYADDA waxay soo kordhinaysaa dammaanado hufnaan oo loogu talo-galay barnaamijyada lagu taageero dibadda, isla markaana waxay xoojinaysaa nidaamyada hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo xakameynta ee lagu maareeyo kheyraadkaas.

2.7. Saameynta ay ku leeyihiin naqshadeynta istiraatijiyadda ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030

Saameyntan soo socota waxaa taageeraya caddeymaha kor ku xusan waxayna la jaan-qaadayaan tiirarka istiraatijiyadda.

1. *In mudnaan la siiyo "xirmo asaasi ah" oo sharci iyo hay'adeed xilli hore:* Iyadoo aysan jirin ilaalinta wargeliyeyaasha musuq-maasuqa iyo markhaatiyaasha, nidaamka shaacinta hantida oo leh xaqiijin iyo ciqaab, xeerarka iska-hor-imaadka danaha, iyo sharciyada/xeerarka helitaanka xogta, istiraatijiyaddu waxay ku sii tiirsanaanaysaa fulin ku salaysan ikhtiyaar shakhsiyeed oo siyaasiyad ahaan xasaasi ah (Warbixinta OHCHR, 2024).
2. *In la kala hormariyo xakameynta hufnaanta iyo fulin muuqata*: Caddeymaha hanti-dhawrka ee Soomaaliya waxay muujinayaan fashil weyn oo la raad-raaci karo (qorsheynta iibka, maqnaanshaha hanti-dhawrka gudaha, daldaloollada diiwaan-gelinta

[31] MF Country Report No. 24/158, June 2024

ee dakhliga qandaraasyada dheef-wadaagga iyo keydka maaliyadeed). Wax-ka-qabashadooda si nidaamsan waxay yareynaysaa fursadaha musuq-maasuqa iyadoo dhisaysa saldhig caddeyn oo xooggan laguna saleyn karo baaritaannada. [32]

3. *Beegsashada tiro kooban oo "dacwado" halis sare leh si loo helo fulin lagu kalsoonaan d karo*: Si looga fogaado fiditaan aan la xakameyn, diirrad-saaridda noocyo kooban oo musuq-maasuq oo leh saameyn maaliyadeed sare iyo muuqaal guud oo weyn khiyaano iib, khiyaano mushaar, leexsasho dakhli, iyo hababka qaldan ee qandaraasyada dheef-wadaagga ka dibna la daabaco shaxda qulqulka dacwooyinka: eedeymaha la helay, dacwooyinka la kala saaray, baaritaannada la furay, dacwadaha la oogay, go'aan-gaaris, soo-celinta hantida, iyo ciqaabaha maamulka (Warbixinta Tiro-koobka Maamul-wanaagga ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka 2023).
4. *In la dhiso wada-shaqeyn federaal ah (interoperability) iyo heerarka ugu yar:* Daciifnimada iibka iyo hanti-dhawrka gudaha ma ahan arrimo federaal oo keliya ee waa in la dejiyo heerar ugu yar ee maamul ee lagu dabaqo dhammaan Wasaaradaha, Waaxyaha Iiyo Wakaaladaha (MDAs) iyo dhiggooda Dawlad-goboleedyada (daabacaadda qorshaha iibka, jiritaanka hanti-dhawr gudaha, daba-galka hanti-dhawrka, qabashada cabashooyinka, iyo warbixinta), iyadoo la taageerayo hab-raacyo la waafajiyey iyo kaabayaal dhijitaal oo wadaag ah (Warbixinta Maamul-wanaagga Maaliyadeed ee Soomaaliya, 2023).
5. *In la qeexo guulo degdeg ah oo la cabbiri karo muddo 6–12 bilood ah:* Istiraatijiyaddu waa inay aqoonsataa tiro kooban oo aagagga mudnaanta leh oo si marxaladeysan loo hirgelinayo. Si loo taageero kormeer waaqic ah, tallaabooyinkan waa in, intii suurta-gal ah, lagu cabbiraa xog maamul ee hadda ka jira nidaamyada dawladda iyo hay'adaha kormeerka, halkii lagu tiirsanaan lahaa ururin xog cusub oo kharash badan leh.

    - qorsheyaasha iibka sanadlaha ah iyo qandaraasyada la bixiyey oo loo daabaco Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha si tijaabo ah; [33]
    - Unugyo hanti-dhawr gudaha ah oo la dhiso (ama la qaato nidaam adeeg wadaag ah) ee Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha mudnaanta leh, iyadoo la dejinayo siyaasad, waajibaad, iyo hab-raac shaqo (SOPs) cad oo hagaya hawlahooda;
    - nidaam lagu daba-galo hirgalinta talooyinka hanti-dhawrka ah iyadoo laga bilaabayo xakameynta iibka iyo khasnadda, lana raacinayo hab-raac shaqo oo cad oo ku saabsan daba-galka, warbixinta, iyo fulinta;
    - Looxad-xogeed (Dashboard) daba-galka dacwooyinka ah oo la sameeyo lana hawl-geliyo si loogu adeegsado hay'adaha loo oggolaaday, iyadoo la hubinayo ilaalinta xogta, xakameynta gelitaanka, iyo asturnaanta xogta;
    - daabacaadda hagayaasha/hab-raacyada hore loo ansixiyey (tusaale ahaan hagaha iibka degdegga ah, iyo hab-raaca kormeerka qandaraasyada).[34]

[32] Office of the Auditor General of Somalia, 2024
[33] Ibid
[34] MF Country Report No. 24/158, June 2024

In la hay'adeeyo nidaam daba-gal iyo qiimeyn oo la jaan-qaadaya xaqiiqda xogta ee Soomaaliya: In la dhiso "Daba-gal iyo Qiimeyn ee ISTIRAATIJIYADDA oo shaqeyn kara" oo la jaan-qaadaya mabaadi'da NIMEF, tilmaameyaal kooban, waajibaad cad, habab xaqiijin oo qeexan, iyo jadwal warbixin dadweyne oo joogto ah—halkii laga sameyn lahaa tiro badan oo tilmaameyaal ah oo si lagu kalsoonaan karo aan loo soo saari karin. (MoPIED, 2024).

2.8. Is-barbar-dhigga tilmaameyaasha muhiimka ah iyo Shaxda tallaabooyinka hortebyada leh

Jadwalka 4: Dulmar guud oo ku saabsan xaaladda, caddeynta, iyo tallaabooyinka mudnaanta leh

Tiir	Tilmaame	Xaalad	Ilaha Caddeynta	Tallaabada hortebyada leh ee la soo jeediyey
Hufnaan iyo Isla-xisaabtan	**Qorsheynta Iibka ee sanadlaha**	7 (todobo) ka mid ah 19 (sagaal iyo tobanka) hay'adood ee la hanti-dhawray ayaa sameeyey iibab dhan US$39.2 milyan iyagoo aan lahayn qorshe iib oo la ansixiyey	Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka, 2024	In la waajibiyo dhammaan hay'adaha dawladda (MDAs) inay diyaariyaan qorsheyaasha wax-iibsiga (procurement plans); in qorsheyaashaas iyo warbixinaha u-hoggaansanaanta (compliance dashboards) la daabaco; lana dhaqan-geliyo ciqaabo ka dhan ah hay'adaha aan u hoggaansamin.
Hufnaan iyo Isla-xisaabtan	**Baaxadda hawlaha hanti-dhawrka gudaha**	11 (kow iyo toban) ka mid ah 19 (sagaal iyo tobanka) ah MDAs ee la hanti-dhawray ma lahayn hawl hanti-dhawr gudaha ah sida uu qabo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud	Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka, 2024	In hanti-dhawrka gudaha (internal audit) laga dhigo heer hay'adeed oo waajib ah; in la hirgeliyo nidaamyo wadaag ah oo hanti-dhawr gudaha ah meelaha ay shaqaaluhu ku yar yihiin; isla markaana nidaamyadan lagu taageero siyaasado hanti-dhawr gudaha oo si rasmi ah loo ansixiyey, xeerarka (charters) la oggolaaday, qorsheyaal sanadle ah, iyo hab-raacyo cadcad (SOPs) si loo hago hirgelinta iyo isla-xisaabtanka.
Hufnaan iyo Isla-xisaabtan	**Xaqiijinta dakhliga qandaraasyada dheef-wadaagga ah**	Hanti-dhawraha ma xaqiijin karin in US$34.26 milyan oo dakhliga qandaraasyada (concessions) ay ahaayeen lacago dhab ahaan la bixinayey (warbixinno maaliyadeed oo la hanti-dhawray lama bixin)	Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka, 2024	In shirkadaha heshiisyada dheef wadaagga ah (concessionaires) kula jito dawladda lagu waajibiyo inay soo gudbiyaan warbixinno maaliyadeed oo la hanti-dhawray; in la daabaco heerka u-hoggaansanaantooda; isla markaana la waafajiyo kormeerka IMCC iyo daba-galka hanti-dhawrka.
Hufnaan iyo Isla-xisaabtan	**Maamulka keydka maaliyadeed**	US$13.48 milyan ayaa laga isticmaalay xisaabta keydka maaliyadeed iyadoo aan la bixin qorshe bixitaan iyo warbixin waafaqsan hagayaasha	Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka, 2024	In la xoojiyo maamulka iyo nidaamka qoondada dheeraadka-: in la daabaco xeerarka iyo hab-raacyada, in la waajibiyo oggolaansho iyo dukumeenti cad, isla markaana si sanadle ah loo sameeyo hanti-dhawr ku saabsan

Tiir	Tilmaame	Xaalad	Ilaha Caddeynta	Tallaabada hortebyada leh ee la soo jeediyey
				isticmaalka qoondada dheeraadka ah.
Maamulka Guud iyo hay'adaha dawladda	Awoodda Hay'adda Iibsiga Guud	Hay'adda Iibsiga Guud weli lama dhisin; awoodda iibsiga ee Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyaduna waa xaddidan tahay	Warbixinta Maamulka Maaliyadeed ee Soomaaliya, 2023	In si buuxda loo hawl-geliyo Hay'adda Iibka Qaranka (Public Procurement Authority) si waafaqsan Xeerka iibsiga iyo Qandaraasyada Qaranka; in la xoojiyo hab-raacyada shahaado-siinta iibka; isla markaana la hirgeliyo barnaamijyo xooggan oo kor loogu qaadayo awoodda shaqaalaha iibka ee hay'adaha dawladda (MDAs), si loo wanaajiyo u-hoggaansanaanta, xirfaddda, iyo kormeerka, oo ay ku jiraan ku-dhawaaqista gaar ahaaneed ee iska-hor-imaadka danaha ee shaqaalaha iibka
Fulinta iyo waxtarka garsoorka	Xaddidaadaha hufnaan ee nidaamka garsoorka	Maal-gelin yari iyo aqoonta takhasiga ah oo xaddidan ayaa caqabad ku ah dib-u-habaynta; dib-u-dhac mushaarkuna wuxuu kordhiyaa musuq-maasuqa	Aqoon-isweydaarsiga kulanka Wada-tashiga MoJCA, 2026	In lagu waajibiyo qorsheynta iibka ee sanadlaha dhammaan Wasaaradaha, Waaxaha a iyo Wakaaladaha MDAs; in la daabaco qorsheyaasha iyo dashboards-ka u-hoggaansanaanta; in la soo rogo ciqaab/ganaax haddii aan la raacin tilmaantaas.
Maamulka Guud iyo hay'adaha dawladda	Xakameynta hufnaanta maamulka shaqaalaha HR/mushaar-bixinta	Hubinta nidaamka maamulka shaqaalaha iyo diiwaan-gelinta xog-dhalyada waa la dhammeystiray; HRMIS waa shaqeynayaa; jagooyinka waxaa la waafajiyey nidaamka mushaar-bixinta (payroll) iyo darajada shaqaalaha	Warbixinta MPF ee Bankiga Adduunka Jan–June 2024	In hanti-dhawrka gudaha laga dhigo xafiis hay'adeed oo waajib ah; in la qaato nidaam adeeg-wadaag ah marka ay shaqaale yari jirto; in la dejiyo siyaasado, xeerar, qorsheyaal sanadle ah, iyo hab-raac shaqo oo cad.
Fulinta iyo waxtarka garsoorka	Dacwooyinka musuq-maasuqa ee la diiwaan-geliyey	Banaadir 2022, qeybta "musuq-maasuqa" waxay muujisay 72 dacwad oo ka mid ah 1,678 dacwad dembiyeed oo la gudbiyey	Warbixinta Tiro-koobka Maamulka ee SNBS, 2023	In la waajibiyo hanti-dhawrka warbixinnada maaliyadeed ee shirkadaha qandaraasyada dheef-wadaagga ah ee lagu jiro; in la daabaco heerka u-hoggaansanaanta; in la waafajiyo kormeerka IMCC iyo daba-galka hanti-dhawrka
Qaab-dhismeed sharci iyo siyaasadeed	Ilaalinta wargeliyaha /markhaatiyaasha	Sharci qabyo-qoraal ah ayaa sugaya ansixinta Golaha Wasiirrada (illaa 2024); daldaloollada ilaalintu weli way jiraan.	Soo koobista Dib-u-eegista UNCAC IRM Wareegga 1, 2025; Warbixinta OHCHR, 2024.	In la xoojiyo maamulka qoondada dheeraadka: in la daabaco xeerarka, la waajibiyo oggolaansho iyo diiwaan-gelin, lana sameeyo hanti-dhawr sanadle ah.
Hufnaan iyo Isla-xisaabtan maamul	Waajibaadka hufnaanta hanti-dhawrka	Sharciga Xafiiska Hanti-dhawrhaa Guud ee Qarank wuxuu farayaa in warbixinnada lagu daabaco 1 (hal) bil gudaheed marka loo gudbiyo Baarlamaanka; dacwooyinka eedeynta dembiyeedna loo gudbiyo Xeer-ilaaliyaha Guud Qaranka.	Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka, Sharciga Lr. 14, 10 Sebteembar 2023	In la dhiso awood gaar ah oo dembiyada maaliyadeed ah oo ka dhexeysa silsiladda fulinta; in la caddeeyo doorka Xarunta Warbixinta Maaliyadeed; in la xoojiyo awoodda baarayaasha, dacwad-oogayaasha, iyo garsoorayaasha; iyo in la taageero iskuduwid iyo kheyraad gaar loo qoondeeyey

2.8. Isku-tiirsanaanta Tiirarka iyo Khariidadda Faro-gelinnada Hortebyada iyo Mudnaanta leh

Jaantuska hoose wuxuu soo koobayaa sida daciifnimada iyo dib-u-habayntu isula fal-galaan guud ahaan tiirarka, wuxuuna aqoonsanayaa faro-gelinnada hortebyada leh ee wax ka qabta tiirar badan markiiba (saldhigyada sharci, waajibaadka hay'adaha, xakameynta hawl-galka, kalsoonida fulinta, iyo isla-xisaabtanka dadweynaha).

Caqabadaha

Amni-darro iyo kharashaad degdeg ah; kala-qeybsanaanta dawladda federaal iyo Dawlad-goboleedyada; eex iyo siyaasadda dhaqaalaha ku saleysan; awood hoose iyo dhiirri-gelin daciif ah; dhijitaaleyn hoose iyo isku-xirnaan nidaam oo liidata; daldaloollo xogeed iyo hufnaan xaddidan..

↓ Kuwani waxay qaabeeyaan dhiirri-gelinta, waxqabadka hay'adaha, iyo u-nuglaanshaha musuq-maasuqa.

Meelaha ugu badan ee khatarta musuq-maasuqa nidaamkan ka jiro

Iibka iyo qandaraasyada dheef-wadaagga ah; dakhliga iyo maamulka canshuuraha; mushaarka iyo maamulka shaqaalaha; bixinta adeegyada dadweynaha; silsiladda cadaaladda iyo fulinta; barnaamijyada iyo qulqulka gargaarka ee dibadda.

↓ Kuwani waxay abuuraan halis ku fidsan dhammaan shanta tiir ee istiraatijiyadda

Tiirka 1aad: Qaab-dhismeed sharci Iyo Siyaasadeed	Tiirka 2aad: Maamulka Guud Iyo Qaab-dhismeedka hay'adaha	Tiirka 3aad: Fulin, Baaris iyo waxtarka garsoorka	Tiirka 4aad: Nidaamyada Hufnaanta iyo isla-xisaabtan	Tiirka 5aad: Ka-qeyb-galka dadweynaha iyo ballan-qaadyada siyaasadeed
Sharciyo, xeerar, ciqaabo, iyo aalado iskaashi; ilaalinta wargeliyeyaasha musuq-maasuqa iyo markhaatiyaasha; shaacinta hantida; iska-hor-imaadka danaha; hadiyadaha; helitaanka xogta; iskaashiga sharciyeed (MLA) iyo waafaqsanaanta UNCAC.	Waajibaadyo iyo qaab-dhismeedyo; iskuduwid gudban iyo mid joog ah; heerar federal, Dawlad-goboleed iyo meelayn; shaqaale, kheyraad iyo hufnaanta adeegyada; qaab-dhismeedka hay'adaha.	Ogaansho, baaris, dacwad-oogis, iyo go'aan-gaaris; iskuduwidda dembiyada maaliyadeed iyo Ka-hortagga lacag-dhaqidda; hufnaanta garsoorka; ilaalinta hawlwadeennada nidaamka cadaaladda; raad-raaca iyo soo-celinta hantida; maareynta dacwooyinka,	Xakameynta iyo hufnaanta iibsiga; hanti-dhawrka gudaha iyo daba-galka hanti-dhawrka; nidaamyada shaacinta; maareynta khatarta musuq-maasuqa; dashboards kormeer iyo qiimeyn ah; anshax, hab-raacyo shaqo, iyo heerar xakameyn asaasi ah	Helitaanka xogta (ATI) iyo hufnaanta adeegyada; marinno warbixin ammaan ah; wacyi-gelin dadweyne; kormeer muwaadiniin; ka-qeyb-galka warbaahinta iyo bulshada rayidka; ballan-qaad siyaasadeed oo muuqda.

↓ Tiirarkani waxay u baahan yihiin tallaabooyin iskuduwan oo isla fal-gala

Tallaabooyin mudnaan leh oo isla fal-gelaya				
1. Saldhigyo Sharci Saldhigyada sharci ee Ilaalinta wargeliyeyaasha musuq-maasuqa iyo markhaatiyaasha, shaacinta hantida, iska-hor-imaadka danaha, hadiyadaha, iskaashiga sharciyeed (MLA), iyo helitaanka xogta.	**2. Hay'ado iyo iskuduwitaano** Qaab-dhismeedka hawl-galka, xeerarka, hab-raacyada shaqo, hab-raacyada gudbinta dacwooyinka, iyo hal-beegyada u dhexeeya dawladda Federaalka iyo dawlad-goboleedyada.	**3. Tallaabooyinka xakameyn ee mudnaanta leh** Qorsheyaasha iibka iyo qandaraasyada, baaxadda hanti-dhawrka gudaha, daba-galka hanti-dhawrka, isu-waafajinta dakhliga, iyo yareynta khatarta musuq-maasuqa.	**4. Fulin lagu kalsoonaan karo** Baaritaannada maaliyadeed, maareynta dacwooyinka, awood takhasus leh oo garsoor, hufnaanta garsoorka, iskuduwidda ka-hortagga lacag-dhaqidda, iyo soo-celinta hantida.	**5. Kaqey gal dadweyn iyo ballan-qaad siyaasadeed** Marinno warbixin ammaan ah, wacyi-gelin bulsho, jawaab-celin muwaadiniin, ka-qeyb-gal warbaahinta iyo bulshada rayidka, kormeer baarlamaan, iyo daba-gal muuqda.

↓ Faro-gelintani waxay wax ka qabtaan daldaloollada u dhexeeya tiirarka waxayna hagaajiyaan isku-xirnaanta hirgelinta

Natiijooyinka la filayo ee degdegga ah / muddada dhow

Saldhigyo sharci iyo hay'adeed oo cad; iskuduwid Federaalka iyo Dawlad-goboleed oo xooggan; yareynta go'aan-qaadashada ku salaysan ikhtiyaarka shakhsiyeed iyo xakameyn adag oo ka jirta iibka a, dakhliga, iyo hawlaha kale ee khatarta sare leh; hanti-dhawrka gudaha oo hagaaga, daba-gal hanti-dhawr oo xoojgeysta, iyo maareyn halis musuq-maasuq oo wanaagsanaanta; silsilad dacwooyinka musuq-maasuqa iyo dembiyada maaliyadeed oo lagu kalsoonaado; habab warbixin oo ammaan ah; isla-xisaabtan dadweyne, hufnaan, iyo jawaab-celinta hay'adeed oo la xoojiyo.

Jaantuska 1: : Isku-xirnaanta Tiirarka ISTIRAATIJIYADDA iyo Khariidadda Faro-gelinnada Mudnaanta Leh

CUTUBKA SADDEXAAD
JIHADA ISTARAATIJIYADEED

3.1. Hordhac

Jihada Istiraatijiyadeed waxaa laga soo qaatay Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP) 2025–2029, kaasoo higsanaya Soomaaliya leh maamul deggan oo loo dhan yahay, iyo sidoo kale heshiisyada caalamiga ah ee waajibinaya Soomaaliya inay dhisto habab looga hortago lagulana dagaallamo musuq-maasuqa isla markaana la horumariyo maamul-wanaagga. Waxay ujeeddadeedu tahay fulinta waajibaadka Soomaaliya ee heer gobol iyo caalami ee la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo dhidibbo-u-aasidda maamul-wanaagga. Cutubkani wuxuu soo bandhigayaa yoolka istiraatijiyadeed iyo tiirarka istiraatijiyadeed ee suurta-gelinaya hirgelinta aragtida.

3.2. Aragti iyo Himmillo

Qorshaha Istiraatijiyadeed waxaa loo diyaariyey si loo gaaro aragtida iyo himmillada sida hoos ku xusan:

ISTARAATIJIYADDA QARAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA (2026–2030)

ARAGTI

Bulsho Ku Dhisan Anshax iyo Hufnaan

HIMMILLO

In la horumariyo hufnaanta, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka nolosha dadweynaha iyadoo la xoojinayo qiyamka iyo hay'adaha, la fulinayo sharciyada, lana dhiirri-gelinayo ka-qeyb-galka muwaadiniinta si looga hortago loolana dagaallamo musuq-maasuqa.

3.3. Qiyamka Asaasiga ah

Qorshaha Istiraatijiyadeed wuxuu ku salaysan yahay qiyamka asaasiga ah ee soo socda:

- Hufnaan
- Daah-furnaan
- Isla-xisaabtan
- Ka-qeyb-gal loo dhan yahay
- Isku dheelli-tirnaan

3.4. Mabaadi'da Hagaya

Qorshaha Istiraatijiyadeed waxaa hagaya mabaadi'da muhiimka ah ee soo socda:

- Ku-dhaqanka sharciga
- Hab-raac sharci oo sax ah isku-xirnaanta nidaamka federaalka
- Ka-qeyb-gal loo dhan yahay
- Tallaabo qaadis ku salaysan caddeyn

3.5. Yoolka Istiraatijiyadeed

In la yareeyo lagana hortago musuq-maasuqa iyadoo la dhiirri-gelinayo hufnaanta, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka dhammaan heerarka dawladda iyo bulshada.

3.6. Baaq xooggan

La-dagaallanka musuq-maasuqa ma ahan oo keliya waajib sharci iyo maamul, balse sidoo kale waa waajib diin iyo mid anshax ku dhisan. Qur'aanka Kariimka ah wuxuu cambaareeyaa laaluushka, cadaalad-darrada, khiyaanada ama jebinta ammaanada, iyo ku-takri-falka awoodda, isla markaana wuxuu adkeeyaa cadaaladda, hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo mas'uuliyadda ilaalinta kheyraadka. Casharradani waxay bixinayaan saldhig adag oo anshaxeed iyo kuwo akhlaaqeed oo lagu xoojinayo dadaallada la-dagaallanka musuq-maasuqa, waxayna xusuusinayaan in hufnaantu ay tahay waajib dadweyne iyo mid diini ah labadaba.

وَلَا تَأْكُلُوا أَمْوَالَكُمْ بَيْنَكُمْ بِالْبَاطِلِ وَتُدْلُوا بِهَا إِلَى الْحُكَّامِ لِتَأْكُلُوا فَرِيقًا مِنْ أَمْوَالِ النَّاسِ بِالْإِثْمِ وَأَنْتُمْ تَعْلَمُونَ)

سورة البقرة (188)

Surah Al-Baqarah (2:188)

"Hana ku cunina Xoolihiinna dhexdiinna si baadil (Xaq darro ah) hana u dhiibina (qaab Laaluush) madaxdiina (Xukaamta) si ay idin kaga caawiyaan) inaad cuntaan qeyb ka mid ah Xoolaha Dadka si dembi ah idinkoo og (in ay dembi tahay)"

3.7. Tiirarka iyo Arrimo Istiraatijiga Ah

Qorshahan istiraatijiyadeed ee qaran wuxuu hirgelinayaa ajande isbeddel keeni kara oo lagu horumarinayo maamul-wanaagga lagulana dagaallamayo musuq-maasuqa Soomaaliya, iyadoo lagu taageerayo shan tiir oo istiraatijiyadeed sida ku cad jaantuska hoose.

Ajandaha Isbeddelka ee Qorshaha Istiraatijiyadeed 2026–2030

ARAGTI: Bulsho ku dhisan anshax iyo hufnaan

↓

Yoolka Istiraatijiyadeed: In la yareeyo lagana hortago musuq-maasuqa iyadoo la dhiirri-gelinayo hufnaanta, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka dhammaan heerarka dawladda iyo bulshada

↓

↓



Jaantuska 2: Wuxuu muujinayaa ajandaha isbeddelka ee Qorshaha Istiraatijiyadeed 2026–2030

Arrimaha istiraatijiyadeed waa natiijada ka soo baxday dib-u-eegista ISTIRAATIJIYADDA 2020–2023, natiijooyinka Qiimeynta Qaran ee Khataraha Musuq-maasuqa, iyo falanqeynta xaaladda dalka iyo dibadda ee hirgelinta qorshihii istiraatijiyadeed ee dhammaaday.

3.6.1. Tiirka 1 – Qaab-dhismeed Sharci iyo Siyaasadeed

Horumarinta maamul-wanaagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa waxay u baahan yihiin sharciyo awood siinaya iyo qaab-dhismeedyo siyaasadeed oo adag. iyadoo Soomaaliya ay tahay dal ka tirsan UNCAC iyo AUCCPC, waxaa saaran waajib ah inay dejiso sharciyo cad, la fulin karo, isla markaana la jaan-qaadaya heerarka caalamiga ah si loo taageero la-dagaallanka musuq-maasuqa loona horumariyo maamul-wanaagga. Dib-u-eegista ISTIRAATIJIYADDA 2020–2023 iyo Qiimeynta Qaran ee Khataraha Musuq-maasuqa waxay aqoonsadeen arrimaha istiraatijiyadeed ee soo socda ee ku hoos jira tiirkan:

i. Maqnaanshaha qaab-dhismeed sharci oo mideysan oo la-dagaallanka musuq-maasuqa;
ii. Daciifnimo iyo ku filnaan la'aan ka jirta sharciyada jira ee la-dagaallanka musuq-maasuqa; iyo
iii. Daldaloollo ka jira waafaqsanaanta sharciyada iyo waajibaadka caalamiga ah.

3.6.2. Tiirka 2– Qaab-dhismeedka Maamulka Iyo Hay'adaha Dawladda

Hay'ado xooggan oo isla-xisaabtan leh oo ka jira waaxda guud waa laf-dhabarta maamul-wanaagga iyo bixinta adeegyo wax-ku-ool ah. Hirgelinta ajendaha isbeddelka Qaran waxay ku xiran tahay hay'ado xasilan, la isku halayn karo, loo dhan yahay, hufan oo ka jira Soomaaliya. Tiirkan diiradda waxaa lagu saarayaa arrimaha istiraatijiyadeed ee soo socda:

i. Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa oo aan shaqeynayn;

ii. Qaab-dhismeedyo hay'adeed oo daciif ah oo ka jira hay'adaha dawladda;
iii. Nidaam hay'adeed taag yar oo ka jira heerarka dawlad-goboleedyada iyo degmooyinka;
iv. Dib-u-dhacyo iyo iska-hor-imaad ku saabsan dib-u-habaynta adeegga rayidka.
v. Xaddidaadaha kheyraadka aadanaha, joojinta shaqaaleysiinta, iyo dib-u-habaynta mushaar/darajo oo aan dhammeystirnayn;
vi. Hufnaan iyo isla-xisaabtan daciif ah oo ka jira bixinta adeegyada; iyo
vii. Iskuduwid liidata oo u dhexeysa hay'adaha.

3.6.3. Tiirka 3 – Fulin, Baaris iyo Waxtarka Garsoorka

Fulinta sharciyadu waa arrin muhiim u ah la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo maamul-xumada. Baaritaan wax-ku-ool ah iyo go'aan-ka-gaarista dacwooyinka musuq-maasuqa waxay yareeyaan faafitaanka musuq-maasuqa iyadoo la abuurayo saameyn ka-hortag ah oo ka dhalata sharciga. Daldaloollada ka jira baarista, dacwad-oogista, iyo go'aan-ka-gaarista dembiyada musuq-maasuqa iyo dembiyada maaliyadda ayaa loo aqoonsaday caqabadaha waaweyn ee ka hor yimid hirgelinta ISTIRAATIJIYADDA 2020–2023. Tiirkan waxaa diiradda lagu saarayaa arrimaha istiraatijiyadeed ee soo socda:

i. Iskuduwid daciif ah oo u dhexeysa hay'adaha iyo hab-raacyo garsoor oo gaabis ah;
ii. Awood xaddidan oo ku saabsan baaritaannada caadiga ah iyo kuwa cilmiyeed (forensic), iyo farsamo; iyo
iii. Maqnaanshaha habab fulin oo is-waafaqsan.

3.6.4. Tiirka 4 – Nidaamyada Hufnaanta iyo Isla-xisaabtanka

Xoojinta nidaamyada hufnaanta iyo isla-xisaabtanka waa mid muhiim u ah kor-u-qaadista kalsoonida dadweynaha ee dawladda. Sidaas awgeed, arrintan waxaa loo arkaa tiir istiraatijiyadeed oo muhiim u ah gaarista maamul wax-ku-ool ah. Tiirkan waxaa diiradda lagu saarayaa arrimaha istiraatijiyadeed ee soo socda:

i. Hay'adaynta nidaamyada anshaxa iyo hufnaanta; iyo
ii. Nidaamyada daba-galka iyo qiimeynta (M&E) ee la-dagaallanka musuq-maasuqa oo daciif ah.

3.6.5. Tiirka 5 – Ka-qeyb-galka Dadweynaha iyo Rabitaanka Siyaasadeed

Ka-qeyb-galka muwaadiniinta ee go'aan-qaadashada arrimaha guud waa mabda' muhiim u ah maamul-wanaagga. Tan waxaa lagu gaari karaa rabitaan siyaasadeed iyo ballan-qaad ku saabsan ka-qeyb-gelinta bulshada ee arrimaha maamulka. Tiirkan laba arrimood oo istiraatijiyadeed ayaa lagu aqoonsaday:

i. Wacyi-gelin dadweyne oo hooseysa iyo ka-qeyb-gal daneeyeyaal oo xaddidan; iyo
ii. Rabitaan siyaasadeed oo xaddidan iyo caqabado amni oo leexinaya diiradda iyo kheyraadka.

CUTUBKA AFRAAD
UJEEDDOOYIN ISTARAATIJIYEED, ISTIRAATIJIYAD IYO HAWLO

4.1. Hordhac

Cutubkan wuxuu soo bandhigayaa ujeeddooyin istiraatijiyadeed, istiraatijiyad, hawlo, iyo Aragtida Isbeddelka.

4.2. Ujeeddooyin Istiraatijiyadeed, Istiraatijiyad iyo Hawlo

Jadwalka 5aad wuxuu soo bandhigayaa ujeeddooyin istiraatijiyadeed, istiraatijiyad iyo hawlo la fulinayo muddada qorshaha ee shanta sano ah.

Jadwalka 5: Ujeeddooyin Istiraatijiyadeed, Istiraatijiyado iyo Hawlo

Ujeeddooyin Istiraatijiyadeed	Istiraatijiyad	Hawlaha Hortebyeynta/Mudanaanta leh
1. In la xoojiyo qaab-dhismeedka sharci iyo siyaasad	**In la sameeyo hannaan sharci iyo siyaasad dhammeystiran, la dhaqan-gelin karo, isla markaana la jaan-qaadaya heerarka caalamiga ah.**	1. **In la dhammeystiro Wax-ka-beddelka sharciyada jira ee la-dagaallanka musuq-maasuqa**: Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed, iyo Xeerka Caddaymaha. 2. **In la diyaariyo sharciyo cusub oo ah la-dagaallanka musuq-maasuqa**: Xeerka Dembiyada Musuq-maasuqa; Xeerka Ka-hortagga Laaluushka/wax-isdabamarinta; Xeerka Iskaashiga Sharci ee wadajirka ah; Xeerka Ilaalinta wargeliyaha-musuq-maasuqa (Whistle-blowers); iyo Xeerka Shaacinta Hantida. 3. **In la maxaliyeeyo heshiisyada caalamiga ah**: Heshiiska Midowga Afrika ee Ka-hortagga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa; iyo Heshiiska Makkah Al-Mukarramah ee Qarmada Xubnaha ka ah Ururka Iskaashiga Islaamka ee ku saabsan Iskaashiga Dhaqan-gelinta Sharciga La-dagaallanka Musuq-maasuqa.
2. In la xoojiyo maamul-wanaagga iyo qaab-dhismeedka hay'adaha dawliga.	**In la dhiso hay'ado lagu kalsoonaan karo, si hufan u shaqeeya, isla markaana leh waajibaad sharciyeysan.**	1. In dib loo dhiso Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa. 2. In la dhiso unugyada hufnaanta ee DXDF. 3. In la xoojiyo shaqo-wanaagga, madax-bannaanida, helitaanka kheyraadka, qaab-dhismeedka, waajibaadka, iyo hannaanka wada-shaqeynta hay'adaha. 4. In la dhiso Golaha Sare ee Garsoorka. 5. In la horumariyo hannaan sharciyeedka ee Ombudsman-ka, isla markaana la dhiso xafiiska.
	In kor loo qaado hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo daacadnimada ka dhex jirta hay'adaha.	1. In la ansixiyo lana dhaqan-geliyo xeerka shaqaalaha rayidka ee wax laga beddelay. 2. In la xoojiyo hirgelinta Xeerka Anshaxa iyo Hab-dhaqanka Shaqaalaha ee dhammaan hay'adaha.

Ujeeddooyin Istiraatijiyadeed	Istiraatijiyad	Hawlaha Hortebyeynta/Mudanaanta leh
		3. In la dejiyo lana dhaqan-geliyo nidaamka shaacinta hantida ah, oo leh hab-raacyo xaqiijin iyo ciqaabeed ee dhammaan hay'adaha. 4. In la kordhiyo hufnaanta bixinta adeegyada. 5. In la sameeyo sahamin sanadle ah oo ku saabsan aragtida muwaadiniinta ee musuq-maasuqa natiijooyinkana la baahiyo.
3. In la xoojiyo fulinta, baarista, iyo wax-ku-oolnimada garsoorka	**In kor loo qaado baarista, dacwad-oogista, iyo Xukimidda dembiyada musuqa.**	1. In la xoojiyo wada-shaqeynta hay'adaha. 2. In la horumariyo awoodda baarista iyo falanqeynta. 3. In la mideeyo hababka fulinta. 4. In la siiyo xeer-ilaaliyeyaasha iyo garsoorayaasha tababar ku saabsan la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo dembiyada dhaqaale. 5. 6. In la dhiso lana dhaqan-geliyo madallo wargeliyeyaal musuq-maasuq ah oo qarsoon. 7. In la dhiso maxkamado ama qeybo u gaar ah la-dagaallanka Musuq-maasuqa.
4. In la hay'adeeyo nidaamyada daah-furnaanta (integrity) iyo isla-xisaabtanka.	**In si qoto-dheer loogu dhex daro anshaxa, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka.**	1. In la hirgeliyo barnaamijyo joogto ah oo lagu xoojinayo anshaxa shaqo. 2. In hay'adaha loo magacaabo saraakiil u qaabilsan daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka.
	In kor loo qaado ka-hortagga musuq-maasuqa ee dawladda iyo hay'daha gaarka loo leeyahay.	1. In la sameeyo qiimeyn khataraha musuq-maasuqa ee ka jira hay'adaha dawladda. 2. In la dhiso guddiyo u xilsaaran ka-hortagga musuq-maasuqa gudaha hay'adaha dawladda. 3. In la horumariyo lana dhaqan-geliyo nidaam isku xiran oo dhammeystiran iyadoo la adeegsanayo tiknoolojiyadda, gaar ahaan maamulka maaliyadda guud, nidaamka wax-iibsiga danabaysan, iyo maamulka dakhliga. 4. In la siiyo tababarro ku saabsan ka-hortagga musuq-maasuqa hay'adaha gaarka loo leeyahay.
	In kor loo qaado daba-galka barnaamijyada la-dagaallanka musuq-maasuqa.	1. In la magacaabo mas'uuliyiin qaabilsan kormeerka iyo qiimeynta (M&E). 2. In la sameeyo nidaam dhammeystiran oo kormeer iyo qiimeyn (M&E), oo leh loox xogeed (dashboard). 3. In la dhiso koox kormeer oo ka kooban hay'ado fara-badan.
5. In kor loo qaado ka-qeyb-galka dadweynaha iyo rabitaanka siyaasadeed	**In la adkeeyo ka-qeyb-galka muwaadiniinta iyo taageerada siyaasadeed**.	1. In la hirgeliyo ololeyaal wacyi-gelin dadweyne. 2. In lala fal-galo lana xoojiyo iskaashiga bulshada rayidka ah iyo hay'adaha tacliinta. 3. In la abuuro madallo/naadiyo hufnaan oo ka dhex jira dhallinyarada, xarumaha waxbarashada, culimada, iyo qeybaha kale ee bulshada. 4. In la sameeyo madallo wada-shaqeyn oo lala yeesho warbaahinta iyo jilayaasha kale ee aan dawliga ahayn. 5. In la dhiso hannaan cabasho dadweyne oo la heli karo, wax-ku-ool ah, laguna kalsoonaan karo.

Ujeeddooyin Istiraatijiyadeed	Istiraatijiyad	Hawlaha Hortebyeynta/Mudanaanta leh
		6. In la xoojiyo rabitaanka siyaasadeed.

4.3. Aragtida Isbeddelka

Aragtida Isbeddelka ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 waxay ku salaysan tahay faham ah in horseedayaasha musuq-maasuqa Soomaaliya ay ugu waaweyn yihiin qaab-dhismeed sharci oo daciif ah, hay'ado aan waxtar lahayn, awood fulineed oo xaddidan, nidaamyo maamul oo liita, iyo ka-qeyb-galka muwaadiniinta oo hooseeya. Haddii Soomaaliya ay xoojiso hannaankeeda sharci iyo siyaasadeed, dhisto hay'ado wax-ku-ool ah, kordhiso awoodda fulinta iyo hufnaanta garsoorka, hagaajiso nidaamyada maamul, isla markaana dhiirri-geliso ka-qeyb-galka muwaadiniinta, markaas waxaa la filayaa in musuq-maasuqu yaraado, kalsoonida dadweynahuna ay kororto (Jaantuska 3).

Yool Istiraatijiyadeed

In la yareeyo lagana hortago musuq-maasuqa iyadoo la dhiirri-gelinayo hufnaanta, daah-furnaanta, iyo isla-xisaabtanka dhammaan heerarka dawladda iyo bulshada Soomaaliyeed.

▲ Waxaa ka qeyb-qaadanaya

Natiijooyinka

1. Hannaan sharci iyo siyaasad adag, isku xiran ee la-dagaallan musuq-maasuq | 2. Hay'ado dawladeed oo leh tayo sare, si wax-ku-ool ah u shaqeeya, isla markaana leh isla-xisaabtan. | 3. Wax-ku-oolnimo baaritaan, dacwad-oogid, garsoorid, iyo isu ciqaabid musuq-maasuq. | 4. Hay'adayn anshax, hufnaan, kormeer, iyo daba-gal qaabaysan. | 5. Xoojinta ka-qeyb-galka muwaadiniinta, kalsoonida bulshada, iyo rabitaanka siyaasadeed ee dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa.

▲ Iyadoo loo marayo

Waxqabadka

• Sharciyada mudnaanta leh ee la-dagaallanka musuq-maasuqa oo dib loo eegay, la ansixiyey, la waafajiyey, isla markaana laga dhaqan-geliyey gudaha dalka.| • Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa iyo hay'adaha la xiriira si buuxda loo hawl-geliyey, iskuna-xiran.| • Awoodda baarista, dacwad-oogista, garsoorka, iyo falanqeynta caddaymaha oo la xoojiyey.| • Barnaamijyada anshaxa, nidaamyada hufnaanta, kooxaha kormeerka, iyo hababka la socodka iyo qiimeynta (M&E) oo la dhisay. | • Madalaha wacyi-gelinta dadweynaha, iskaashiyada daneeyeyaasha, iyo marinnada soo-gudbinta musuq-maasuqa oo la ballaariyey.

▲ waxaa ka dhashay

MARINNADA/TIIRARKA FARO-GELINTA ISTIRAATIJIYADEED

TIIRKA 1 QAAB-DHISMEEDKA SHARCI IYO SIYAASADEED	TIIRKA 2 MAAMULKA GUUD IYO QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADEED	TIIRKA 3 FULINTA, BAARISTA IYO WAXTARKA GARSOORKA	TIIRKA 4 Hababka hufnaanta iyo isla-xisaabtanka	TIIRKA 5 KA-QEYB-GALKA DADWEYNAHA IYO RABITAANKA SIYAASADEED
• Dib-u-eegis lagu sameeyo sharciyada jira • Ansixinta sharciyo cusub oo la-dagaallanka musuq-maasuqa • Maxaliyeynta waajibaadka	• Dib-u-dhisidda Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa • In la caddeeyo waajibaadka iyo qaab-dhismeedka	• In la xoojiyo wada-shaqeynta hay'adaha gudahooda. • In la dhiso awoodda baarista iyo falanqeynta. • In la mideeyo	• In la hirgeliyo barnaamijyo anshaxeed joogto ah. • In la magacaabo mas'uuliyiin qaabilsan kormeerka iyo qiimeynta (M&E). • In la dhiso hab dhexe oo kormeer iyo qiimeyn iyo warbixin wadaag ah. • In la dhiso koox kormeer oo	• In la sameeyo ololeyaal wacyi-gelin dadweyne. • ka-qeyb-galka bulshada rayidka ah, hay'adaha tacliinta, warbaahinta, iyo bulshada guud ahaan. • In la adkeeyo rabitaanka siyaasadeed iyo

UNCAC / AUCPCC. • Xoojinta hannaanka la xiriira wargeliyaha musuq-maasuqa (whistle-blowers), iskahor-imaadka danaha, shaacinta hantida, hadiyadaha, iyo iskaashiga sharciyeed ee wadajirka ah (MLA).	hay'adaha. • In la dhiso unugyada hufnaanta ee heer-hoosaadyada qaran Horumarinta adeegyada rayidka, Maareynta khayraadka Aadanaha, iyo daah-furnaanta adeegyada.	hannaanka fulinta • In kor loo qaado maareynta dacwadaha iyo wax-ku-oolnimada garsoorka.	ka kooban hay'ado fara-badan.	hoggaaminta. • In la dhiirri-geliyo ka-hortagga musuq-maasuqa ee hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

▲ Waxay ka jawaabaysaa

Caqabadaha waaweyn ee Musuq-maasuqa iyo Maamulka

• Maqnaanshaha hannaan sharci mideysan ee la-dagaallan musuq-maasuq.| • Dib-u-dhigidda meel-marinta sharciyada muhiimka ah iyo maxilyeynta waajibaadka caalamiga ah oo daciif ah.| • Howlgelid la'aan Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa iyo waajibaadka hay'adeed oo taag-daran. | • Taag-darri hay'adaha dawladda, Maareynta kheyraadka aadanaha (HR), iyo daah-furnaanta adeeg bixinta. | • Liidasho wada-shaqeynta hay'adaha, gaabiska hab-raacyada garsooridda, iyo karaanka farsamo oo xaddidan. | • Liidasho ka dhan ah anshaxa, daah-furnaanta, la socodka, iyo kormeerka iyo qiimeynta (M&E). | • Wacyi-gelinta dadweyne oo hooseysa, ka-qeyb-galka daneeyeyaasha oo xaddidan, iyo rabitaanka siyaasadeed oo aan sal lahayn. | • Culeysyo amni, kala-qoqobnaanta nidaamka federaalka, iyo kheyraadka oo xaddidan.

Suuraysi

• Waxaa jira rabitaan siyaasadeed oo joogto ah| • Baarlamaanka iyo Xukuumaddu waxay qeyb ka yihiin dib-u-habaynta sharciyeed. | • Wada-shaqeyn dhex marta Hay'adaha Dawladda Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada. | • Xaaladaha amni waxay suuro-galinayaan hirgelinta iyo kormeerka. | • In la helo lana abaabulo kheyraad dhaqaale, farsamo, iyo mid aadane oo ku filan. | • In daneeyeyaashu sii ahaadaan kuwo diyaar u ah ka-qeyb-galka| • Hay'aduhu waxay soo saaraan xog la-socod oo la adeegsan karo| • Isku xigxigsashada dib-u-habayntu waxay ahaatay macquul iyo si la maareyn karo.

Jaantuska 3:Arragtida Isbadalka ISTIRAATIJIYADDA (2026-2030)

CUTUBKA SHANAAD
HIRGELIN, KORMEER IYO QIIMEYN

5.1 HORDHAC

Cutubkani wuxuu soo bandhigayaa qaab-dhismeedka hirgelinta, iskuduwidda, daba-galka, iyo qiimeynta Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa 2026–2030. Wuxuu qeexayaa hab-raacyada hay'adeed, hannaanada iskuduwidda, qaabka maal-gelinta, waajibaadka warbixineed, shuruudaha maareynta xogta, tallaabooyinka yareynta khataraha, hababka isgaarsiinta, iyo geeddi-socodyada dib-u-eegista iyo fahamka ee taageeraya hirgelinta wax-ku-oolka ah ee istiraatijiyadda.

5.2 QAAB-DHISMEEDKA HIRGELINTA

Qaab-dhismeedka hirgelintu wuxuu qeexayaa habka iyo nidaamyada loo adeegsanayo in Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa (NACS) 2026–2030 loogu beddelo qorsheyaal shaqo oo sanadle ah, tallaabooyin hay'adeed, wax-soo-saarro la cabbiri karo, iyo natiijooyin muuqda. Waxaa loo dejiyey si loo xaqiijiyo in hirgelintu noqoto mid wax-ku-ool ah, iskuduwan, leh isla-xisaabtan, isla markaana waafaqsan hababka qorsheynta iyo miisaaniyad-qoondaynta qaranka.

5.2.1 HANNAANKA HIRGELINTA

Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa 2026–2030 waxaa lagu hirgelinayaa hab maareyn ee ku salaysan natiijooyin. Taas macnaheedu waa in hawlaha lagu xiriirinayo wax-soo-saarro, natiijooyin, tilmaameyaal, iyo ujeeddooyin istiraatijiyadeed oo si cad loo qeexay, isla markaana horumarka lagu cabbirayo kormeer, warbixin, iyo dib-u-eegis xilliyeedyo joogto ah.

Hirgelinta waxaa lagu fulinayaa iyadoo loo marayo:

- Qorsheyaal Shaqo oo Sanadle ah (Annual Work Plans - AWPs) iyo miisaaniyado ay diyaariyaan hay'adaha fulinaya, kuwaasoo waafaqsan jadwalka hirgelinta NACS;
- waafajinta qaab-dhismeedyada qaran ee qorsheynta, miisaaniyad-qoondaynta, iyo maareynta waxqabadka;
- nidaamyo maareyn waxqabad oo hay'adeed oo si cad u qeexaya mas'uuliyadaha, jadwalka waqtiga, iyo natiijooyinka la filayo; iyo
- habab joogto ah oo kormeer, warbixin, dib-u-eegis, iyo barasho ah kuwaasoo u oggolaanaya Istiraatijiyadda inay la qabsato fursadaha, caqabadaha, iyo khataraha soo baxa.

Inkasta oo dhammaan istiraatijiyadaha iyo hawlaha ku jira NACS ay muhiim yihiin, haddana kala-hormarinta iyo isku xigxigga fulintu waxay noqonayaan kuwo lama-huraan ah. Muddada ugu horreysa ee 12-ka ilaa 24-ka bilood waa in diiradda la saaraa tallaabooyinka isbeddelka horseedaya ee dhisaya saldhigyada sharciyeed, hay'adeed, iskuduwid, iyo kormeer ee looga baahan yahay hirgelinta guuleysata ee Istiraatijiyadda oo dhan.

Tallaabooyinka mudnaanta leh ee horseedka u ah 12-ka ilaa 24-ka bilood ee ugu horreeya

Dib-u-habayn sharci iyo siyaasadeed; dib-u-dhiska iyo hawl-gelinta Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa; iskuduwidda hay'adaha ee ku dhisan qaab-dhismeedka labada heer; xirfadaynta shaqaalaha dawladda; dijitaaleynta adeegyada muhiimka ah ee dawladda; iyo dhismaha nidaam dhammeystiran oo kormeer iyo qiimeyn (M&E) leh awood dashboard.

- Hannaan sharci iyo siyaasadeed: meel-marinta iyo wax-ka-beddelka sharciyada iyo siyaasadaha fududeynaya dadaallada la-dagaallanka musuq-maasuqa.
- Dib-u-dhiska iyo hawl-gelinta: dhismaha hay'ad la-dagaallanka musuq-maasuqa oo si buuxda u shaqeysa, lehna doorar cad oo la xiriira talo-bixin, u-hoggaansanaan, kormeer, iyo xaqiijinta hufnaanta.
- Iskuduwidda hay'adaha: xoojinta wada-shaqeynta u dhexeysa hoggaanka heer federaal ee uu bixiyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha (OPM), hagidda farsamo ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (WCAD), hirgelinta ay sameeyaan Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Madax-bannaan (MDAs) iyo Dawlad-goboleedyada, iyo taageerada talo-bixin iyo u-hoggaansanaan ee guddiga la-dagaallanka musuq-maasuqa ee Heer Farsamo.
- Xirfadaynta shaqaalaha dawladda: hay'adeynta adeeg dawladeed loo dhan yahay, xirfad leh, u heellan adeegga dadweynaha, kuna dhisan karti iyo mudnaan (merit-based).
- Adeegsiga tiknoolojiyadda ee adeegyada dawladda dhijitaalka ah: dhijitaaleynta hawlaha muhiimka ah, oo ay ku jiraan wax-iibsiga dawladda, maareynta maaliyadda dadweynaha, iyo ururinta dakhliga, iyadoo la hirgelinayo dammaanado ku habboon oo la xiriira hufnaan, raad-raac, amni, iyo ilaalinta xogta.
- Nidaam dhammeystiran oo daba-gal iyo qiimeyn ah: dhismaha nidaam kormeer oo leh dashboard si loola socdo hirgelinta, loo taageero go'aan-qaadasho ku salaysan caddeymo, loona xoojiyo isla-xisaabtanka.

5.2.2 Hab-raacyada Hirgelinta

Mas'uuliyadda guud ee siyaasadeed ee hirgelinta Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa 2026–2030 waxay saaran tahay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha (OPM). Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (WCAD) waxay la imaanaysaa hoggaan farsamo iyo taageero xoghayneed oo la xiriirta iskuduwidda, kormeerka, warbixinta, isgaarsiinta, iyo maareynta aqoonta. Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa waxaa lagu dhex darayaa heerka Farsamada ee qaab-dhismeedka iskuduwidda, wuxuuna bixinayaa taageero dhinacyada talo-bixinta, u-hoggaansanaanta, daba-galka iyo qiimeynta, halkii uu ka noqon lahaa heer iskuduwid oo gaar ah oo barbar socda nidaamka jira.

Hirgelinta waxaa fulinaya hay'adaha federaalka ee ay khusayso, Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka, iyo hay'adaha heer degmo, iyadoo lagu saleynayo waajibaadkooda iyo mas'uuliyadaha loogu xilsaaray jadwalka hirgelinta. Hay'adaha muhiimka ah ee fulinta iyo taageerada waxaa ka mid ah:

i) Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
ii) Hoggaanka Baarista Dembiyada (CID);
iii) Golaha Sare ee Garsoorka;
iv) Hay'adaha Dawladda Federaalka Soomaaliya (DFS);
v) Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka (DXF);
vi) Xarunta Warbixinta Maaliyadeed (FRC);
vii) Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka;
viii) Guddiga Ku-meel-gaarka ah ee Iibka Qaranka;
ix) Wasaaradaha, Waaxyaha, iyo Wakaaladaha;
x) Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa; iyo
xi) Hay'adaha Madaxa-bannaan ee Kor-joogteynta.

5.3 Hannaanka Iskuduwidda

Qaab-dhismeedku wuxuu yeelanayaa laba heer oo iskuduwid ah: Heer Hoggaan oo uu guddoominayo Ra'iisul Wasaaraha isagoo adeegsanaya Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha (OPM), iyo Heer Farsamo oo uu guddoominayo Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (WCAD). Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dawladda (MDAs), Dawlad-goboleedyada, iyo hay'adaha heer degmo ayaa sii ahaanayaa garabka fulinta ee Istiraatijiyadda.

Jaantuska 4: Hannaanka Iskaashiga Hirgelinta ISTIRAATIJIYADDA 2026-2030.

Heerka Hoggaanka

Wuxuu ka kooban yahay hoggaanka Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan, waxaana guddoominaya Ra'iisul Wasaaraha ka Xafiiska Ra'iisul Wasaare ahaan. Heerkan wuxuu bixiyaa jihayn istiraatijiyadeed, kormeer siyaasadeed, abaabulka kheyraadka, iyo isla-xisaabtan la xiriira hirgelinta Istiraatijiyadda.

↓

Heerka Farsamada

Wuxuu ka kooban yahay wakiillo farsamo oo ka socda Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan, waxaana guddoominaya Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (WCAD). Heerkan ayaa hoggaamiya iskuduwidda farsamo, taageera hirgelinta, dib-u-eega xogta waxqabadka, isla markaana mideeya warbixinnada horumarka.

Xoghaynta WCAD waxay bixisaa iskuduwid maalinle ah, xaqiijinta tayada xogta, isgaarsiinta, iyo maareynta aqoonta, halka Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa uu sii ahaanayo qayb ka mid ah heerkan farsamo si uu u bixiyo taageero dhinacyada talo-bixinta, u-hoggaansanaanta, iyo kormeerka..

↓

Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan, Dawlad-goboleedyada, iyo Dawladaha Hoose

Hay'adahan waxay hirgelinayaan hawlaha Istiraatijiyadda, magacaabayaan qaabilsanayaal, gudbinayaan warbixinno horumar-xilliyeed, ka qeyb-galayaan hababka dib-u-eegista, isla markaana waafajinayaan qorshahooda hay'adeed iyo kuwa heerarka-hoose qaab-dhismeedka qaran.

5.3.1 Heerka Hoggaanka

Heerka Hoggaanka wuxuu ka kooban yahay hoggaanka Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha madaxa-bannaan, waxaana guddoominaya Ra'iisul Wasaaraha. Heerkan wuxuu sameeyaa jihayn istiraatijiyadeed, kormeer siyaasadeed, iyo isla-xisaabtan la xiriira hirgelinta Istiraatijiyadda. Wuxuu xaqiijiyaa in hirgelintu waafaqsan tahay mudnaanta qaranka, in la xalliyo caqabadaha heer-sare, isla markaana hay'aduhu ay mas'uul ka noqdaan waajibaadkooda loo idmaday.

Mas'uuliyadaha ugu muhiimsan ee Heerka Hoggaanka waxaa ka mid ah bixinta jihaynta guud ee istiraatijiyadeed; dib-u-eegista horumarka guud ee hirgelinta; hagidda dib-u-habaynta siyaasadeed iyo hay'adeed; xallinta caqabadaha heer-sare ee u dhexeeya wasaaradaha; taageeridda abaabulka kheyraadka; dhiirri-gelinta ka go'naanshaha siyaasadeed; iyo xaqiijinta in dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa ay sii ahaato mid muuqata oo mudnaan ku leh maamulka iyo horumarka qaranka.

5.3.2 Heerka Farsamada

Heerka Farsamada wuxuu ka koobnaanayaa wakiillo farsamo oo ka socda Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan, waxaana guddoominaya Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (WCAD). Heerkan ayaa hoggaaminaya iskuduwidda farsamo, taageerayaa hirgelinta, dib-u-eegayaa xogta waxqabadka, xaqiijinaya saxnaanta xogta horumarka, isla markaana mideynaya warbixinnada horumarka. Heerkan wuxuu sidoo kale aqoonsanayaa caqabadaha soo baxaya wuxuuna soo jeedinayaa tallaabooyin sixid oo wax-ku-ool ah si loogu gudbiyo Heerka Hoggaanka marka loo baahdo go'aanno istiraatijiyadeed.

Heerka Farsamada waxaa ku jiraya Xoghaynta WCAD iyo Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa. Xoghaynta WCAD waxay bixinaysaa iskuduwidda iyo warbixinta maalinlaha ah, halka Guddiga la-dagaallanka Musuq-maasuqu uu bixinayo taageero dhinacyada talo-bixinta, u-hoggaansanaanta, iyo kormeerka gudaha isla qaab-dhismeedka farsamo. Qaabkan wuxuu xaqiijinayaa in Istiraatijiyadda lagu maamulo hannaan fudud, isku-dhafan, oo wax-ku-ool ah halkii laga abuuri lahaa guddiyo badan oo is-dulsaaran.

5.3.3 Xoghaynta WCAD

Xoghaynta WCAD waxay u shaqeynaysaa sidii xarunta dhexe ee iskuduwidda iyo warbixinta gudaha Heerka Farsamada. Mas'uuliyadaheeda waxaa ka mid noqonaya bixinta taageero maamul iyo hawl-fududeyn oo loo fidiyo Heerka Farsamada; fulinta iskuduwidda maalinlaha ah ee hirgelinta Istiraatijiyadda; qaabilaadda, dib-u-eegista, iyo mideynta warbixinnada horumarka ee ka yimaad hay'adaha fulinaya iyo Dawlad-goboleedyada (FMS); taageeridda kormeerka, qiimeynta, isgaarsiinta, iyo maareynta aqoonta; abaabulka shirarka wadatashiga iyo aqoon-is-weydaarsiyada dib-u-eegista; iyo fududeynta xaqiijinta tayada xogta iyo mideynta hababka warbixinta.

5.3.4 Doorka Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa ee Heerka Farsamada

Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa, marka dib loo dhiso lana hawl-geliyo, wuxuu ka qeyb-gelayaa Heerka Farsamada wuxuuna bixinayaa taageero farsamo oo dhinacyada talo-bixinta, u-hoggaansanaanta, iyo kormeerka ah. Doorkiisa waxaa ka mid noqonaya bixinta talooyin ku saabsan faro-gelinnada la-dagaallanka musuq-maasuqa, taageeridda kormeerka u-hoggaansanaanta iyo xaqiijinta hufnaanta, ka-qeyb-qaadashada hababka qiimeynta iyo barashada, iyo ka-caawinta xoojinta kalsoonida iyo tayada farsamo ee hirgelinta tallaabooyinka la-dagaallanka musuq-maasuqa.

5.3.5 Wasaaradaha, Waaxyaha, Hay'adaha madax-bannaan (MDAs), Dawlad-goboleedyada

Wasaaradaha, Waaxyaha, Hay'adaha madax-bannaan (MDAs), Dawlad-goboleedyada, iyo Dawladaha hoose ayaa hirgelinaya hawlaha Istiraatijiyadda heer qaran iyo heer-hoose. Waxay magacaabayaan qaabilsanayaal, diyaarinayaan isla markaana gudbinayaan warbixinno horumar-xilliyeed, ka qeyb-gelayaan hababka dib-u-eegista, bixinayaan aragtiyo iyo jawaab-celin ku saabsan hirgelinta, isla markaana waafajinayaan qorshooda hay'adeed kuwa heerka hoose iyo qaab-dhismeedka qaran.

Jadwalka 3: Soo-koobidda Doorarka ee Qaab-dhismeedka Iskuduwidda

Heer / Hay'ad	Qaab-dhismeed / Hoggaamin	Mas'uuliyadaha Muhiimka ah
Heerka Hoggaanka	Hoggaanka Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan (MDAs), oo uu guddoominayo Ra'iisul Wasaaraha.	Bixinta jihayn istiraatijiyadeed, kormeer siyaasadeed, isla-xisaabtan heer-sare, abaabulka kheyraadka, iyo xallinta caqabadaha siyaasadeed.
Heerka Farsamo	Wakiillo farsamo oo ka socda Waradaha iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan, oo uu hoggaaminayo Xoghayaha Joogtada ah ee WCAD. Guddiga madaxa-bannaan ee	Hoggaaminta iskuduwidda farsamo, taageeridda hirgelinta, dib-u-eegista xogta waxqabadka, mideynta warbixinnada horumarka, iyo u-gudbinta arrimaha istiraatijiyadeed Heerka Hoggaanka.

Heer / Hay'ad	Qaab-dhismeed / Hoggaamin	Mas'uuliyadaha Muhiimka ah
	la-dagaalanka Musuq-maasuqa wuxuu qayb ka yahay heerkan.	
Xoghaynta WCAD	Shaqada xoghaynta ee qeybtan Heerka Farsamada.	Bixinta iskuduwidda maalinlaha ah, taageerada warbixinta, xaqiijinta tayada xogta, isgaarsiinta, maareynta aqoonta, iyo taageerada hawl-fududeynta dib-u-eegisyada.
Guddiga Madaxa-bannaan ee la-dagaalanka Musuq-maasuqa	Qayb ka mid ah Heerka Farsamada, lehna shaqooyin talo-bixin, u-hoggaansanaan iyo kormeer.	Bixinta talooyin farsamo oo ku saabsan hawl-galinadda la-dagaallanka musuq-maasuqa, taageeridda u-hoggaansanaanta iyo xaqiijinta hufnaanta, iyo ka qayb qaadashada kormeerka, qiimeynta iyo barashada.
Hirgelinta Wasaaradaha, Waaxyaha, Guddiyada Madaxa-bannaan, Dawlad-gobleedyada iyo Dawladaha hoose	Hay'adaha fulinta iyo xiriiriyeyaasha loo magacaabay heer federaal, Dawlad-goboleed iyo degmo.	Hirgelinta hawlaha loo idmaday, magacaabidda xiriiriyeyaasha, gudbinta warbixinno xilliyeed, ka qeyb-galka hababka dib-u-eegista, iyo waafajinta qorsheyaasha hay'adeed iyo kuwa heer-hoose qaab-dhismeedka qaran.

5.4. Maal-gelinta Qorshaha

Hirgelinta guuleysata ee Istiraatijiyadda Qaran ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa 2026–2030 waxay u baahanaysaa aqoonsi, abaabul, iyo qoondayn wax-ku-ool ah oo loo sameeyo kheyraadka maaliyadeed, aadanaha, agabka jireed, iyo taageerada farsamo. Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay door dhexe ka qaadanaysaa xaqiijinta in Istiraatijiyadda si ku filan loo maal-geliyo iyadoo loo marayo maal-gelin gudaha ah iyo abaabulka taageerada bah-wadaagta horumarinta.

Hay'adaha fulinaya sidoo kale waxaa laga filayaa inay aqoonsadaan baahidooda kheyraad, u doodaan qoondayn miisaaniyadeed oo ku filan, ku daraan hawlaha quseeya Istiraatijiyadda qorsheyaashooda iyo miisaaniyadahooda hay'adeed, isla markaana xaqiijiyaan in lacagaha loo qoondeeyey si hufan loogu isticmaalo hirgelinta barnaamijyada la qorsheeyey.

Qiyaasta baahida kheyraadka maaliyadeed ee lagu hirgelinayo Istiraatijiyadda 2026–2030 waxaa lagu qiyaasay US$ 11.133 milyan, sida si faahfaahsan loogu muujiyey Jadwalka 6 ee hoose.

Jadwalka 4: Qiyaasta baahida khayraadka maaliyadeed (Kun Doolarka Maraykanka ah $)

Lambar.	Ujeedddo Istiraatijiyadeed	2026	2027	2028	2029	2030	Wadar
1	In la xoojiyo qaab-dhismeedyada	100.0	147.0	145.0	100.0	0.0	492.0

Lambar.	Ujeedddo Istiraatijiyadeed	2026	2027	2028	2029	2030	Wadar
	sharci iyo siyaasadeed						
2	In la xoojiyo hannaanka maamulka dadweynaha iyo qaab-dhismeedka hay'adaha	77.2	445.1	586.8	532.6	701.6	2,343.3
3	In la xoojiyo fulinta, baarista, iyo wax-ku-oolnimada garsoorka	248.0	307.0	432.0	293.0	234.0	1,514.0
4	In la hay'adeeyo nidaamyada daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka	103.0	3,361.0	580.0	673.0	727.0	5,444.0
5	In la xoojiyo ka-qeyb-galka dadweynaha iyo rabitaanka siyaasadeed	113.0	226.0	280.0	334.0	387.0	1,340.0
	Wadar	**641.2**	**4,486.1**	**2,023.8**	**1,932.6**	**2,049.6**	**11,133.3**

F.G: Lambarada waxaa lagu muujiyey Doollar$ kun leey ahaan.

6.1 Daba-gal iyo Qiimeyn

Si loo xaqiijiyo daba-gal iyo qiimeyn (M&E) wax-ku-ool ah ee ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030, Xukuumadda JFS waxay diyaarinaysaa oo ay qaadanaysaa nidaam daba-gal iyo qiimeyn natiijo-raac ah (results-based M&E system), kaasoo si joogto ah u ururiya una falanqeeya xogta si loogu kuur-galo heerka uu mashruuc, barnaamij ama siyaasad loo hirgelinayo marka loo eego natiijooyinka la filayo. Jadwalka hirgelinta daba-galka iyo qiimeynta ee ku xiran lifaaqyada wuxuu si cad u muujinayaa natiijooyinka (outputs), saameynta (outcomes), iyo tilmaameyaasha muhiimka ah ee daba-galka iyo qiimeynta inta lagu jiro muddada hirgelinta qorshaha. Natiijooyinka dhow iyo kuwa fog labadaba waxaa lagu cabbirayaa xog tiro (quantitative) iyo tayo (qualitative) leh oo laga helay ilo xogeed asal ah (primary) iyo kuwo xigasho-labaad ah (secondary). DFS waxay sidoo kale sii wadaysaa in ay si joogto ah u la socoto shaqada daba-galka iyo qiimeynta si loo adkeeyo hufnaanta iyo wax-ku-oolnimada.

6.1.2 Daba-gal

Daba-galku wuxuu noqonayaa mid joogto ah oo ku salaysan natiijooyin. Wuxuuna la soconayaa horumarka laga gaarayo tilmaameyaasha la qeexay, bar-tilmaameedyada sanadlaha ah, mas'uuliyadaha hay'adaha, iyo jadwalka waqtiga. Hay'adaha fulinaya waxay u gudbinayaan warbixinnada kormeerka ee xilliyeed Xoghaynta WCAD, taasoo dib-u-eegaysa, xaqiijinaysa, isla markaana mideynaysa xogta horumarka si loogu gudbiyo Heerka Farsamada iyo warbixinta xigta ee Heerka Hoggaanka.

- Warbixinno kormeer oo bille ama saddexdii biloodba mar ah oo ay soo gudbiyaan hay'adaha fulinaya, iyadoo ku xiran nooca hawsha iyo shuruudaha warbixinta;
- warbixinno mideysan oo hirgelinta ah oo saddexdii biloodba mar ah ay diyaariyaan qaab-dhismeedka Heerka Farsamo; iyo
- warbixinno waxqabad oo sanadle ah oo soo koobaya horumarka, caqabadaha, casharrada laga bartay, iyo tallaabooyinka sixitaanka ee lagu taliyey.

6.1.3 Qiimeyn

Qiimeynta Istiraatijiyadda 2026–2030 waxay cabbiraysaa ku habboonaanta, waxtarka, hufnaanta, saameynta, iyo waaritaanka hawlaha la qorsheeyey iyo natiijooyinka dib-u-habaynta. Qiimeynnada ugu muhiimsan waxaa ka mid noqonaya:

a) Qiimeyn Xilli-dhexe Muddada (Mid-Term Evaluation): oo la sameeyo bartamaha muddada hirgelinta si loo qiimeeyo horumarka loona soo jeediyo wax-ka-beddello lagu hagaajinayo muddada harsan;
b) Qiimeynta Dhammaadka Muddo-xileedka (End-Term Evaluation): oo la sameeyo dhammaadka muddada Istiraatijiyadda si loo cabbiro heerka lagu gaaray ujeeddooyinka guud, loo qiimeeyo natiijooyinka, loogana faa'iidaysto diyaarinta istiraatijiyadda xigta; iyo
c) Qiimeyno Mawduuceed (Thematic Evaluations): oo ah qiimeynno diiradda saaraya meelaha gaarka ah ee dib-u-habaynta sida dib-u-habaynta sharciyada, waxqabadka hay'adaha, maareynta maaliyadda dadweynaha, wax-iibsiga dawladda, bixinta adeegyada, fulinta sharciga, nidaamyada hufnaanta, ama ka-qeyb-galka dadweynaha.

6.2 Warbixin iyo La-xisaabtan

Qaab-dhismeedka warbixinta ee Istiraatijiyadda 2026–2030 waxaa loo dejiyey si loo xoojiyo isla-xisaabtanka, iskuduwidda, fahamka, iyo go'aan-qaadasho waqtigeeda ku dhacda dhammaan heerarka hirgelinta. Sida ku cad hannaankan, hay'adaha fulinaya waxay warbixinnada horumarka u gudbinaysaa Xoghaynta WCAD si dib-u-eegis, xaqiijinta tayada, iyo mideyn loogu sameeyo. Warbixinnada la mideeyey waxaa dib-u-eegaya lakabka Farsamada oo uu guddoominayo Xoghayaha Joogtada ah ee WCAD, ka hor inta aan loo gudbin Lakabka Hoggaanka oo uu guddoominayo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha (OPM).

Warbixinnada sanadlaha ah waxaa loo gudbinayaa hay'adaha dawladda ee ay qusayso si waafaqsan shuruudaha jira. Hababka isla-xisaabtanka waxaa ka mid noqon kara heshiisyada waxqabadka hay'adaha, u baahinta dadweynaha ee warbixinnada horumarka, baaritaanno iyo dib-u-eegisyo madax-bannaan, ka-qeyb-galka baarlamaanka ama hay'adaha kormeerka marka ay qusayso, iyo hannaanada jawaab-celinta ee u oggolaanaya muwaadiniinta iyo daneeyeyaasha inay soo gudbiyaan cabashooyin isla markaana la socdaan horumarka dib-u-habaynta.

6.3 Maareynta Xogta iyo Nidaamka Daba-galka iyo Qiimeynta

Maareynta xogtu waa arrin lagama-maarmaan ah si loo hubiyo in xogta la uruuriyey loo adeegsaday geeddi-socodka kormeerka si ay qiimeyntu u noqoto mid tayo sare leh, lagu kalsoonaan karo, sax ah, ammaan ah, isla markaana si anshax leh loo maareeyey. Nidaamyo xogeed oo adag waxay taageerayaan go'aan-qaadasho ku salaysan caddeymo, dib-u-eegista waxqabadka, fahamka hay'adaha, iyo horumarinta barnaamijyada.

Si loo xaqiijiyo maareyn xogeed wax-ku-ool ah, tallaabooyinka soo socda ayaa la qaadayaa:

i. In la sameeyo nidaam dhexe oo ah daba-gal iyo qiimeyn si loola socdo hirgelinta Istiraatijiyadda;
ii. In la magacaabo u-qeybsanayaal daba-gal iyo qiimeyn ee dhammaan hay'adaha fulinta;
iii. In la mideeyo hal-beegga qalabka xog ururinta iyo warbixinnada hay'adaha oo dhan;
iv. In la xoojiyo hubaanshiyaha tayada xogta, saxnaanteeda iyo daba-galka warbixinnada aan dhammeystirnayn ama aan is-waafaqsanayn;
v. dhiirri-gelinta kaydin ammaanka ah iyo isticmaalka mas'uuliyadda leh ee xogta hirgelinta; iyo
vi. Horumarinta awood looxad-xogeedka (dashboard) si loo taageero falanqaynta-xilliyeysan, muuqaalaynta, iyo go'aan-qaadasho waqtigeeda ku dhacda.

6.4 Maareynta Khatarta

Hirgelinta Istiraatijiyadda 2026–2030 waxay la kulmi kartaa khataro la xiriira siyaasadda, maaliyadda, hay'adaha, amniga, iyo xiriirka. Khatarahan waxaa lagu maareynayaa aqoonsi hore, daba-gal joogto ah, hirgelin la jaan-qaadi karta duruufaha isbeddelaya, hannaano cad oo heerarka sare loogu gudbiyo arrimaha, iyo tallaabooyin sixid oo waqtigooda ku dhaca oo loo maro Heerarka Farsamada iyo Hoggaanka.

Jadwal 5: Khataraha iyo Talaabiinka yaraynta

Lr.	Khataraha waaweyn	Talaabooyinka Yaraynta
1	**Kheyraadka Maaliyadeed oo Xaddidan**	Abaabulidda iyo kala-duwidda ilaha maal-gelinta, ku darista hawlaha NACS miisaaniyadaha hay'adaha, iyo la shaqeynta bah-wadaagta horumarinta ee ku saabsan dib-u-habaynta mudnaanta leh.
2	**Karaanka Hay'adaha oo Xaddidan**	Dhisidda karaanka hay'adeed iyo farsamo, magacaabidda qaabilsanayaal, mideynta agabka warbixinta, iyo bixinta taageero hirgelin oo bar-tilmaameed leh.
3	**Caqabado Amni**	Qaadashada habab hirgelin dabacsan oo la jaan-qaadi kara duruufaha, ay ku jiraan daba-

		gal fogaan ah, dib-u-eegisyo marxalado ah, iyo ka-qeyb-gal goobeed xasaasi u ah xaaladaha jira.
4	**Faafinta xog khaldan, siyaasadeyn, ama kalsooni-darro dadweyne oo wiiqaysa dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa**	In la adeegsado xiriir dadweyne oo firfircoon, daabacaad joogto ah oo ku saabsan horumarka, warbixinno sax ah oo dadweyne, ka-qeyb-galka daneeyeyaasha, iyo hannaano adag oo jawaab-celin iyo cabashooyin ah.

6.5 Xiriirka iyo ka-qeyb-galka Daneeyeyaasha

Xiriirka iyo ka-qeyb-galka daneeyeyaashu waxay taageerayaan daba-galka waxqabadka, isla-xisaabtanka, wacyi-gelinta dadweynaha, daah-furnaanta, iyo go'aan-qaadasho ku salaysan caddeymo. Habka xiriirku wuxuu xaqiijinayaa wadaagis nidaamsan oo macluumaad lala yeesho hay'adaha, bulshada rayidka ah, bahda waxbarashada, warbaahinta, saaxiibada caalamiga, iyo muwaadiniinta.

- Baahinta warbixinnada guulaha ee loo gudbinayo daneeyeyaasha;
- Ololeyaal wacyi-gelin iyo xiriir dadweyne oo ku saabsan mudnaanta iyo guulaha la-dagaallanka musuq-maasuqa;
- La-shaqeynta bulshada rayidka, hay'adaha tacliinta, warbaahinta, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, iyo saaxiibada Caalamiga; iyo
- Hababka lagu helo fal-celinta muwaadiniinta iyo cabashooyinkooda oo taageera la-xisaabtanka dawladda.

Xiriirka iyo ka-qeyb-galka dadweynaha ee hoos yimaada Istiraatijiyadda waa inay sidoo kale tixgeliyaan xogta khaldan, sheekooyinka siyaasadaysan, iyo jawiga xogeed ee kalsoonidu hooseyso, kuwaasoo wiiqi kara fahamka dadweynaha ee dib-u-habaynta la-dagaallanka musuq-maasuqa isla markaana dhaawici kara kalsoonida muwaadiniinta ee hay'adaha. Sidaa darteed, xiriir firfircoon, sax ah, oo joogto ah ayaa muhiim u noqonaya ilaalinta kalsoonida dadweynaha iyo muujinta horumarka la gaaray.

6.6 Habka Dib-u-eegista iyo Wax-ka-barashada

Hababka dib-u-eegista iyo wax-ka-barashadu waxay dhiirri-gelinayaan milicsiga joogtada ah ee waxqabadka, maareyn la jaan-qaadi karta duruufaha, iyo horumarinta joogtada ah ee istiraatijiyadaha hirgelinta. Heerka Farsamada wuxuu adeegsanayaa xogta daba-galka, jawaab-celinta hay'adaha, natiijooyinka qiimeynta, iyo aragtiyaha daneeyeyaasha si loo aqoonsado casharrada laga bartay loona soo jeediyo tallaabooyin sixid ah. Heerka Hoggaanka wuxuu tixgelinayaa arrimaha istiraatijiyadeed ee u baahan jihayn siyaasadeed, tallaabo hay'adeed, ama go'aan-qaadasho heer sare ah.

- Shirar dib-u-eegis istiraatijiyadeed oo sanadle ah si loo qiimeeyo horumarka la iskuna raaco mudnaanta sanadka xiga;
- diiwaan-geliinta casharrada laga bartay iyo hab-dhaqannada wanaagsan;

- maareyn la jaan-qaadi karta duruufaha oo ku salaysan caddeymo, falanqayn khataro, iyo xogta waxqabadka; iyo
- horumarinta joogtada ah ee istiraatijiyadaha hirgelinta, qaab-dhismeedyada iskuduwidda, iyo nidaamyada warbixinta.

Lifaaqyo

Lifaaq 1: ISTIRAATIJIYADDA 2026–2030 Jadwalka Kharashka, Hirgelinta, Daba-galka iyo Qiimeynta.

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
Ujeeddo Istiraatijiyeedka 1aad: In la xoojiyo qaab-dhismeedka sharci iyo siyaasadeed															
In la dhiso qaab-dhismeed sharci iyo siyaasadeed oo dhammeystiran, la fulin karo, lana jaan-qaadaya heerarka caalamiga ah	Wax-ka-beddel lagu sameeyo sharciyada jira ee la-dagaallanka musuq-maasuqa	Sharciyada muhiimka ah wax-ka-beddel ayaa lagu sameeyey: Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, iyo Xeerka Caddeymaha	1	1	1	1	-	Qaab-dhismeed sharci iyo siyaasadeed oo wax-ku-ool ah isla markaana waafaqsan heerarka caalamiga ah	Tirada Sharciyada Wax-laga-bedelay	**WCAD** Baarlamaanka	5	5	5	5	-
	In la meel mariyo sharciyo cusub oo la-dagaallanka musuq-maasuqa, iyadoo loo hagaansamaayo waajibaadka caalamiga ah.	Sharciyada muhiimka ah ee ay tahay in la qoro: Xeerka Ilaalinta Wargeliyaha Musuq-maasuqa, Xeerka Dembiyada Musuq-maasuqa, Xeerka Shaacinta Hantida iyo Ka-	1	1	1	1	-		Tirada Sharciyada La qoray		5	5	5	5	-

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		hortagga Kobaca Hantida Sharci-darrada ah, Xeerka Hanti Soo-celinta iyo Dakhliga Ka Soo Baxay Dembiyada, Xeerka Anshaxa, Daah-furnaanta iyo Mas'uuliyadda Shaqaalaha Dawladda, iyo Xeerka Hufnaanta Ganacsiga iyo La-Dagaallanka Musuq-maasuqa ee Ganacsiyada Gaarka ah												
	Maxaliyeynta Heshiisyada Caalamiga ah	Sharciyada muhiimka ah ee la waafajiyey UNCAC iyo AUCPCC	-	1	1	-	-		Tirada Sharciyada La waafajiyey		-	4	4	-	-
		Dib-u-eegista hirgelinta	1	-	-	-	-				-	2	-	-	-

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		UNCAC ee la dhammeystiray													
		Gudbinta dokumentiga ku-biirista ee AUCPCC	-	1	-	-	-		Dhigaalinta dokumentiga la ansixiyey						
Ujeeddo Istiraatijiyeedka 2aad: In la xoojiyo hab maamulka dadweynaha iyo qaab-dhismeedka hay'adaha															
In la dhiso hay'ado lagu kalsoonaan karo, si wax-ku-ool ah u shaqeeya, isla markaana leh waajibaad sharciyeed oo cad.	Dib-u-dhisidda Guddiga la-dagaalanka Musuq-maasuqa	Guddiga la-dagaallanka Musuq-maasuqa oo dib loo hawl-geliyey	1	-	-	-	-	Hay'adaha la-dagaallanka musuq-maasuqa oo si buuxda u hawl-gala wax-ku-ool ah heer qaran iyo heerarka hoose; isla markaana si hufan loo baaro eedeymaha musuq-maasuqa.	Guddiga La-dagaallanka Musuq-maasuqa oo si buuxda u hawl-gala. Tirada eedeymaha musuq-maasuqa ee la baaray. Tirada dacwadaha musuq-maasuqa oo si guul leh loo soo	**WCAD** Wasaaradda Maaliyadda	38.5	-	-	-	-
		Miisaaniyad iyo kaabayaal xafiiseed oo la qoondeeyey	1	-	-	-	-				7.7	7.7	7.7	7.7	7.7
		Shaqaalihii Guddigii hore ee La-dagaallanka Musuq-maasuqa oo dib loo meeleeyey.	1	-	-	-	-				-	-	-	-	-
		Tirada shaqaale cusub oo la shaqaaleysiiyey lana tababaray.	5	10	15	20	30				4.5	9	13.5	18	27

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
									gabagabeeye y.						
	In la dhiso unugyada hufnaanta DXDF	Tirada unugyada hufnaanta ee DXDF ee la dhisay lana hawl-geliyey.	-	-	3	4	-		Unugyada hufnaanta oo laga dhisay Dawlad-goboleedyad a iyo heer degmo.	Guddiga la-daga alan ka mus uq-maas uqa WCAD DXDF Wasaara dda Maal iyad da	-	-	77	77	150
		Tirada shaqaale cusub ee la shaqaaleysiiyey lana tababaray.	-	-	15	20	10				-	-	25	33	17
		Tirada unugyada lagu qalabeeyey agab iyo xafiisyo shaqo.	-	2	3	-	-				-	11.4	17.1	2.9	2.9
	In la xoojiyo shaqo-wanaagga, madax-bannaanida, kheyraadka, qaab-dhismeedka,	Qaab-dhismeedka iyo waajibaadka hay'adaha oo dib loo eegay lana xoojiyey, oo ay ku jiraan garsoorka, sharci-	-	1	-	-	-		Qaab-dhismeedka urureed ee hay'adaha muhiimka ah ee la caddeeyey.	**Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud** WCAD Dhamaan Wasaaradaha,	-	154	-	-	-

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	waajibaadka sharciyeed, iyo hannaanka iskuduwidda hay'adaha.	dejinta, fulinta, iyo hay'adaha kale ee dawladda.							boqolleyda hay'adaha leh waajibaad sharciyeed si cad loo qeexay.	Waaxaha, Wakaaladaha Golaha Sare Garsoorka Wasaaradda Maaliyadda Guddiga Shaqaalaha Rayidka					
		Jaantusyada hay'adeed iyo khadadka warbixinta la ansixiyey.	1	-	1	-	-			Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha	1.5	-	1.5	-	-
		In la diyaariyo lana hirgeliyo hal-beegyada hab-raacyo shaqo (SOPs)	-	1	-	-	-			Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha					
		Nidaamyo maareyn waxqabad natiijo-raac ah oo la diyaariyey	-	-	1	-	-			Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha					

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		Hannaanka iskaashiga dhammaan hay'adaha, oo ay ku jiraan heer dawlad-goboleed iyo heerarka-hoose, waa la sameeyey	1	-	-	-	-			WCAD Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha					
	Dhisidda Golaha Sare ee Garsoorka	Golaha Sare ee Garsoorka oo la dhisay								**Xafiiska Xeer-ilaaliyaha** WCAD					
	In la diyaariyo qaab-dhismeedka sharci, lana dhiso Xafiiska Gardoonka (Ombudsman-ka).	Qaab-dhismeedka sharci iyo Xafiiska oo la dhisay	-	-	1	-	-			**WCAD**	-	-	70	-	-
In la dhiirri-geliyo hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo daacadnimada	La meel-mariyey lana hawl-geliyey Sharciga Shaqaalaha Rayidka	Wax-ka-bedelka Sharciga la meel-mariyey lana hawl-geliyey ee Shaqaalaha Rayidka	-	1	-	-	-	kor loo qaaday anshaxa iyo hufnaanta shaqaalaha dawladda.	%hay'adaha dadweynaha ee dhaqan-geliyey xeerarka anshaxa.	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	25	-	-	-	-

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
ka dhex jirta hay'adaha.								Hay'adaha dawladdu waa mid xirfad leh, ku dhisan mudnaan iyo karti (merit), isla markaana leh isla-xisaabtan	%hay'adaha dadweynaha ee sameeya kormeerrada u-hoggaansanaanta hufnaanta.						
		% shaqaalaha dawladda ee saiixa heshiisyada waxqabad ee sanadlaha ah.	20	40	60	80	100	Maareynta kheyraadka aadanaha (HR) oo ku salaysan mutaysi (merit) iyo hufnaan.	Dalacsiinta shaqaalaha oo ku salaysan qiimeyn waxqabad oo rasmi ah.	Guddiga Shaqaalaha Rayidka					
		% jagooyinka bannaan ee si fagaare ah loo shaaciyey.	20	40	60	80	100	Maareynta kheyraadka aadanaha (HR) oo ku salaysan mutaysi (merit) iyo daah-furnaan.	Shaqaaleysiinta oo loo maro hab-raac tartan furan oo cadaalad ah	Guddiga Shaqaalaha Rayidka					
		% cabashooyinka la xiriira Shaqaalaha oo la	20	40	60	80	100	Maareynta kheyraadka aadanaha oo	Cabashooyinka la xiriira maareynta	Guddiga Shaqaalaha					

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		xalliyey marka loo eego kuwa la helay						ku salaysan karti iyo daah-furnaan.	kheyraadka aadanaha (HR) ee la helay lana xalliyey	Rayidka Xafiiska Gardoonka (Ombudsman)					
		%Wasaaradaha/hay'adaha fulinaya Nidaamka Macluumaadka Maareynta Kheyraadka Aadanaha	20	40	60	80	100	Maareynta kheyraadka aadanaha oo ku salaysan karti iyo daah-furnaan.	Shaqaaleysiin lagu sameeyo madal dhijitaal ah oo suurta-gelinaysa raad-raac iyo kormeer	Guddiga Shaqaalaha Rayidka					
	In la xoojiyo hirgelinta Xeerarka Anshaxa iyo Nidaamka Asluubta ee dhammaan hay'adaha.	Tirada hay'adaha hirgeliyey Xeerka Anshaxa iyo Asluubta.	-	50	80	90	100			Guddiga Shaqaalaha Rayidka	-	38	62	69	77
	In la horumariyo lana dhaqan-geliyo nidaamka	Nidaamka shaacinta hantida, oo ay la socdaan hab-raacyada xaqiijinta iyo	-	-	1	-	-			Guddiga madaxa-bannaan ee la-dagaalanka	-	-	38	-	-

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	shaacinta hantida, oo ay la socdaan hab-raacyo xaqiijin iyo ciqaab ee dhammaan hay'adaha.	ciqaabta, oo la hirgeliyey lana hawl-galiyey.								musuq-maasuqa Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha DXDF					
		Tirada shaqaalaha dawladda ee shaaciyey hantidooda	-	-	2000	3000	3000				-	-	-	-	-
	In kor loo qaado daah-furnaanta bixinta adeegyada.	% Hay'adaha dawladda ee baahiya xogta	20	40	60	80	100	Kordhinta isla-xisaabtanka mas'uuliyiinta dawladda.	%Kordhinta tirada warbixinnada baarista (audit) ee la baahiyey	Xafiiska Hantidhawrka Guud					
		Tirada hay'adaha leh Axdiyada adeegga muwaadiniinta ee la baahiyey lana hawl-galiyey.	20	30	40	50	60	kor-u-qaadista daah-furnaanta adeegga dadweynaha.	% Kordhinta tirada hay'adaha dawladda ee leh xeerarro adeeg oo shaqeynaya.	Xafiiska Hantidhawrka Guud	60	90	120	180	

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		Tirada hay'adaha leh habab lagu gudbiyo cabashooyinka	20	30	40	60		La kobciyey daah-furnaanta adeega dadweynaha.	% kordhinta Tirada hay'adaha ee leh habab lagu gudbiyo cabashooyinka.	Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa	30	45	60	90	
		Tirada cabashooyinka la xalliyey													
	In la sameeyo sahmin sanadleah oo lagu cabbiro aragtida muwaadiniinta ee musuq-maasuqa, lana	Tirada sahannada sanadlaha ah ee lagu cabbiro aragtida muwaadiniinta ee musuq-maasuqa ee la sameeyey		1	1	1	1	kor-u-qaadista daah-furnaanta iyo kalsoonida muwaadiniinta	% Kor u kac ku yimaadda aragtida muwaadiniinta ee ku saabsan musuq-maasuqa.	Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa		135	140	145	150

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	daabaco natiijooyinkeeda														
Ujeeddo Istiraatijiyeedka 3aad: In la xoojiyo fulinta, baarista, iyo hufnaanta garsoorka.															
Kobcinta baaritaanka, dacwad-oogista, iyo xukun ka gaarista musuq-maasuqa.	Xoojinta isku-xirka hay'adaha kala duwan.	Hab-raaca iskaashiga oo la diyaariyey.	1	-	-	-	-	La-hormariyey tayada baaritaanka iyo oogista dacwooyinka musuq-maasuqa.	One framework developed. Hal qaab-dhismeed oo la diyaariyey	WCAD, Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka	40	-	-	-	-
	Dhisidda karaanka baaritaanka foreensigga iyo baaritaannada guud.	Shaybaarrada foreensigga ee hay'adaha baaritaanka oo la dhisay lana qalabeeyey.	-	1	1	-	-			CID	153	-	38	-	38

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		Tirada tababbarka gaarka ah ee baaritaannada ciolmiyeysan (forensic) ee la qabtay	-	2	2	2	2			Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa	-	23	23	23	23
		Tirada saraakiisha la tababaray	-	10	10	10	10				-				
		Tiirada dacwooyinka baaritaannada cilmiyeysan (forensic) ee la dhammeystiray	-	30	30	30	20				-	230	230	230	153
	Bixinta tababarro ku saabsan musuq-maasuqa iyo dembiyada dhaqaale oo la siiyo xeer-ilaalinta iyo garsooreyaasha	kor-u-qaadista tayada oogista dacwooyinka musuq-maasuqa	1	1	1	1	1		Tirada tababarrada dhisidda karaanka ee la sameeyey		30	30	25	30	10

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	Iswaafajinta hannaannada fulinta	Dib-u-eegista iyo horumarinta qaab-dhismeedyada fulinta.	1	1	-	-	-		Tirada hab-raacyada shaqo, hagayaal, iyo qaab dhismeedyada dib-u-eegista iyo horumrinta la sameeyey.		25	24	-	-	-
	Sameynta maxkamada gaar ah oo la-dagaalan musuq-maasuq	Sameynta gaaryeelid la dagaalan musuq-						Si waqtiyeysan u dhamayn musuqa ee Maxkamada ha	Waqtiga Celceliska ee Dhammeystirka Dacwooyinka	WCAD Garsoorka					
	In la dhiso lana hawl-geliyo madallo wargelin	Waxaa dhisay lana hawl-geliyey madallo wargelin	-	-	1	-	-			Xafiiska Xeer-ilaaliyaha	-	-	39	10	10

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	musuq-maasuqoo qarsoodi ah	musuq-maasuqoo qarsoodi ah								Guud ee Qaranka Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa CID WCAD					
		Tirada eedeymaha ay soo gudbiyeen madallada qarsoodiga ah.	-	-	50	100	150				-	-	-	-	-
Ujeeddo Istiraatijiyeedka 4aad: Hay'adaynta Hababka hufnaanta iyo isla-xisaabtanka.															
Dhex-galin Anshax, Hufnaan, iyo Isla-xisaabtan	Hirgilinta Barnaamijyo Anshaxeed oo Joogto ah.	Tirada barnaamijyada anshaxeed ee la sameeyey	2	4	6	8	10	Nidaamyada hufnaanta iyo anshaxa waa kuwo shaqeynaya oo waaraya	Barnaamijyada joogtadah ee anshaxa iyo hufnaanta.	**WCAD** Wasaaradda Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha	19	38	56	75	94
		Tirada hay'adaha la gaaray	20	30	40	50	60								

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		Tirada dadka la wacyi-geliyey	40	60	80	100	120								
	Magacaabista Saraakiisha Hufnaanta ee Hay'adaha.	Tirada saraakiisha hufnaanta ee la magacaabay	10	20	30	40	50			**WCAD** Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, Wakaaladaha	5	10	15	20	25
Kobcinta Ka-hortagga Musuq-maasuqa ee hay'adaha Dawladda iyo kuwa Gaarka ah.	Sameynta Qiimeynta Khataraha Musuq-maasuqa ee Hay'adaha Dawladda.	Tirada hay'adaha dawladda ee sameynaya qiimeynta khatarta musuq-maasuqa	-	40	60	80	100	Yareynta nuglaanshaha iyo daldaloolada khatarta sare leh	% Yareynta nuglaanshaha iyo daldaloolada khatarta sare leh	Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa Dhamaan wasaaradaha, Wakaaladaha iyo Xfiisyada Madaxa-bannaan DXDF		40	50	80	80
	Dhisidda guddi-hoosaadyo ka-hortagga musuq-maasuqa ee	Tirada wasaaradaha iyo wakaaladaha leh guddiyo u xilsaaran ka-hortagga musuq-maasuqa	40	60	80	100	100	Kobcinta hufnaanta	% hoos-u-dhaca tirada dacwooyinka musuq-maasuqa	Dhamaan wasaaradaha, Wakaaladaha iyo Xafiisyada Madaxa-bannaan	20	30	40	50	50

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	hay'adaha dawladda														
	Hirgelinta iyo qalabeynta nidaam isku-dhafan oo dhammeystiran (end-to-end), kaasoo adeegsanaya tiknoolojiyada blockchain si loogu maamulo maaliyadda guud, qandaraas-bixinta danabaysan, iyo maamulka dakhliga.	Tirada wasaaradaha iyo wakaaladaha lagu daray nidaamka xog-wadaagga ee blockchain-ka.	-	5	10	15	25	Maamul maaliyadeed ku dhisan daah-furanaan iyo tashiil, Hab-raac wax iibsi oo daah-furan Maamulka canshuuraha iyo kastamada oo daah-furan, laguna kalsoonaan karo.	% hoos u dhac kharashyada mashaariicda la buun-buuniyo % hoos-u-dhaca cabashooyin ka la xiriira habka qandaraas-bixinta % kororka saamiga canshuurta marka loo eego Wax-soo-saarka Guud ee dalka	Xafiiska Ra'iisul wasaaraha Wasaaradda Maaliyadda Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda Xafiiska Hantidhawrka Guud DXDF	-	3000	300	300	300
	In hay'adaha rayidka la siiyo tababarro ku	Tirada shirkadaha gaarka loo	100	150	200	250	300	Kobca ku yimid u-hoggaansanaa	% Koboca ku yimaadda tilmaameha	Guddiga Madaxa-bannaan ee	20	30	40	50	60

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	saabsan ka-hortagga musuq-maasuqa	leeyahay ee la siiyey tababarka ka-hortagga musuq-maasuqa						nta anshaxa iyo hufnaanta	cabbirka aragtida musuq-maasuqa	La-dagaalanka Musuq-maasuqa WCAD					
Xoojinta daba-galka barnaamijyada la-dagaallanka musuq-maasuqa	Magacaabista u-qeybsanayaasha ee daba-galka iyo qiimeynta ee hay'adaha dawladda.	Tirada hay'adaha magacaabay u-qeybsanayaasha daba-galka iyo qiimeynta	20	30	40	50	60			**WCAD** Wasaaradda Qorsheynta Maal-gashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dhamaan Wasaaradaha, Waaxaha, iyo Wakaaladaha	15	23	31	38	46
		Tirada saraakiisha loo magacaabay inay noqdaan u-qeybsanayaasha daba-galka iyo qiimeynta	20	30	40	50	60				-	-	-	-	-
		Tirada shaqaalaha loo tababaray hannaanka daba-galka iyo qiimeynta	20	30	40	50	60				24	36	48	60	72
	diyaarinta nidaam dhammeystiran oo loogu talo-	La-diyaariyey nidaam dhexe oo loogu talo-galay daba-galka iyo	-	1	-	-	-				-	154	-	-	-

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	galay daba-galka iyo qiimeynta, oo leh looxad xogeed (dashboard)	qiimeynta oo leh looxad xogeed (Dashboard)													
Ujeeddo Istiraatijiyeedka 5aad: Xoojinta ka-qeyb-galka Dadweynaha iyo Rabitaanka Siyaasadeed															
In la xoojiyo ka-qeyb-galka muwaadiniinta iyo taageerada siyaasadeed	In la hirgeliyo ololeyaal wacyi-gelin dadweyne	Tirada ololeyaasha warbaahinta ee la sameeyey	4	4	4	4	4	Kobca ku yimid u-hoggaansanaanta anshaxa iyo hufnaanta, Kor-u-qaadista ogaalka muwaadiniinta ee ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa	% Koboca ku yimaadda tilmaamaha cabbirka aragtida musuq-maasuqa	Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa Unugga Qaran ee Iskuduwidda Hufnaanta WCAD Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka					
		Tirada kulammada wada-tashiga	8	16	24	32	40			WCAD Guddiga Madaxa-bannaan ee	18	36	55	74	92

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
		bulshada ee la qabtay								La-dagaalanka Musuq-maasuqa Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka					
		Tirada gaarista baraha bulshada ee la sameeyey	4	8	8	8	8				10	20	20	20	20
		Tirada dood-cilmiyeedyada dadweynaha ee la qabtay	2	4	4	4	4			WCAD Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka	25	50	50	50	50
	Ka qeyb-gelinta bulshada rayidka iyo	Tirada iskaashiyada lala sameeyey ururada bulshada rayidka ah	10	20	30	40	50	Kor-u-qaadista u-hoggaansanaanta anshaxa iyo hufnaanta,	% Koboca ku yimaadda tilmaamaha cabbirka aragtida	Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka	25	50	75	100	125

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	aqoonyahannada							Kor-u-qaadista ogaalka muwaadiniinta ee ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa	musuq-maasuqa	Musuq-maasuqa Unugga Qaran ee Iskuduwidda Hufnaanta					
		Tirada iskaashiyada lala yeeshay jaamacadaha iyo hay'adaha kale ee waxbarashada.	5	10	15	20	25	Kor-u-qaadista u-hoggaansanaanta anshaxa iyo hufnaanta. Kor-u-qaadista ogaalka muwaadiniinta ee ku aaddan la-dagaallanka musuq-maasuqa	. Tirada cilmi-baarista iyo tababarrada wadajirka ah ee ku saabsan la-dagaallanka musuq-maasuqa	Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa Unugga Qaran ee Iskuduwidda Hufnaanta WCAD	10	20	30	40	50

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
	Xoojinta rabitaanka Siyaasadeed	Tirada fagaarayaasha u-qareemidda ee heerka sare ah ee loo sameeyey la-dagaallanka musuq-maasuqa	2	2	2	2	2	La-dagaallanka musuq-maasuqa oo yeesha mudnaan iyo hortabin qaran	Ansixinta istiraatijiyada qaran ee la-dagaallanka musuq-maasuqa Meel-marinta sharciyada la-dagaallanka musuq-maasuqa. In ajandaha la-dagaallanka musuqa laga dhex siiyo qorshaha qaranka mudnaan In dib loo dhiso Guddiga madaxa-	Wasaaradda **Cadaaladda** iyo Arrimaha Dastuurka Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gelinta iyo Horumarinta Dhaqaalaha Dawladdaha Xubnaha ka ah Dawladda federaalka Guddiga Madaxa-bannaan ee La-dagaalanka Musuq-maasuqa Unugga Qaran ee Iskuduwidda	25	50	50	50	50

Istiraatijiyado	Hawlo	Tilmaameyaal Wax-qabad	Bar-tilmaamyada Natiijada					Saameynta la filayo	Tilmaameyaal Saameyn	Mas'uuliyadda	Miisaaniyadda La-filayo (Doolar maraykan $ Kunleey)				
			2026	2027	2028	2029	2030				2026	2027	2028	2029	2030
									bannaan ee la-dagaallanka Musuq-maasuqa	Hufnaanta WCAD)					
		Cadadka qoonddo miisaaniyadeedka sanadka ee loogu talo-galay la-dagaallanka musuq-maasuqa.						Rabitaan siyaasadeed	Qoondaynta miisaaniyadda ee la-dagaallanka musuq-maasuqa	Wasaaradda Maaliyadda	641.2	4.4861	1,946.8	1,932.6	2,049.6